CUMAR AL ODAH

# WAXAAN AHAY ADDOONKAAGA

BECAUSE I AM YOUR SLAVE لأني عبدك



TARJUME
MUXAMMAD CABDI FAARAX

# لأني عبدك

# WAXAAN AHAY

# ADDOONKAAGA

Cilmiye Books

# WAXAAN AHAY ADDOONKAAGA

## Qoraa: Cumar Al-Cawda

## Tarjume: Muxammad Cabdi Faarax

# Hibeyn

Waxaan u hibeynayaa Midka uu u baahdo qofka awoodda leh, qofka daciifka ahna uu sababtiisa ku xoogeysto.

Midka aan xaggiisa u orodno innaga oo ka cabsaneyno, haddana jecel oo rajeyneyno.

Midka qalbiyada rogroga, gacantiisana ay wax walba ku jiraan.

Waxaan u hibeynayaa gacaliyahayga Ilaahayga weyn.

# MAHADCELIN

## Tarjumaha Buugga

***

Mahad dhammaanteed waxay u sugnaatay Allaah (SWT) ee i waafajiyay tarjumaadda buuggan qiimaha badan.

Waxaan si gaar ah ugu mahadcelinayaa waalidiintayda, gaar ahaan ayeeyaday Saynab Faarax Rooble, oo aan xasuusanahay ducadeeda iyo garab istaaggeeda, Sidoo kale, mahad aan la koobi karin ayaan u dirayaa macallinkayga Ustaad Xasan Muxammad Sabriye, saaxiibaday Muxammad Shariif Cabdiraxmaan "Cadow" iyo Amal Muxammad Xasan, iyo dhammaan asxaabteyda kale ee igu dhiirrigeliyay hawshan.

Ugu dambeyn, mahad gaar ah ayaan u dirayaa akhristaha sharafta leh, anigoo rajeynaya in buuggan uu kuu noqdo mid faa'iido leh.

Mahadsanid.

# HORDHAC

***

Magaca Alle ayaan ku billaabay iyo maamusidda Raxmaanka naxariista guud naxariista iyo dhimriyaha naxariista gaara naxariista.

Alle ha amaanno Sayyidkeenna Muxammad, ehelkiisa iyo asxaabtiisa, oo ha barakeeyo.

Mahad oo idil waxa ay u sugnaatay Ilaaha kaliga ah, Qaadirka ah oo wax walba ka adag, deeqsiga ah oo dambiyada dhaafa, Qaddarka qorsheeya, Habeenka iyo Maalinta isdul roga, si ay cibro ugu noqoto dadka qalbiyada leh iyo kuwa aragga wanaagsan...

Alle ayaan uga mahadinayaa mahad aan la soo koobi karin dhammaan nimcooyinkiisa, Waxaana weydiisanayaa in uu ii siyaadiyo fadligiisa iyo deeqdiisa...

Waxaan qiraya Ilaah xaq lagu caabudo inaanu jirin Alle mooyee, si dhab ahna waxaan u yaqiinsanahay kalinimadiisa iyo in ay qasab tahay khalqiga oo idil in ay u hoggaan samaan rabitaankiisa.

Waxaan sidoo kale qirayaa in Muxammad yahay adoonkiisa iyo rasuulkiisa, iyo xabiibkiisii uu ka doortay khalqigiisa, kan ugu sharafta badan kuwii hore iyo kuwii dambeba, kan ugu sharaf badan makhluuqa oo dhan, kan ugu nadiifsan oo ugu dhameystiran, kan ugu aqoonta badan Alle xaggiisa, ugu cabsida badan, ugu caabudidda badan, ugu khushuuca badan, ugu wanaagga badan, kan ugu akhlaaqda wanaagsan, kan ugu naxariista badan mu'miniinta uguna dhimrin badan...

Naxariis iyo Nabadgelyo korkiisa ha ahaato Nabigeenna Muxammad iyo Nabiyadii ka horreeyay, ehelkoodii iyo asxaabtoodii iyo dhammaan kuwii si wanaagsan u raacay ilaa maalinta qiyaamaha, mar kasta oo la xuso iyo markasta oo aan la xusinba.

Intaa kadib

Waa xaalad aad u weyn, waa maqaam aad u sarreeya, waana arrin adag, kitaabada ka hadlaayo kitaabka Alle malala barbardhigi karo kuwa kale, waayoo kutubtaas ma aha kuwo lagu curiyay mala awaal, si fududna lagu akhriyi karo balse waa daawo qalbiga bogsiisa.

daawaduna waxtar yeelan mayso haddii aysan bogsasho laheyn.

Haddaba Alle mahaddii waxaan kuwada safri doonna buuggaan si aan ugu jiheysano caalam qurxoon oo inagu xira Alle.

Buuggaan waxaan ku xusay aayado si qoto dheer i taabtay, Qur'aanka dhammaantiis waa khayr iyo barako, balse waxa jira aayado qofka istaajiya una muuqda sidii in la soo dejiyay waqti xaadirkaan si ay kuu dajiso oo aad ugu nasato.

Qeybo badan oo Qur'aanka kamid ah waa kuwo ay fahmi karaan dadka carabiga yaqaano, mu'minkuna wuu ka fikiraa kelmadaha Alle, marka uu akhriyo Qur'aanka waxa uu ka dhex arkaa aayad kasta nuur iyo iftiin wuxuuna ka helaa hanuun, laakiin qofka ka jeedsaday ee aan xitaa u khushuucin marka la akhrinayo waxaa looga baqanaya Mooganaan haddii uusan kasoo laaban oo uusan ku cibra qaadan aayadaan

﴿ أَفَلَا يَتَدَبَّرُونَ الْقُرْآنَ أَمْ عَلَىٰ قُلُوبٍ أَقْفَالُهَا ﴾

"Miyeyna Quraanka u firsanin (si dhab ah) mise quluubtooda daboolan"

Buuggaan waxaan u qoray si aan u taabto qalbiyada dadka, ma aha tafsiir qoto dheer sida kutubta tafsiirka caadiga ah balse waa sharax fudud oo ka dhigaya in dhalinyarada maanta ay si sahlan u fahmaaan macnaha aayadaha.

Aayadaha aan buuggaan ku xusay waxay igu qasbeen inaan dul istaago, marka aan aayad walba dul istaagana qalbigeyga ayaa jilcayay, markaas ayaan maskaxdeyda ka qoray waxaan dareemay iyo waxyaabaha aan ka faaiiday, Aayadaha Alle waxay bogsiiyen dhaawaceyga, waxay daaweyeen walwalkeyga, "waan ku ajiibay Rabbigeygoow!"

Akhristaha buuganow, ogoow in buuggan hortada yaallo uu yahay fikrad iyo waxyaabo maskaxdeyda kusoo dhacay, waxaa dhici karta in aayad ay ku xusuusiso wax kale taas oo aan macnaheeda aheyn in aayadahaas si qaldan loo fasiray, Taasi ma aha macnaha Qur'aanka ayaa la baddelay

balse waa aayad qalbigaaga xusuusin u noqotay aadna dareentay kadibna aad wax ka faa'iidaysatay.

Intaa Ka Dib...

Kahor intaadan bogga xiga u gudbin...

Waxaan Ilaahay ka baryayaa in aad buuggan ka hesho waano baraarujisa iimaankaaga, bishaaro aad ku nasto iyo fikrad kugu hagta jidka toosan.

Bismillaah waxaan talla saaranaya Alle, awood iyo xeeladna malihin tan Alle mooyee

Waayo waxaan ahay addoonkaaga

***

Tilmaan midda ugu sharafta badan ee lagu tilmaamo qof waa "addoonimada Allaah swt", sidaas darteed, Rabbigeennu waxa uu ugu wacay Nebi Muxammad (N.N.K.H) mid kamid ah xaaladaha ugu sharafta badan, waxa uu yiri:

﴿ سُبْحَانَ الَّذِي أَسْرَىٰ بِعَبْدِهِ ﴾

"Waxaa nasahan (ceeb ka fog) rabbiga dheelmiyay addoonkiisa"

Ma uusan oran Nebigiisa ama rasuulkiisa.

Sidoo kale Allaah swt isaga oo ka warbixinayo Nebigiisa waxa uu yiri:

﴿ وَأَنَّهُ لَمَّا قَامَ عَبْدُ اللَّهِ ﴾

"Markuu istaagay addoonkii Alle (Nebiga)"

Waxa uu ku tilmaamay addoonimo, waayoo adoonimada ayaa ah aas-aaska sharafta qofka banii’aadamka ah.

Markii uu hadlayay Nebi Ciise cs isaga oo yar waxa uu yiri:

﴿ قَالَ إِنِّي عَبْدُ اللَّهِ آتَانِيَ الْكِتَابَ وَجَعَلَنِي نَبِيًّا ﴾

"Wuxuu yiri (Ciise) waxaan ahay addoonkii Alle wuxuuna isiiyay kitaab (Injiil)"

Rabbiyoow maadaama aan ahay addoonkaaga waan ku caabudaya.

Waxaan ahay addoonkaaga faqiirka ah ee adiga kuu baahan, tabarta-daran ee hor taagan awooddaada iyo boqortooyadaada, jaahilka ka ah cilmigaaga baaxadda leh ee aad ku koobtay wax walba...

ilaahoow ii danbi dhaaf, taasina waa rumeynta hadalkaaga oo aad tiri:

﴿ إِنَّ اللَّهَ لَا يَغْفِرُ أَن يُشْرَكَ بِهِ وَيَغْفِرُ مَا دُونَ ذَٰلِكَ لِمَن يَشَاءُ ۚ ﴾

Alle ma dhaafo cid kale in lala wadaajiyo cibaadada, wuxuuse dhaafaa wixii kasoo hadhay cidduu doonno" Maadaama aan ahay addoonkaaga waad i naxariisaneysaa, taasina waa rumeynta hadalkaaga oo aad tiri:

﴿ قُلْ يَا عِبَادِيَ الَّذِينَ أَسْرَفُوا ﴾

"Waxaad dhahdaa Nebiyoow addoomadeyda ku xadgudbay naftooda"

Maadaama aan ahay addoonkaaga, ducadeyda waad aqbaleysaa, taasina waa rumeynta hadalkaaga oo aad tiri:

﴿ وَإِذَا سَأَلَكَ عِبَادِي عَنِّي فَإِنِّي قَرِيبٌ ﴾

"Haddii ay addoomadeydu xaggeyga wax kaa weydiiyaan, waan udhawahay aniga"

Maadaama aan ahay addoonkaaga, wax walba waad iigaga filnaaneysaa, taasina waa rumeynta hadalkaaga oo aad tiri:

﴿ أَلَيْسَ اللهُ بِكَافٍ عَبْدَهُ ﴾

"Miyuusan Alle aheyn mid ku filan addoonkiisa"

Maadaama aan ahay addoonkaaga adiga ku rumeysan, waad I ilaalineysaa, taasina waa rumeynta hadalkaaga oo aad tiri.

﴿ إِنَّ اللَّهَ يُدَافِعُ عَنِ الَّذِينَ آمَنُوا ﴾

"Alle wuu difaacaa kuwa rumeeyay xaqqa"

Maadaama aan ahay addoonkaaga, marna ma quusanaayo, xitaa haddii ay baahiyaheyga iyo murugteydu gaaraan heer kasta, waad ii fulin doontaa, waadna iga farxin doontaa, taasina waa rumeynta hadalkaaga oo aad tiri:

﴿ إِنَّهُ لَا يَيْأَسُ مِن رَّوْحِ اللَّهِ ﴾

"Alle Naxariistiisa kama quusto"

Maadaama aan ahay addoonkaaga, adiga ayaa arrimaheyga oo dhan ii maamuli doonno, ha noqdaan kuwo yaryar ama waaweyn, taasina waa rumeynta hadalkaaga oo aad tiri:

﴿ يُدَبِّرُ الْأَمْرَ مِنَ السَّمَاءِ ﴾

"Arrinta Alle ayaa samada ka maamula"

Maadaama aan ahay addoonkaaga, waad iga ilaalin doontaa dhagarta xumaan falayaasha taasina waa rumeynta hadalkaaga oo aad tiri:

﴿وَهُوَ الْقَاهِرُ فَوْقَ عِبَادِهِ ﴾

"Waana mid ka adkaada addoomadiisa"

Waayoo waxaan ahay addoonkaaga,

Si wacan ayaan u aqaanaa halka aan tiigsanaayo,

marka ay dhibaato igu timaado, aniga oo dhibaateysan oo jaban ayaan tiig sadaa albaabkaaga.

Xitaa xilliyada barwaaqada adiga ayaan kuu imaadaa, si aan kaaga mahadceliyo nicmooyinkaaga aad igu maneysatay

Waan ku amaanayaa

Mahadcelinteyda iyo amaanteyduna adiga ayey kuu baahan yihiin waayoo waxaan ahay addoonkaaga baahan.

Ilaahoow waxaan ahay Cumarka aad taqaanid ee ma ihi Cumarka ay dadku yaqaanaan

Ilaahoow waxaan ahay Cumar addoonkaaga daciifka ah.

Dadka ayaan xaggaaga ugu yeeraa, maadaama aan ahay addoonkaaga darteed ayaan xagaaga ugu yeeraa

Waayoo adigu waxaad tahay xaq, kuwa ku raacana xaq ayey ku sugan yihiin, taasina shaki malahan

Aqbalaadda adiga ayaa bixiyo, sharaftuna waxa ay u sugnaatay adiga iyo rasuulkaaga iyo mu'miniinta, taana shaki malahan

Mar walba waan dhoolacadeyn doonnaa, waayoo waxaan ahay addoonkaaga.

Waxaad i aragtaa aniga oo kufaayo haddana waxa aad isiisa awood aan markale ku istaago, waayoo waxaanahay addoonkaaga,

Waxaad i aragtaa aniga oo ooyaayo haddana waxa aad isiisa awood aan markale ku qoslo, waayoo waxaan ahay addoonkaaga,

Waxaad i aragtaa aniga oo awood is bidaayo markaana waad ii naxariisataa waayoo waxaan ahay addoonkaaga

Waxaad i aragtaa aniga oo si hoose kuu xusaayo markaas ayaad adigana si hoose ii xustaa waayo waxaan ahay addoonkaaga,

Waxaad i aragtaa aniga oo fagaare kugu xusaayo markaas ayaad adigana fagaare ka wanaagsan midkeyga igu xustaa, waayoo waxaan ahay addoonkaaga.

Waxaan la noolahay sheeko jaceyl oo aan la leeyahay rabbigayga

Waxaan rabaa mar walba in uu i jeclaado, waxaan rabaa in uu raalli iga ahaado marwalba

Jirkeyga oo dhan adiga ayuu kuugu quduucaya si dullinimo, jaceyl iyo cabsi ku dheehan, ee rabbiyoow agtaada iiga qor Naxariis iyo jaceyl

Waayo waxaan ahay addoonkaaga, adiguna waxaad tahay rabbigeyga

Waxaan dareemayaa farxad buuxda oo aan dhamaaneyn

Waxaa igu filan in aad tahay rabbigeyga, adiga ayaana ugu wacan rabbinimo

Waxaa igu filan in aad tahay gacliyaheyga, adiga ayaana ugu wacan gacliye

Waxaa igu filan in aad tahay dhaqtarkeyga, dhaqtarna adiga ayaa ugu wacan

Waxaa igu filan in aad tahay quruxdayda, quruxna adiga ayaa ugu wacan,

Waxaa igu filan in aad tahay midka aan ku fiirsanahay,cid lagu tiirsadana adiga ayaa ugu wacan

Yaan adiga aheyn oo aan lahaa markii horeba

Codadka oo dhan waxa ay u heesayaan cidda ay jecelyihiin, anigana adiga ayaan kuugu heesaya si jaceyl iyo galgaceyl ku dheehan gacliyaheygoow, indhaha banii aadamka oo dhan waxa ay uhiloobayaan la kulanka qofka ay jecelyihiin, aniguna waxa aan u hiloobayaa la kulanka wajigaaga quruxda badan gacliyaheygoow!

Maadaama aan ahay addoonkaaga, madaxeeyga hoos uma geynaayo makhluuq, sidee taas ku dhaceysaa adiga oo ah abuuraha iyo ilaaliyaha.

Waayoo waxaan ahay addoonkaaga

Awoodeydaan tan ah, adiga ayaan kaa keenay rabbiga ugu awoodda badanoow

Yaa rabbi, yaan heystaa oo aan adiga aheyn

Adigu waad u naxariis badan tahay addoonkaaga ee rabbiyoow u naxariso addoonkaagaan adiga kuu taagan. oohin uu adiga kuu ooynayo ayuu la dhalaalay, adiga

ayuu ku rajeynayaa maadaama aad tahay midka dulqaadka badan ee u dhaw, gacmaheyga ayaan kor u qaaday aniga oo rajeynaayo in aadan igu celineyn gacmo maran, abuuraheyga iyo gacliyaheygoow

Anigu ma aanan la imaan salaad badan, soon badan, xus badan iyo sadaqo badan laakiin qalbigeyga waxa uu ku jecelyahay jaceyl aad u weyn

Qalbigaan aad igu abuurtay adiga, marwalba uu garaacmo waxa uu igu cusbooneysaa jaceylkaaga, gacliyaha qalbiygoow

Sida uu yiri Ibnu Teymiya: Qalbiga waxaa loo abuuray jaceylka Alle weynee

Qalbigeyga adiga ayaa leh, caqligeyga adiga ayaa leh, midka ugu quruxda badanoow.

Rabbigeygoow, waxaad tahay ilaaheyga iyo ilaaha dhammaan dadka sheegto in ay caabudaan ilaah aan adiga aheyn

Aniguna si dhab ah ayaan u ogahay in aad leedahay awood aad danbiyada ku dhaafi karto, ee ii danbi dhaaf rabbiyoow

Waayo waxaan ahay addoonkaaga, waan wacanahay, mahadnaq iyo maamuus oo idil adiga ayaa leh, rabbiyoow adiga ayaa ah midka xaqqa ah ee cidda doonno diintaan ku sugaya, ee rabbiyoow igu sug jidkaaga toosan

﴿ قُلْ إِنَّ صَلَاتِي وَنُسُكِي وَمَحْيَايَ وَمَمَاتِي لِلَّهِ رَبِّ الْعَالَمِينَ ﴾

"Waxaad dhahdaa salaaddayda iyo gawraceyga, nolosheyda iyo geerideyda Alle ayaa iska leh, ilaaha caalamka oo dhan"

Aniga, adiga ayaa ileh, camalkeyga adiga ayaa leh

Nolosheyda adiga ayaa leh, geerideyda adiga ayaa leh

Waxaan ahay addoonkaaga, aqoonsan danbiyada, adiguna waxaad tahay boqorka danbiyada dhaafo, haddii aad igu ciqaabto waa danbiyadeyda dartood, haddii aad ii dhaaftana waa mid aad mudan tahay oo aad xaq u leedahay, xaggaaga ayaan ka caraara, xaggaagana waan u caraaraa oo ma heysto meel aan adiga aheyn.

Ila fiiri

Marka uu qof ku jeclaado waxa aad dareemeysaa farxad iyo awood, marka uu qof ku jeclaado waxa aad dareemeysaa in aad tahay waxa ugu qurxoon nolosha, marka uu ku jeclaado qof waxa aad dareemeysaa sida in adduunka loo ballaariyay adiga dartaa, bal ka waran haddii uu ku jeclaado rabbiga qofkaas abuuray.

Kawaran haddii uu ku jeclaado rabbiga tamarta abuuray, quruxda abuuray, farxadda abuuray, iyo rabbiga dhameystirnaanta abuuray, rabbiga dhibta iyo fursadda, kawaran haddii uu ku jeclaado ilaaha sarreeye.

Marka uu ku jeclaado Alle, jaceylkaaga ayuu ku abuura qalbiyada dadka, dadka oo kaliya ma ahan ee xitaa malaa'igta sammada, qofka ugu horreeyo ee ku jeclaanayo marka uu Alle ku jeclaado waa Jibriil cs, kadibna qalbiyada dadka ayaa laguu furayaa

Qof walba oo banii aadam ah oo ku arko, la joog ama ka tag marwalba hareerahaaga ayuu ka arkayaa iftiin, taasi waa dhameystirka quruxda ee rabbi uu ku siinaayo haddii uu ku jeclaado, waxa uu ku siinaya iftiin aad dadka ku dhex socoto, dadka in ay ku jeclaadaan waa nimco,

waa nimco aad u weyn, bal kawaran haddii uu Alle ku jeclaado. Marka uu Alle ku jeclaado dhagaxyada ayaa laguu jilcinayaa, arrimahaagana waa laguu fududeynaya, xitaa dhagaxda wey ku jeclaanayan, dhulka oo dhanna waa uu kuu adeegayaa, haddii uu Alle ku jeclaado danbiyada ayuu kuu dhaafayaa,

marka uu Alle ku jeclaado waxa uu kuu noqonayaa dhagaha aad wax ku maqleyso iyo indhaha aad wax ku arkeyso, iyo gacmaha aad wax ku qabaneyso iyo lugaha aad ku soconeyso

Marka uu Alle ku jeclaado, magacaaga sammada ayaa laga baran doonnaa, marka uu Alle ku jeclaado adduun iyo aakhiro waad guuleysaneysaa, marka uu ilaah ku jeclaado wuu ku fiirinayaa, haddii uu ku fiiriyo ilaahna kuma cadaabayo,

marka uu Alle ku jeclaado cibaadadiisa ayuu kugu mashquulinayaa, marka uu ilaah ku jeclaado waxa uu ku siinayaa xikmad, qofkii xikmad la siinaya waxa uu helaa kheyr oo dhan, marka uu ilaah ku jeclaado naftaada ayuu kaaga dhigayaa mid ku wacdiso oo xaqa ku xasuusiso, marka uu ilaah ku jeclaado waxa uu kaa ilaaliyaa adduunyada iyo fitnooyinkeeda oo dhan.

marka uu Alle ku jeclaado wuxuu ku siiya guul aad u weyn

Muxuu helay qofkii Alle heli waayo

Muxuuse waayay qofkii Alle helo

Qalbiyo badan oo dadka kamid ah waxa ay ku xiran yihiin banii aadamka, in ka badan inta ay ku xiranyihiin Alle, waxaad arkeysaa dad badan oo haddii ay wayaan qof ay jeclaayen, uu ku dhacayo walwal iyo murug, heer mararka qaar xitaa ay is dilaan, anigu ma diidaayo waayitaanka qof aad jecleyd in ay xanuun badan tahay

Laakiin inta kaalmeysato sabarka iyo salaada marka ay xaaladdu ku adkaato oo walwalku ku bato aad ayey u yaryihiin

Allaah swt sabarka iyo salaada waxa uu ku tilmaamay in ay yihiin kuwo weyn

﴿ وَإِنَّهَا لَكَبِيرَةٌ إِلَّا عَلَى الْخَاشِعِينَ ﴾

"Salaaddu wey ku weyn tahay kuwa khushuuca Mooyee"

Kaalmeyso sabarka iyo salaadda waayo ilaah baan ku dhaartaye waa daaweyn wax ku ool ah

Waxaa la wariyaa in Allaah swt uu banii aadamka ku yiri nafteyda ayaan kuu abuuray, adigana wax walba ayaan kuu abuuray

Allaah naftiisa ayuu kuu abuuray

Maxaadan asaga ugu dhawaaneyn

Wax walba adiga ayuu kuu abuuray, haddaba maxaad uga cabaneysaa marka uu wax kaa qaado

Sida caadiga ah waa in uu Adiga kuu abuuray waxaas, adigana uu naftiisa kuu abuuray, macnaheedu waa in aad addoon u tahay isaga oo marwalba aad tiraahdo "Waan maqlay, waana u hogaansanay."

Annagu waxa aan nahay addoommada ilaah, la inooma abuurin in aan ku faanno muuqaalkeenna, u jeedada dhabta ah waa in aan u noolaano islaamka faafintiisa, naftu waxa ay iftiimeysaa dhibco sida roobka oo kale ah marka aan u jeedkaas ku taagan nahay.

﴿ اِهْدِنَا الصِّرَاطَ الْمُسْتَقِيمَ (6) صِرَاطَ الَّذِينَ أَنْعَمْتَ عَلَيْهِمْ غَيْرِ الْمَغْضُوبِ عَلَيْهِمْ وَلَا الضَّالِّينَ ﴾

"Inagu hanuuni jidka toosan ee xaqqa ah, jidka kuwii aad u nimceeysay eedan u cadhoonin dhuminna"

Aniga iyo adiga labadeenna midkoodna Islaamka waxba uma tarayo, shaki la'aan, Islaamka isaga oo sharaf leh ayuu sii jiri doonaa ilaa maalinta Qiyaamaha, yaaney ku cajab gelin cibaadadaada ama heysashadaada diinta islaamka.

Eeg halkaan

In lagu duceysto waddada toosan iyo jidka saxda ah ee Alle swt uu ku maneystay anbiyada Alle, Immisa qof oo toosnaa ayaa qaloocday, immisa qof oo qaloocnaa ayaa soo toosay oo wanaagsanaaday.

Aan kaaga sheekeeyo qiso gaaban oo aad u murugo badan taas oo idin muujineysa saxnaanta hadalka aan idin dhahay, Abuu Cabdullaahi Al-Luqawi, oo kamid ahaa saalixiinta, waxa uu yiri: "Waxaa jiray wiil dhalinyaro ah oo aad u wanaagsanaa, aadna u cibaado

badnaa. Maalin ayaa waxa uu maray guri ay daganaayeen qoys Kirishtaan ah, wuxuu arkay gabar qoyskaas ka dhalatay, aad ayuu uga helay ilaa heer uu jeclaaday, waxa uu billaabay in uu xiriir la sameeyo, iyadana sidoo kale, Ilaa uu qalbigiisa madoobaday. Aad ayuu u jeclaaday gabadhii ilaa heer uu darteed u xanuunsaday.

Sababtu waxa ay ahayd in uusan awoodin guurkeeda, iyadana sidoo kale waa ay xanuunsatay, maadaama la ogyahay in ninka Muslimka ah uu guursan karo gabar Kirishtaan ama Yuhuudiyad ah,

haddana sabab aan la shaacin darteed labadooda isma aysan guursan karin, Xanuunka wiilkaas wanaagsanaa waxa uu gaaray heer uu u dhiman gaaray, waxba ma cuni jirin, waxna ma cabi jirin

Abuu Cabdullaahi waxa uu yiri. "Waan booqday wiilkii si aan bal Alle u xasuusiyo oo aan Tawbada ugu baaqo, markii aan u tagay ee aan Alle xasuusiyay ayuu igu yiri' Abuu Cabdullaahiyoow.' Waxaan dhahay: 'Hee.'

Wuxuu yiri. 'Waad ogtahay in aan jeclahay iyada, Adduunkana aanan ku guursan karin, mana doonaayo in aan Aakhiro ku waayo.’

Waxaan dhahay. 'Maxaa dooneysaa, wiilkeygiyoow?'

Wuxuu yiri: 'Iyadu waa Kirishtaan, anigana waxa aan kuu qirayaa in aan ku gaaloobay diinta Nebi Muxammad, oo aan diinteeda ku dhimanaayo.'

Waxaan dhahay: 'War hoogee! Maxaa tiri?'

Markaas ayuu wiilkii qeyliyay, sidas ayuuna ku dhintay."

Abuu Cabdullaahi waxa uu yiri: "Waan qariyay qisada wiilkaas, Waxaa laga yaabaa in uu wiilkaas Alle u naxariisto, muddo kadib, gabadhii Kirishtaanka ahayd oo ka murugsaneyd dhimashada wiilka ay jecleyd ayaa geerideeda timid, intii aysan dhiman ayuu Abuu Cabdullaahi u tagay si uu diinta Islaamka iyo badbaadada ugu baaqo.

Gabadhii markii ay aragtay Abuu Cabdullaahi ayey tiri: 'Abuu Cabdullaahiyoow, waad ogtahay aniga iyo wiilkaas waxa innaga dhaxeeyay.'

Wuxuu yiri. 'Waan ogahay.'

Waxay tiri. 'Haddaba waxaan ku marqaati galinayaa i aan diintiisa qaatay.' Iyada oo tiri: 'Alle xaq lagu caabudo ma jiro Alle mooyee, Nebi Muxammadna uu yahay rasuulkiisa.'

Waxa ay ku dhimatay Islaamnimada, Labadooda adduunka ayaa lagu kala geeyay, sidoo kale Aakhiradana waa lagu kala geeyay.

Daacadnimada waxa ay isugu jirtaa.

- Jaceylka dhabta ah

Adduunkan ma jiro qof Bani Aadam ah oo wax jeclaan kara isagoo aan daacad ahayn, Jacaylka dhabta ahna wax khiyaano ah ma aqbalo. Alle waa ka sarreeyaa in aan khiyaameyno.

- Camalka wanaagsan

Daacadnimadu waxay ka timaadaa sameynta camal wanaagsan iyo joogteynta samaynta waxyaabaha wanaagsan iyo ka fogaanshaha sharta, sida dambiyada, sababtoo ah tani waa mid ka mid ah xaqiiqada daacadnimada jacaylka ee loogu talagalay qofka la jecelyahay.

- Ducada dhabta ah

Jacaylku waa duco, sababtaas darteed ayaa Nebiga (ﷺ) ugu duceysan jiray: «Ilaahoow, midka qalbiyada gad-gadiyoow, diintaada ku sug qalbigeyga.»

Sidoo kale, marka aad qof jeclaato waxaad ugu duceysaa wanaag iyo in uu mar walba garabkaaga ahaado, aakhirana lagula soo saaro, Bal kawaran Alle, waa tusaalaha ugu sarreeya, Ma dooneysaa dooneysaa

in Alle noqdo gacaliyahaaga xilli walba? Haddaba, ku duceyso ducadaas.

﴿ إِنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا سَوَاءٌ عَلَيْهِمْ أَأَنذَرْتَـهُمْ أَمْ لَمْ تُنذِرْهُمْ لَا يُؤْمِنُونَ ﴾

"Kuwii gaaloobay waxaa isugu mid ah udigtayaa ama umaadaan diginaa mana rumeeyaan xaqqa"

Subxaan Allaah, waxaa jira dad ka mid ah Banii Aadamka oo aad u madax adag, aayadduna, waxaa inoogu jirta qiso iyo cibra qaadasho.

Aayaddan waxa ay i bartay. In ay jiraan dad aan u heyno jacayl iyo daacadnimo, oo aan ugu muujino hadal iyo ficilba, balse iyagu diidan jacaylkayaga, haddii aan u muujino ama aanan u muujin, marna jacaylkayaga ma aaminayaan, dadku waa kala duwan yihiin, laakiin waxaa badan kuwa madaxa adag. Sidaas darteed, madaxa dagso oo ka dheeraw kuwa aan aaminsaneyn jacaylkaga.

﴿ وَبَشِّرِ الصَّابِرِينَ ﴾

"U bishaaree kuwa sabra"

Ugu bishaaree qofka sabarka leh in riyadiisu dhowdahay, xitaa haddii waqtigu dheeraado yaanu lumin rajadiisa, Waxaa kugu filan in Allaah SWT uu ku amaanayo haddii aad sabarto, kuuguna bishaareynayo darajo sare haddii aad adkeysato.

Haddaba sabar, waayo adduunku waa daar imtixaan iyo dhibaato, aakhiraduna waa tii wanaagsanayd ee waareysay.

Jannada waxaa lagu wareejiyay waxyaabaha ay naftu neceb tahay, haddii jannada si fudud lagu heli lahaa, ma aynaan dhadhamin lahayn macaanka raaxada marka aan galno, waayo waan horumarsanay, oo macaanka raaxada waxaan ku dhadhaminay adduunka, Sidaa darteed, Allaah SWT adduunka inaguma siin raaxo buuxda si aan aakhiro ugu faraxno.

Bal aan tusaale ku siiyo:

Haddii uu qof jaamacad dhameeyo kaliya isaga oo iibsaday shahaadada, ma kula tahay qofkaas in uu macaanka farxadda la qeybsan karo qofka jaamacadda uga qalin jabiyay dadaalkiisa? Macquul ma aha, waayo qofka dadaalay ayaa farxad badan, maadaama uu isaga waqti iyo dadaal ku bixiyay sidii uu ilbiriqsiyadaas kuheli lahaa.

Waa sidaas oo kale qofka cibaadada ku dadaalo oo sameeyo waxyaabaha ay amraan Allaah iyo Rasuulkiisa, Waxa uu heli doona raalli ahaanshaha Allaah, mana ka quusanayo.

Waxaa lagama maarmaan ah in qofka mu'minka ah uu maro imtixaan iyo tijaabo si uu u helo jannada, una farxo farxad ilowsiisa murugo oo dhan, heer uu xasuusan waayo dhibaatooyinkii uu soo maray.

Imaam Axmed ayaa la weydiiyay: goorma ayaa la helaa raaxo dhameystiran?

Waxa uu yiri: 'Marka aad tallaabadaada ugu horreysa dhigto jannada.'

haddaba qalbigaaga daji, maadaama uu kuu bishaareynayo Boqorka boqorrada, Allaah SWT.

﴿ وَتُحِبُّونَ الْمَالَ حُبًّا جَمًّا ﴾

"Xoolahana waxaad u jeceshihiin si daran"

Waxa aad heysato ee hanti, sumcad, caafimaad, iyo qurux ah dhammaantood waa imtixaan, Allaah SWT Waxa uu eegayaa sida aad u dhaqmeyso, ma aha sharaf iyo calaamad kuu muujinaysa in uu Allaah ku jecel yahay.

Ma taqaanaa goorta uu Allaah SWT ku jeclaanayo?

Kaliya waxa uu ku jeclaanayaa marka uu kugu maneysto diin iyo toosnaan.

Allaah SWT qof walba oo innaga mid ah waxa uu siiya imtixaan u gaar ah, Dadka qaar waxaa lagu imtixaamaa barwaaqada, qaarna waxaa lagu imtixaamaa wax la'aanta.

Ha iloobin, hana seegin, waayo meel walba iyo daqiiqad walba waxaad ku jirtaa imtixaan

Is dareensii intaas si aad jawaabta u haleesho.

﴿ يَوْمَ لَا يَنفَعُ مَالٌ وَلَا بَنُونَ (88) إِلَّا مَنْ أَتَى اللَّهَ بِقَلْبٍ سَلِيمٍ ﴾

"Maalin ayna wax anfaceyn xoolo iyo ilmo midna, Ruux ula yimaadda Alle qalbi fayow Mooyee"

Qalbiga saafi ah

Waa qalbiga aan doonin rabitaan uusan ku raallinoqonaynin Allaah,mana aamino hadal aan waafaqsanayn waxyiga, sharcina kama dhigto waxa uu Allaah soo dajiyay wax aan aheyn, Allaah mooyee cidkalena ma caabudo.

Saciid Binu Al-Musayyib ayaa yiri. Qalbiga saafiga ah waa qalbiga mu'minka, maxaa yeelay qalbiga gaaladu waa mid xanuunsan, sida uu Allaah SWT ku sheegay.

"Qalbiyadooda waa kuwa buka."

﴿ بَلِ الإِنْسَانُ عَلَى نَفْسِهِ بَصِيرَةٌ ﴾

"Ruux walbana naftiisa isagaa ku marag furi"

Aayaddan weyn waxay ku bareysaa in dadka aysan si dhab ah kuu aqoon, si aad si fiican ugu ogaato in amaanta ay dadku ku amaanayaan aysan noqon karin mid dhab ah haddii aysan ku habboonayn, iyo in caayda ay dadku ku caayaan aysan noqon karin mid dhab ah haddii aanay ku habboonayn, Waayo, waxa gudahaaga ku jira Allaah SWT ayaa og, kadibna adiga ayaa og,

dadkaas adiga ayaa naftaada uga aqoon badan, adiga ayaana uga xog ogaalsan, ciddii ku amaaneysa, haku amaanto, ciddii ku caayeysa, haku caaydo, waxa kaliya ee lagaa doonaya waa hodantinimada, hodantinimada adduunka ugu muhiimsana waa hodantinimada naftaada, haddaba noqo mid hodan ku ah noloshiisa.

Bal sheekadaan ila arag.

Nebiga (ﷺ) wuxuu dadaal badan ku bixin jiray sidii uu Abuu Jahal islaamka ku qaadan lahaa, mar kasta oo uu

arko Abuu Jahal, Nebigu wuu istaagi jiray oo wuu uduceyn jiray.

Maalin maalmaha ka mid ah, Abuu Jahal ayaa Nebiga (ﷺ) ku yiri: "Muxamedow, ma waxaad dooneysaa in aan rabbigaaga agtiisa kaaga marag furo in aad dacwada xaqqa ah isoo gaarsiisay?"

Nebigu (ﷺ) wuxuu yiri:, "Anigu waxaan doonayaa in aad islaamka soo gasho."

Abuu Jahal ayaa yiri:, "Muxamedow, haddii aan aaminsanaan lahaa in aad Nebi xaq ah tahay, waan ku raaci lahaa, laakin waxaan ku leeyahay, beenlow ayaad tahay."

Nebiga (ﷺ) isaga oo ka murugeysan waxa uu yiri Abuu Jahal ayaa waxaa kusoo dagay waxyiga, Allaah SWT ayaa Nebigiisa ku yiri:

﴿ قَدْ نَعْلَمُ إِنَّهُ لَيَحْزُنُكَ الَّذِي يَقُولُونَ ۖ فَإِنَّهُمْ لَا يُكَذِّبُونَكَ وَلَٰكِنَّ الظَّالِمِينَ بِآيَاتِ اللَّهِ يَجْحَدُونَ ﴾

"Waxaan ognahay in uu ku walbahaar gelin waxa ay dhahayaan, dhab ahaan kuuma beeninayaan laakiin daalimiintu aayaadka Alle ayey diidi"

Markii uu baxay Nebiga (ﷺ), Abuu Jahal dhinaciisa waxaa joogay nin ay saaxiibo ahaayeen, ninkii saaxiibkii ahaa ayuu ku yiri: "Waan ogahay in uu run sheegayo"

Beenta uu Abuu Jahal uu ku tilmaamay Nebiga ma aha mid dhab ah oo waxaa ka keenay kibirka iyo islaweynidiisa.

U jeedku "waa adiga, adiga oo kaliya".

﴿إِنْ أَجْرِيَ إِلَّا عَلَى اللَّهِ ﴾

"Ajirkeyga Alle unbaa isiin"

Ku dheh naftaada mar walba oo aad sameyso wanaag, cidna haka sugin abaal-gud ama mahadnaq, Ilaah oo kaliya ayaa ku siin kara abaal-gudka ugu wanaagsan.

﴿ ۞ وَلَقَدْ آتَيْنَا دَاوُودَ مِنَّا فَضْلًا ۖ يَا جِبَالُ أَوِّبِي مَعَهُ وَالطَّيْرَ ۖ وَأَلَنَّا لَهُ الْحَدِيدَ ﴾

"Dhab ahaan baan u siinay Nebi Daa'uud fadli xaganaga ah, waxaana nidhi buurohoow la celceliya tasbiixda, shimbirohoow la celceliya tasbiixda, waxaana u jilcinay birta"

Haddii Rabbi uu ku doorto, waxa uu kuu sahlayaa dhammaan makhluuqiisa oo dhan, xitaa haddii ay kuugu muuqato arrintaas in aysan macquul ahayn, "Ilaahow, inoo hoggaami sida aad addoomada wanaagsan u hoggaamiso, sababtoo ah Ilaah agtiisa boos kuma laha erayga "sidee" In aad taas rumaysana waajib ayey kugu tahay, Waxba ha weydiin aqoonyahan ama cid kale, waayo hadiyadaha Ilaah, waxay ka yaabiyaan addoomaha.

﴿ وَمَا تَسْقُطُ مِن وَرَقَةٍ إِلَّا يَعْلَمُهَا ﴾

"Wixii caleena oo dhacdana waa ogyahay"

Bal ka waran ilin kasoo dhacday indhahaaga, dhaawac gaaray qalbigaaga, ama bal kawaran codkagudaahaga kasoo baxayo?

﴿ وَمَا تَدْرِي نَفْسٌ مَّاذَا تَكْسِبُ غَدًا ﴾

"Nafna ma oga waxay mudan barri"

Qof walba oo kaa cabsi galinaya mustaqbalka isaguba ma oga waxa naftiisa ku dhici kara berri, sidaas darteed sidee buu ku ogaan karaa adiga mustaqbalkaaga iyo midka adduunka oo dhan?

Ku nooloow nolol degan oo waxba ha walwalin.

﴿ فَإِن تَوَلَّوْا فَقُلْ حَسْبِيَ اللَّهُ لَا إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ ۖ ﴾

"Haddayse jeedsadaan dadku waxaad dhahdaa Kaalmeeyaheygu waa Ilaahey"

Haddii uu kaa tago qof aad jeceshahay, dheh "Alle ayaa igu filan."

Haddii uu kaa tago qof kuu dhawaa, dheh "Alle ayaa igu filan."

Haddii uu kaa tago saaxiib aad jecleyd, dheh "Alle ayaa igu filan."

Haddii adduunyada oo dhan ay kaa tagto, dheh "Alle ayaa igu filan."

Alle ayaa kugu filan oo kaa kaafin doonno dhammaantood.

Sidaas darteed, ku dheh dhammaan dadka aad waaysay iyo wax walba oo aad waaysay, "Anigu ma waayin Allaah SWT" taasina waa hodantinimada dhameystirkeeda, iyo isku filnaanta.

﴿ إِنِّي وَهَنَ الْعَظْمُ مِنِّي﴾

"Rabbiyoow aniga waan tabar-yaraaday"

Muuji cabashadaada, oo u sharax dareenkaaga, tabar daridaada, iyo baahidaada, u sheeg wax walba Rabbigaaga.

﴿ وَمَا تَفْعَلُوا مِنْ خَيْرٍ يَعْلَمْهُ اللَّهُ ۗ ﴾

"Waxaad Fashaan oo kheyr ah wuu ogaan Alle"

Wanaagaaga Allaah agtiisa ayaa lagu ilaaliyaa, xitaa haddii aanad dadka mahadnaq ka helin, Kaliya niyaddaada u wanaaji Allaah oo naftaada daji.

﴿ أَلَمْ يَعْلَم بِأَنَّ اللَّهَ يَرَىٰ ﴾

"Miyuusan ogeyn inuu Alle arko"

Alle waa ku arkaa, wuu kuu jeedaa, wuu maqlaa waxa aad dhaheyso, Alle wuu ogyahay waxa qalbigaaga ku jira, sidaa darteed boqorka boqorrada haka dhigin kuwa ku arkaya midka ugu liita.

﴿ فَأَثَابَكُمْ غَمًّا بِغَمٍّ ﴾

"Rabbiyoow aniga waan tabar-yaraaday"

Subxaanallaah! Murugadu waa abaalmarin, U fiirso, Allaah swt ma uusan oran "waxaa idinku dhacay", ee waxa uu yiri "waxaan idinku abaalmariyay." Sidaas darteed, adigaan murugsanow, Allaah swt waa uu ku imtixaamayaa si uu kuu sharfo oo darajooyin kuu sare qaado.

﴿ يَقُولُ يَا لَيْتَنِي قَدَّمْتُ لِحَيَاتِي ﴾

"Waxay dhihi shallaytee maan wanaag hormarsado"

Taasi waa rajada ugu weyn ee qofka dhintay uu leeyahay hadda!

Rajada ugu weyn ee ay leeyihiin dadka ku jira nolosha qabriga (Barzakh) waa inay dib ugu soo noqdaan adduunka si ay u sameeyaan camal fiican, rajada dadka qabriyada ku jira ayaa hadda hortaada taal; fadlan ka faa'iideyso inta aysan naftu ka bixin jirkaaga.

Waxa uu yiri Xaatim (Allaah ha u naxariistee):

"Waxaan eegay dadka, qof walba waxa uu leeyahay mid uu jecel yahay, haddana qof walba marka qabriga la geeyo, waxa uu jeclaa waa ay ka tagaan, sidaas darteed, camalkeyga ayaan ka dhigtay waxa aan jeclahay si uu qabriga iigu wehliyo."

"أَصْلِحْ لِي شَأْنِي كُلَّهُ"

"ii hagaaji xaaladeyda oo idil"

Aayad weyn iyo duco aad u qiimo badan!Ducadan waxaa ku ducaysan jiray Rasuulka Alle NNKH, isaga oo dhihi jiray:

يَا حَيُّ يَا قَيُّومُ بِرَحْمَتِكَ أَسْتَغِيثُ، أَصْلِحْ لِي شَأْنِي كُلَّهُ،
وَ لَا تَكِلْنِي إِلَي نَفْسِي طَرْفَةَ عَيْنٍ

“Ilaaha nool ee aan dhammaaneynow, waxaan magan gelayaa naxariistaada, Ilaahow ii hagaaji xaaladeyda oo idil, hana ii deyn nafteyda xitaa ilbidhiqsiyo.”

Talo saaro Alle oo ku tiirsanow, isaga ayaa xikmaddiisa ku hagaajin doona noloshaada, awooddiisana kaaga bogsiin doona jabkii ku gaaray, naxariistiisana kaaga qaadi doona murugada.

Tarbiyadda Akhlaaqda ee Bulshada Islaamka.

﴿ لَا يَسْخَرْ قَوْمٌ مِّن قَوْمٍ ﴾

"Yuuna Yasin ragna rag kale

﴿ وَلَا تَلْمِزُوا أَنفُسَكُمْ ﴾

"Hana Ceebeynina naftiinna"

﴿ وَلَا تَنَابَزُوا بِالْأَلْقَابِ ﴾

"Hana ha isugu dhawaaqina naaneys xun"

﴿ اجْتَنِبُوا كَثِيرًا مِّنَ الظَّنِّ ﴾

"Ka dhawrsada wax badan oo mala ah"

﴿ وَلَا تَجَسَّسُوا ﴾

"Hana is jaasuusina"

﴿ وَلَا يَغْتَب بَّعْضُكُم بَعْضًا ﴾

"Qaarkiinna qaar yuusan xamanin"

﴿ فَإِنـي قَرِيبٌ ﴾

"Waxaan ahay mid udhaw"

Iska jir oo iska ilaali in aad dadka gargaar weydiisato! Alle ayaan ku dhaartayee, haddii aad ogaan lahayd sida uu Alle kaaga dhowyahay khalqiga oo dhan, murugada way kaa tagi lahayd.

Dadka dib ha ugu laaban si aad ugu muujiso waxa gudahaaga ku qarsoon, waayo laabaha dadka way ka cidhiidhsan yihiin in ay xambaaraan culeyskaaga.

Haddaba Alle ha noqdo magan-galkaaga, waayo isaga ayaa ku leh:

"Waxaan ahay mid kuu dhaw."

U dagdag Rabbigaa oo ka tag khalqiga, una tag Rabbiga dadka abuuray, si aad naftaada ugu bandhigto isaga oo kali ah!

﴿ أَنِّي مَغْلُوبٌ فَانتَصِرْ ﴾

"Waa la iga adkaaday ee ii gargaar"

Nebi Nuux (CS) ayaa sidaas yiri:

Allaah Sarreeye wuxuu jeclaa qalbiga Nuux, markii uu Nuux (CS) ducadaas ku dhawaaqay, dhulka oo dhan ayuu biyo ugu qarqiyay Nuux dartiis,

Khalqiga oo dhan ayuu u tirtiray Nuux dartiis,

Isaga oo soo reebay kaliya dadkii Nuux doonta la raacay.

Akhriste

Adigana ogow in Rabbiga qalbiyada uu ka farxiyay qalbi kaliya, maadaama uu jeclaa, uuna burburiyay qalbiyo badan maadaama aysan jeclaan cidda uu jecelyahay.

Waa sida uu Allaah SWT ku sheegay xadiisul qudsi isaga oo yiri:

"Qofkii colaadiya qof aniga iidhaw, waxaan u iclaaminaya dagaal"

Iska ilaali in aad dhibto qof mu'min ah.

﴿ قُتِلَ الْإِنسَانُ مَا أَكْفَرَهُ ﴾

"Gaalo halla lacdando, gaalnimo badanaa"

Waxaa isoo hor istaagay qof jismigiisu ka kooban yahay labaatan trilyan oo unug, oo isugu jira buundooyin warshado, iyo nidaamyo sir ah oo aad u adag oo ku jira koodka hidda-sidaha, indhihiisa ayuu igu eegay, kuwaas oo leh nidaam sawir-qaadis aad u fiican oo si hufan u tarjumaya midabada, kuwaas oo leh awood cajiib ah oo lagu keydiyo sawirrada dhaqdhaqaaqa iyo kuwa kale Sidoo kale wuxuu leeyahay awood uu ku turjumo sawirrada, isagoo maskaxdiisa ugu falanqeynaya wax ka yar ilbiriqsi

Horteyda ayuu istaagay, qalbigiisuna wuu garaacayaa, isagoo shaqeynayay wax ka badan labaatan sano, habeen iyo maalin, ha hurdo ama ha soo jeedo, isaga oo aan u baahneyn wax dayactir dibadda ah.

Ugu dambeyntii, wiilka wuu hadlay, wuxuuna dhaqaajiyay carrabkiisa oo ku xiran 17 muruq garaadkiisa sare ayuu igu weydiiyay su'aal, isagoo leh:

Maxaa caddeynaya jiritaanka Abuuraha?

Waxaan ugu jawaabay. "Gaalo halla lacdando, gaalnimo badanaa"

﴿ لَا يُكَلِّفُ اللَّهُ نَفْسًا إِلَّا مَا آتَاهَا ۚ سَيَجْعَلُ اللَّهُ بَعْدَ عُسْرٍ يُسْرًا ﴾

"Alle kuma mashaqeeyo naf waxa uusan siinin, Allena wuxuu yeeli cidhiidhi dabadiis fudeyd (faraj)"

Akhriste, eeg oo si wacan ugu fiirso aayaddan weyn Allaah SWT culeys walba dhammaadkiisa wuxuu qoray fudeyd.

Taasi micnaheedu waa:

- Dhammaadka murugada waa farxad.
- Dhammaadka dhibta waa raynrayn.
- Dhammaadka dadaalka waa guul iyo liibaan.
- Dhammaadka wax la'aanta waa deeq.
- Dhammaadka niyad jabka waa kalsooni.
- Dhammaadka rajo-beelka waa yididiilo.

Haddaba, si walba ay u dheeraadaan maalmaha adag ee qaraar, hubaal way dhammaanayaan shaki la'aan!

Waxaan ku dhaaranayaa Rabbiga i abuuray, way dhammaan doonaan, waadna farxi doontaa, waxaa laga yaabaa inay farxaddaada timaaddo bari, ama xitaa maanta ka hor.

Rabbigayga wuu ka sarreeyaa inuu caddaabo addoonkiisa isaga oo aan bogsiin dhaawaciisa!

﴿ إِنَّ إِلَىٰ رَبِّكَ الرُّجْعَىٰ ﴾

"Rabbigaaga xaggiisaase loo noqon"

Samee waxaad doonto oo xumaan iyo dambi ah.

- Xatooyo
- Salaad aad ka tagto
- Qaraabo aad gooyso
- Xoolo agoon inaad cunto
- Waalidkaaga oo aad caasi ku noqoto

Laakiin xusuusnow, "Rabbigaaga xaggiisaase loo noqon"

﴿ إِنَّمَا الْمُؤْمِنُونَ إِخْوَةٌ ﴾

"Mu'miniinta waa uun walaalo"

Qof dadka ka mid ah ayaa yiri:

Waxaan arkay wiil dhalinyaro ah oo oday waayeel ah dhabarkiisa ku sida, waxaan damcay inaan uga mahadceliyo wanaaggiisa, markaasaan ku iri: "Alle hakaa abaalmariyo wanaaggaaga aad u sameyneyso aabbaha.”

"Wiilkii wuxuu iigu jawaabay. "Laakiin ma aha aabbahay, xitaa isku waddan kama soo jeedno.”

"Waxaan ku iri: "Haddaba waa ayo?"

Wuxuu yiri: "buurta Carafa ayaan ku arkay isaga oo aysan cidna la socon, sidaas ayaan dhabarkayga ugu qaaday ilaa Musdalifa iyo Mina.”

"Waxaan ku iri: "Maxaad sidaas u samaysay?"

Wuxuu yiri: "SubxaanAllaah! Mu'miniinta waa walaalo."

﴿ وَاصْبِرْ نَفْسَكَ مَعَ الَّذِينَ يَدْعُونَ رَبَّهُم بِالْغَدَاةِ وَالْعَشِيِّ يُرِيدُونَ وَجْهَهُ ۖ ﴾

"Ku sabarsii naftaada la jirka kuwa baryaya rabbigood aroor iyo galabba"

Halkaan Rabbigeenna Subxaanahu watacaalaa wuxuu ina tusayaa muhiimadda saaxiibka wanaagsan si aan uga helno awood iyo garab haddii adduunyadu nagu cidhiidhsato.

Saaxiibka wanaagsan qalbigaaga ayuu ka buuxin doonaa xusuusta Alle, wuxuuna kugu dhiirrigelin doonaa wanaagga, ee xumaanta kuuma jeedin doono.

Saaxiibka xun qalbigaaga wuxuu ka buuxin doonaa waxyaabo aan faa'iido lahayn, wuxuuna kugu dhiirrigelin doonaa xumaanta, wanaaggana kuguma hoggaamin doono.

Cumar Binu Al-Khaddaab (RC) wuxuu yiri: "Addoonka lama siiyo Islaamnimada ka dib wax ka wanaagsan oo ka kheyr badan saaxiibka wanaagsan, haddaba midkiin haddii uu walaalkiis ka helo jacayl, ha adkeysto."

﴿ قَالَ رَبِّ فَأَنظِرْنِي إِلَى يَوْمِ يُبْعَثُونَ (79) قَالَ فَإِنَّكَ مِنَ الْمُنْظَرِينَ ﴾

"Wuxuu yiri Ibliis Alloow ii sug tan iyo maalinta lasoo bixin doonno dadka"

Ibliis wuxuu baryayaa Alle, Allena waa ka aqbalayaa, ma kula tahay inuusan adiga kuu aqbalayn adigoo isaga u hogaansamay, qiray in isaga mooyee cid kale aysan cibaadada mudnayn, adeecay amarradiisa, oo gacmaha kor u qaaday si aad ugu bandhigto baahidaada?

Maya, waxaan ku dhaaranayaa Rabbiga Kacbada abuuray, ma aaminsani in malahaas xun laga aamini karo Rabbigayga

Rabbigayga kuma dayici doono marnaba adiga oo jahawareersan!

﴿ لَا تَدْرِي لَعَلَّ اللَّهَ يُحْدِثُ بَعْدَ ذَٰلِكَ أَمْرًا ﴾

"Ma garan kartid, waayoo Alle wuxuu u dhaw

yahay intaas kadib in uu xal keeno"

Arrin kasta oo kuula muuqata mid adag oo aan sahlaneyn, ha uga niyad jabin si dhakhso ah, hana u cararin magaalada murugada badan ee maskaxdaada ku sawiran, ha isku dayin inaad dhageysato heeso tilmaamaya xaaladda murugada leh ee aad ku jirto.

Alle ayaan ku dhaartaye, haddii aad aayaaddan si dhab ah u fahmi lahayd xilliyada murugada badan, qalbigaaga waxaa ka dami lahaa dabka murugada leh ee ka dhex shidan.

Akhriste, ma ogtahay furaha aayaaddan?

Furaheedu waxa uu ka yimid samada toddobaad korkeeda, halkaa oo uu joogo Boqorka boqorrada,

Rabbiga sarreeya waxa uu kuu sheegayaa in xaaladuhu hagaagi doonaan, inkastoo ay jiraan duruufo adag iyo caqabado dadka ka yimaada, haddaba, yaa ka run badan Alle hadalkiis?

Is deji, oo hawalwalin.

﴿ وَتَوَكَّلْ عَلَى اللَّهِ وَكَفَى بِاللَّهِ وَكِيلًا ﴾

"Tala saaro Alle isagaa ku filan wakiile"

Qofkii talo saarto Alle, ma daalo, ma dulloobo, mabaadi yoobo, hoosna uma dhaco.

﴿ لَا عَاصِمَ الْيَوْمَ مِنْ أَمْرِ اللهِ ﴾

"Wax kaa ilaalin kara maanta amarka Alle ma jiro"

Caqligaaga haka horumarin awoodda Alle.

﴿ قَالَ سَآوِي إِلَىٰ جَبَلٍ يَعْصِمُنِي مِنَ الْمَاءِ ۚ ﴾

Wuxuu yiri: 'Waxaan u dumi buur iga dhawrta biyaha,'

Taasi waa caqligiisa.

﴿ قَالَ لَا عَاصِمَ الْيَوْمَ مِنْ أَمْرِ اللَّهِ إِلَّا مَن رَّحِمَ ﴾

Wuxuu yiri: 'Wax kaa ilaalin kara maanta amarka Alle ma jiro, cid Alle u naxariistay mooyee'

Tani waa waxyi.

﴿ وَحَالَ بَيْنَهُمَا الْمَوْجُ فَكَانَ مِنَ الْمُغْرَقِينَ ﴾

"Waxaa kala dhexmaray hirkii, wuxuuna noqday wiilkii kuwa la maasheeyey."

Tanina waa natiijada.

Sidaa darteed, qof walba oo amarka Alle ka horumariya caqligiisa ama ka hor yimaada aayadaha Qur'aanka iyo axaadiista saxiixa ah wuxuu ku dhex qaraqmaa mugdiga badaha bidcooyinka iyo hawa raaca.

Qof kasta oo caadeysta inuu caqligiisa kaga hor tago shareecada, iimaanku qalbigiisa ma dago oo ma xasilo.

﴿ أَلَمْ نَشْرَحْ لَكَ صَدْرَكَ ﴾

"Miyaannan kuu waasicinin laabta"

Qaar badan oo ka mid ah dadka haddii ay inoo sheegi lahaayeen xaqiiqada, waxay noo sheegi lahaayeen xanuun ina dhaawacaya.

Waa xaqiiqo.

Haddaba, iska dhaaf kuwaas, oo noqo kuwa uu Alle Nebigiisa ku yiri, "Miyaayeynaan ballaarin?"

Wuxuu ka dhigayaa qalbigaaga mid furan, daggan, oo baaxad weyn leh kadib markii ay ku dhaawaceen.

Ha walwalin, adigu.

﴿ مَا وَدَّعَكَ رَبُّكَ وَمَا قَلَىٰ ﴾

"Alle kaama tagin Nebiyoow kuumana cadhoonin"

Hadal cajiib ah oo ka yimid Rabbi cajiib ah.

Rabbi kaagama tagin cidlo ee wuu ku hanuuniyay.

Rabbi kaagama tagin dhaawac oo wuu ku bogsiiyay.

Rabbi kaagama tagin bahdil oo wuu ku badbaadiyay.

Rabbi kaagama tagin murug oo wuu ku farax galiyay.

Rabbi marna kuma niyad jabin doonno mana kaa tagi doonno inta aad ku jirto ilaaladiisa.

Ogow taas.

﴿ وَهُزِّي إِلَيْكِ بِجِذْعِ النَّخْلَةِ تُسَاقِطْ عَلَيْكِ رُطَبًا جَنِيًّا ﴾

"Una gilgil xaggaaga jirridda timirta, ha kuu soo riddo korkaaga timir (curdana) oo fiicane"

Rabbigeenna Sarreeye awood ayuu u lahaa in uu miraha timirta kasoo rido geedka sabab la'aan.

Laakiin rabbigeen waxa uu doonay in ay Maryama la timaado sababta si ay ugu raaxeysato dhibkeeda.

Adigana si aad ugu raaxeysato dhibkaaga waa in aad si xooggan ugu dadaasha inaad ka gudubto marxaladaha adag oo aad wajahdo cabsida kugu hareeresan, waayoo waa dhalanteeda.

Ogoow in dhammaadka jidkaas ay taallo farxad iyo raaxo, ogoow in risqiga kuugu imaanayo sariirtaada uu ka ajir badan yahay midka aad adiga u dadaaasho

Alle tallo saaro oo la imaaw sababta, si aad ugu faraxdo.

﴿ وَأَنَا بَرِيءٌ مِّمَّا تُجْرِمُونَ ﴾

"Aniguna bari baan ka ahay waxaad dambaabtaan"

Ka dheeraaw oo ka fogaaw xumaanta iyo waxyaabaha xunxun ee aad hortaada ka aragto.

﴿ قَالُوا يَا نُوحُ قَدْ جَادَلْتَنَا فَأَكْثَرْتَ جِدَالَنَا فَأْتِنَا بِمَا تَعِدُنَا إِن كُنتَ مِنَ الصَّادِقِينَ﴾

"Waxay dhaheen Nuuxow waad nala dooday ood badisay la doodkannaga, ee noo keen waxaad noo yaboohayso haddaad run sheegi"

Ha dheerayn oo ha badin la doodidda dadka baadiyeysan, maxaa yeelay waxaad ka heli doontaa kaliya kibir iyo isla-weyni.

﴿ لَا يَحْطِمَنَّكُمْ سُلَيْمَانُ وَجُنُودُهُ ﴾

"Yeysan idin jajabin Sulaymaan iyo Ciidankiisa"

Wuxuu ogyahay waxa ay quraanshadu leedahay, isaga oo hadalkooda ku qora kitaabkiisa, Rabbigeen cajiibsanaa, sannado badan ma uusan iloobin quraanshada, sidee ayuu ku hilmaami karaa ducadaada maalin kasta?

Cabsideeda iskama aanu indha tirin, sidee buu cabsidaada isaga indha tirayaa?

Bal kawaran adiga, ma waxaad umaleysaa in uusan dhawaaqaaga maqleyn?

Rabbigay wuu ka sarreeya taas.

﴿ وَالْمُسْتَغْفِرِينَ بِالْأَسْحَارِ ﴾

"Dambi dhaaf warsada aroortii"

Cumar Binu Al-Khaddaab rc wuxuu yiri: "Haddii ay samada kasoo dhacdo biriq, ma saameyn doonto qofka istiqfaarsada."

Istiqfaartu waa cudur daar. Alle ciyaar kuuguma dooran inaad istiqfaarato, balse wuxuu kuu doortay inuu kuu dhaafo dambiyadaada, Sidaa darteed, istiqfaarso oo weydiiso danbi dhaaf.

﴿ وَرَحْمَتِي وَسِعَتْ كُلَّ شَيْءٍ ﴾

"Naxariisteyda waxa ay u waasac noqotay wax walba"

Xitaa falalkaaga xunxun ee waaweyn, waxaa ka weyn naxariistiisa, xitaa naxariista hooyaadaada naxariista badan malala barbardhigi karo naxariista Alle uu kuu naxariisanayo, waayoo naxariistiisa waxwalba ayey gaartay, hooyadaana waxa ay kamid tahay waxyaabahas, haddiii addoonka caqliga badan lakala dooransiiyo in uu Alle xisaabiyo qiyaamaha ama in ay hooyadiis xisaabiso waxa uu dooran lahaa Allaah swt in uu xisaabiyo.

﴿ فَضَرَبْنَا عَلَىٰ آذَانِهِمْ فِي الْكَهْفِ ﴾

"Markaasaan ku siidaynay hurdo godka dhexdiisa"

Asxaabul Kahfi waxay seexdeen iyaga oo male wanaagsan ka qaba Rabbigood.

Markii ay soo tooseen, caalamkii oo dhan waa uu isbeddelay, Allaah ayaa ka badbaadiyay halista qoomkoodii, sidaas darteed, haddii aad male wanaagsan ka qabto Allaah, oo aad ku tiirsan tahay, waxaad ku noolaan doontaa kalsooni, waayo waxaa ku ilaalin doonno rabbiga aysan lulmo iyo hurdo midna qaban.

﴿ وَنَزَعْنَا مَا فِي صُدُورِهِم مِّنْ غِلٍّ ﴾

"Waxaan ka siibnaa waxa laabtooda ku jira oo xiqdi ah"

Quruxda nolosha waa qalbi saafi ah oo ka xoroobay xumaan, xaasadnimo, iyo cadaawad, sidaas darteed, farxadda iyo quruxda jannada waa in aysan laheyn xasad iyo cadaawad midna, haddaba, ku nooloow noloshaada adigoo ku qanacsan waxa uu Alle kuu qoondeeyay, uguna mahadceli dhammaan nimcooyinka uu ku siiyay, ha xasdin, hana cadaawin dadka kale, kaliya noqo mid Alle uga mahadcelinaya dhammaan nimcooyinkiisa.

﴿ فَتَمَنَّوا ﴾

"Rajeeya"

Alle swt uma geliyo rajo qalbigaaga si aan macno lahayn.

Taas oo Noloshaada oo dhan aad rajaynayso, wuu ku siin doonaa waxa aad rabto, Allaah swt ma doonayo inaad wax rajeyso kadibna aad murugooto, wuu ku siin doonaa xitaa haddii ay waqti qaadato, haddii Alle idmo, Ilaahay wuu ka sarreeyaa dhammaan rabitaankaaga, naxariistiisa waa ka ballaaran tahay waxa aad ku fikiri karto, waana ka weyn yahay baahidaada iyo rajadaada.

﴿ الَّذِي خَلَقَنِي فَهُوَ يَهْدِينِ (78) وَالَّذِي هُوَ يُطْعِمُنِي وَيَسْقِينِ (79) وَإِذَا مَرِضْتُ فَهُوَ يَشْفِينِ ﴾

"Allaha i abuuray ayaa ah midka i hanuunin,
isaga ayaa midka ii quudinaayo oo i waraabinayo,
markaan bukoodo isagaa i caafiya"

Waa sida quruxda leh ee Nebi Ibraahim (CS) uu uga warbixiyay Rabbigiis, Abuurka ayuu u qiray Allaah, isaga oo yiri: "Wuu i abuuray." risqigaana wuu u qiray Allaah, isaga oo yiri: "Isagaa i quudiyo." Laakiin xanuunka, xanuunka ma uusan u tiirin Allaah, wuxuu yiri. "Anigaa xanuunsaday." ee ma uusan dhihin: "Rabbi ayaa i xanuunjiyay." Sidaas darteed, marka aad Rabbigaaga ka hadleyso, muuji addoonimo iyo ixtiraam.

﴿ يَا بُنَـيَّ ارْكَب مَّعَنَا ﴾

"Wiilkeygoow nala soo kor"

Inkasta oo uu ku kufriyay Allaah iyo aabihiis, inkasta oo uu la yimid kibir iyo caasinimo, falal xunxun iyo doqonnimo, haddana hadalka Nebi Nuux (CS) ee wiilkiis wuxuu ahaa: "Yaa bunayya" (Wiilkaygoow), Inkasta oo uu ka warqabay in wiilkiisa uu la kulmi doono ciqaab la mid ah kuwa gaaloobay, haddana qalbiga aabbaha waa mid naxariis leh xilli kasta, Ilaahow, innaga yeel kuwo baari u ah waalidkooda, naxariistaada ballaaran ugu naxariiso.

﴿ إِنَّهُ كَانَ عَبْدًا شَكُورًا ﴾

"Wuxuuna ahaa addoon Alle ee mahadcelin badan"

Sheekh Shacarawi (Raximahu Allaah) ayaa yiri: "Mahadnaqiisa waxa uu gaaray heer uu maalin walba oo uu wax cuno ama cabo u mahadceliyo Allaah, sidoo kale markuu labisto Allaah ku mahadiyo.

Qaar ka mid ah salaafkii ayaa yiri: Xusuusashada nimcada waxay dhalisaa jacaylka Allaah SWT."

Sidaas darteed, noqo addoon mahadcelin badan, ogow in Allaah SWT aanu illoobin addoommadiisa mahadiya.

Ilaahow, innagu caawi xusuustaada, mahadcelintaada, iyo cibaado suuban oo aad raalli ka tahay

Ilaahow, ina waafaji in aan kaaga mahadcelino nimcada aad nagu maneysatay, innaga iyo waalidkeen, iyo in aan sameyno camal aad ku raalli noqoto.

﴿ وَلَقَدْ نَادَانَا نُوحٌ فَلَنِعْمَ الْمُجِيبُونَ ﴾

"Waxaa dhab ahaan noogu dhawaaqay Nebi Nuux,

cid wax ajiibtana annagaa u fiican"

Marka aad dhibaato ku jirto, garo cidda aad u wacaneyso, maaha dadka oo dhan in ay ku maqlayaan, Jilbaha dhig oo dheh. Yaa Allaah! Wuxuu kuu rumeyn doonaa rajadaada, wuxuu kaa qaadi doonaa dhibka, wuxuu kaa dulqaadi doonaa murugada, wuxuuna kaa baabi'in doonaa walwalka sidii in ayna dhibaato waligeed ku qabsan.

Waxaa la sheegaa in addoonka marka uu yiraahdo: "Yaa Allaah," uu Rabbi yiraahdo. "Haa, addoonkayga!" Ilaahay wuxuu kuu imtixaamaa si uu kuu maqlo.

Ogowna in badbaadadaadu ay ku jirto ducadaada.

﴿ الشَّيْطَانُ يَعِدُكُمُ الْفَقْرَ ﴾

"Sheydaanku wuxuu idiin yaboohaya Faqri"

Urta niyad jabka, rajo beelka, iyo murugada waa urta Ibliis, ma aha taada! haddaba, Alle ka magangal.

﴿ كَتَبَ رَبُّكُمْ عَلَى نَفْسِهِ الرَّحْمَةَ ﴾

"Wuxuu Alle isasaaray Naxariis"

Yaa ka naxariis badan Allaah, oo ka qurux badan Allaah?

Allaah SWT kuma qorin kitaabkiisa wax uu naftiisa kuwaajibiyay oo aan ahayn naxariis.

Haddaba, is deji akhristoow.

﴿ فَإِنَّ حَسْبَكَ اللّٰهُ ﴾

"Waxaa kaafiyahaaga ah Alle"

Ma jiro waqti, ama xilli, ama qof dabooli kara baahidaada, balse Boqorka boqorrada ayaa kugu filan oo dabooli kara, Wuxuu ku filan yahay qof walba, waqti walba, xilli walba, meel walba, Isagu waa Allaah.

﴿ إِنَّهُ لَا يَيْأَسُ مِن رَّوْحِ اللَّهِ إِلَّا الْقَوْمُ الْكَافِرُونَ ﴾

"Kama quusto farajka Alle qoom gaala ah mooyee"

Marka Rabbigaagu uu kuu sheegayo in niyad-jabka iyo quusta ay tahay gaalnimo, taasi waa caddaynta ugu weyn iyo xaqiijinta ugu weyn ee in farajku imaanayo shaki la'aan.

Sidoo kale, farajka waa wax uu si dhab ah u rumeysan yahay qof walba oo mu'min ah.

Sidaa darteed, is daji.

﴿ نَبِّئْ عِبَادِي أَنِّي أَنَا الْغَفُورُ الرَّحِيمُ ﴾

"U warran addoomadayda inaan anigu ahay dambi dhaafe naxariista"

Maalinna haka quusan cafiska Allaah, xitaa haddii danbiyaadu buuxinayaan dooxooyin, wuu kaa cafin doonna Rabbiga kitaabkiisa ku yiri: "U warran addoomadayda inaan anigu ahay dambi dhaafe naxariista"

﴿ عَسَىٰ رَبُّكُمْ أَن يَرْحَمَكُمْ ۚ ﴾

"Waxay u dhawdahay in rabbigiin uu idin naxariisto"

Camal walba oo wanaagsan oo aad ka caajisto ama aad ka daahdo, ku celceli qalbigaaga camalka wanaagsan ee aad ka daahday: "Waxay u dhawdahay in rabbigiin uu idin naxariisto"

﴿ قَالَ قَدْ أُوتِيتَ سُؤْلَكَ يَا مُوسَىٰ ﴾

"Wuxuu yiri Alle waa lagu siiyay waxaad weydiisatay Muusow"

Toddobo waxyaalood ayuu Nebi Muuse (CS) ka codsaday Rabbigiisa SWT, markaas ayuu Alle hal mar oo keliya uga aqbalay.

Sidaas darteed, ma ogid daqiiqadda lagugu oran doono "Waxaa lagu siiyey wixii aad weydiisatay."

﴿ وَأَلْقَيْتُ عَلَيْكَ مَحَبَّةً مِّنِّي ﴾

"Waxaana kugu tuuray jaceylkeyga"

Rabbiga toddobada samo iyo dhulka ayaa addoonkiisa Nebi Muuse (CS) ku yiri: Haddii Boqorka boqorrada uu addoonkiisa faqiirka ah ee daciifka ah u sheegto jacaylkiisa, maxaad adiga, adoo banii'aadam ah, ugu sheegi weyday qofka aad jeceshahay in aad jeceshahay?

Taasi waa tilmaan weyn iyo farriin weyn oo ka timid Boqorka boqorrada.

Ku dheh qofka aad jeceshahay. "Waan ku jeclahay." Jacaylkaas kaliya ma aha mid ku kooban lamaanahaaga nolosha, balse ku dheh qof walba oo aad jeceshahay, waalidkaaga, qaraabadaada, walaalahaa iyo saaxiibba-daada.

Dheh: "Waan ku jeclahay" adigoo ujeeddo iyo dan la'aan ah si aad u dareento farxad dhab ah.

﴿ إِلَيْهِ الْمَصِيرُ ﴾

"Xaggiisaana loo noqon"

Adiga ayaa leh go'aanka, adiga ayaa leh doorashada, adiga ayaana go'aaminaya masiirkaaga.

Masiirkaagu waa natiijada doorashadaada, ma aha wax iska yimid.

Sidaas darteed, dadaal oo hubi in doorashadaada ay tahay mid sax ah oo la jaanqaadaysa rabitaannada Allaah.

﴿ فَاعْفُوا وَاصْفَحُوا ﴾

"Iska cafiya iskana saamaxa"

Cafiska wuxuu dhalaa farxad iyo qanacsanaan nafeed,

Markaad cafiso oo aad iska saamaxdo waxaad ka xoroobeysaa dareennada xanuunka iyo dhaawaca.

Cafi si aad u nasato.

Allaah swt wuxuu cafiyay qof dilay boqol naf.

Allaah swt wuxuu cafiyay haweeney sineysatay kaliya maadaama ay biyo siisay eey haraadsan.

Allaah swt wuxuu cafiyay aadam kadib markii uu rabbigiis ku caasiyay.

Allaah swt wuxuu cafiyay nin reer banii israa'iil ah oo ku caasiyay kana fogaaday Alle muddo 40 sano ah, intaa kadib ninkii markii uu Tawbad keenay oo rabbigiis dib ugu laabtay, rabbiga danbi dhaafka badan uu udanbi dhaafay.

Allaah swt wuxuu u danbi dhaafay nin kale oo reer banii israa'iil ah oo u Tawbad keenay, ninkaas sababtiisana uu reer banii israa'iil ku siiyay roob

Wuu cafiyay wuu cafiyay,

Sidaas ayeynu nahay haddii aan nahay banii aadam, waan qaldanaa waan saxnaa, haddii Alle uu yahay rabbigeen wuu innagu aqbalaya qaladaadkeenna iyo danbiyadeenna, wuuna inoo danbi dhaafaya, marka aan danbi dhaaf weydiisano oo u Tawbad keenno innaga oo adoomadiisa ah, haddaba maxeeynan innaga dadka u cafineyn innaga oo banii aadam ah.

Gaar ahan haddii qofka qaladka kaa galay uu yahay qof aad jeceshahay, oo aad muddo dheer wada nooleydeen, nasiib darro, hadda waxaad ka tageysa qofkii aad jecleyd oo aad hilmaameysaa maalmihi quruxda badnaa ee aad wada qaadateen, kaliya qalad yar ama danbi yar uu sameeyay, markas kadib ayuu dib kugu soo noqonaya isaga oo qoomameynaya, cafisna kaa dalbanaya, adigana waxaad iska dhigeysaa mid aan dan ka laheyn.

Xasuusnoow.

Marka uu dhinto qofkaas aad jeceshahay waxaad xasuusan doonta dhammaan maalmihii quruxda badnaa ee aad wada qaadateen waxaadna iloobi doontaa qaladaadkiisa iyo danbiyadiisa oo dhan, waxaadna jeclaaneysaa in uu dib kugu soo laabto si aad u cafiso. laakiin iska hilmaam markaas in uu dib kuugu soo noqdo.

Arrintaasna maskaxdaada ku haay.

﴿ إِنِّي أَخَافُ أَن يَمَسَّكَ عَذَابٌ مِّنَ الرَّحْمَٰنِ ﴾

"Aniga waxaan ka cabsan inuu ku taabto cadaabka rabbiga raxmaanka ah"

Jacaylka dhabta ah waa inaad cadaabka Alle uga cabsato qofka aad jeceshahay.

Qofka aan dan ka lahayn aakhiradaada, dhab ahaantii, adigana wax dan ah kaama laha.

﴿ عَسَى اللَّهُ أَن يَأْتِيَنِي بِهِمْ جَمِيعًا ۚ ﴾

"Wuxuu u dhawyahay Alle inuu ii keeno dhammaan"

U sheeg dhammaan rajooyinkaaga...

U sheeg dhammaan riyooyinkaaga...

U sheeg dhammaan himilooyinkaaga...

U sheeg dhammaan waxa aad jeceshahay:

Dhammaantood inaad heli doonto, haddii Allaah idmo.

﴿ لَا تَخَفْ وَلَا تَحْزَنْ إِنَّا مُنَجُوكَ ﴾

"Ha cabsan hana tiiraanyoon, waanu ku badbaadin adiga"

Haka baqin kuwa ku daba jooga habeen iyo maalin, dartoodna ha u murugoon.

Alle waa kan ugu fiican ee la talo saarto, uguna fiican ee wax ilaaliya.

Kaliya wuxuu kaa rabaa inaadan baqan oo aadan murugoon.

Natiijaduna waa: "Annaga ayaa ku badbaadinayna."

﴿ وَدَعْ أَذَاهُمْ وَتَوَكَّلْ عَلَى اللَّهِ ﴾

"Dhibkooda ha u aabayeelin, rabbina

talo saaro isagaa ku filan wakiile"

Ka leexo dhibka, hakaa fogaadee oo u naso maskaxiyan.

U daa daalka, hakaa fogaadee oo u naso maskaxiyan.

U daa dhibaatooyinka, hakaa fogaadaan oo u naso maskaxiyan.

Waxba haka jawaabin dhibka, haddii uu kaaga yimaado dadka ama shaydaanka.

Ha u ogolaan dhibka inuu ku hareeyo, balse is dhaafi, sida uu Rabbi ku faray adiga oo isaga ku tiirsan. Waayo, waxaad tahay addoonkiisa, wuuna kugu filan yahay.

﴿ لَا تَحْزَنْ إِنَّ اللَّهَ مَعَنَا﴾

"Ha walbahaarin Alle ayaa inala jiree"

Haddii aad samaynayso waxyaabo:

Kuwaas oo Rabbigaaga ka qosliya,

Kuwaas oo Rabbigaaga ka xishoodsiinaya,

Kuwaas oo Rabbigaaga ka yaab geliya,

Xusuusnow in murugadaadu ay dhammaan doonto, waayo Allaah waa kula jiraa.

﴿ هُوَ أَعْلَمُ بِكُمْ ﴾

"Rabbi ayaa idinkaga xog ogaalsan"

Boqorka boqorrada ayaa abuuray qalinka 50,000 sano ka hor inta uusan abuurin dhulka iyo samooyinka, wuxuuna qalinka ku yiri: "Qor." Markaas ayuu qoray wax kasta oo aad samayn doonto! Wuxuu qoray wax kasta oo aad heli doonto, ha ahaato risqi ama ilaalin.

Is daji...

Alle ayaa kaaga aqoon badan naftaada tan iyo markii aadan jirin, waana isaga midka wanaajiyay qorshaha arrimahaaga intaadan adduunka imaan.

waa Ilaahay, sidaas darteed is daji.

Wax walba si fiican ayay u dhici doonaan haddii Alle idmo.

﴿ قُلْنَا لَا تَخَفْ ﴾

"Waxaan nidhi ha cabsan"

Rabbiyoow, qalbigeyga ayaa i gubanaya

"Waxaan nidhi ha cabsan"

Dhibaatooyin badan ayaa i haysta, rabbiyoow

"Waxaan nidhi ha cabsan"

Waan ku maqlay oo kuu hogaansamay rabbiyoow. maadaama aan ahay addoonkaaga, ma cabsan doonno.

﴿ إِنَّ اللَّهَ وَمَلَائِكَتَهُ يُصَلُّونَ عَلَى النَّبِيِّ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا صَلُّوا عَلَيْهِ وَسَلِّمُوا تَسْلِيمًا ﴾

"Alle iyo malaa'igtiisa waxay ku sallin (amaani) Nebiga, ee kuwa xaqqa rumeeyow ku salliya korkiisa oo salaama salaan"

Ibnu Taymiyyah Alle ha u naxariistee ayaa yiri:

Salaadda Nebiga (ﷺ) waa bilowga ducooyinka, dhexda ducooyinka, iyo dhammaadka ducooyinka, waana mid ka mid ah sababaha ugu xooggan ee loo rajeynayo in lagu helo ducooyinka oo dhan.

﴿ فَلَا تَقُل لَّهُمَا أُفٍ وَلَا تَنْهَرْهُمَا ﴾

"Haku dhihin uf, hana canaanan"

Imaam Shaafici ayaa la weydiiyay: Qofku ma la doodaa waalidkiis?

Wuxuu ku jawaabay: "Maya, xitaa kabahooda lama doodi karo."

Xitaa haddii aad xaq ku sugan tahay iyaguna ay khalad ku jiraan, wanaag kula dhaqan adduunka.

Ilaahay Sarreeye wuxuu yiri:

﴿ وَإِن جَاهَدَاكَ عَلَىٰ أَن تُشْرِكَ بِي مَا لَيْسَ لَكَ بِهِ عِلْمٌ فَلَا تُطِعْهُمَا ۖ وَصَاحِبْهُمَا فِي الدُّنْيَا مَعْرُوفًا ﴾

"Hadday kugula dadaalaan (labada waalid) inaad ii shariig yeesho (ila wadaajiso) waxaadan aqoon u laheyn haku adeecin kulana nooloow adduunka si fiican"

﴿ وَاللَّهُ فَضَّلَ بَعْضَكُمْ عَلَىٰ بَعْضٍ فِي الرِّزْقِ ۚ ﴾

"Alle wuu ka fadilay qaarkiina qaar risqiga"

Sheekha lagu magacaabo Dandaawi wuxuu yiri:

Risqigaaga cidna kuuma diidi karto, qof kale risqigiisana cidna ma awoodo inay ku siiso, wixii kuu qoran waad heli doontaa, xitaa haddii aad tabar daran tahay, waxa aan kuu qorneynna ma heli doontid, xitaa haddii aad xoog badan tahay, qalinkii waa la kor yeelay, warqaddana way qalashay.

﴿ وَمَا مِن دَابَّةٍ فِي الْأَرْضِ إِلَّا عَلَى اللَّهِ رِزْقُهَا ﴾

"Dhul socod kasta risqigeedu wuxuu saaran yahay Alle"

Risqigeyga iyo risqigaaga waa wax jaan-go'an.

Xitaa quraanshada yar ee tabarta daran, Rabbigeen kor ahaaye wuxuu damaanad qaaday risqigeeda ilaa ay dhimato.

Sidaas darteed, is daji.

﴿ الْيَوْمَ نَخْتِمُ عَلَىٰ أَفْوَاهِهِمْ وَتُكَلِّمُنَا أَيْدِيهِمْ وَتَشْهَدُ أَرْجُلُهُم بِمَا كَانُوا يَكْسِبُونَ ﴾

"Maanta waxaan daboolaynaa afkooda waxaana nala hadli gacmahooda waxaana ku marag furi lugahooda waxay kasban jireen"

Nebiga (ﷺ) waxaa laga weriyay in uu yiri:

Banii aadamku marka waaga u baryo, jirka oo dhan wuxuu la hadlaa carrabka oo yiraahdaa:

"Alle inooga cabso, innagu waxaan nahay qeyb adiga kaa mid ah, Haddii aad toosto, waan tooseynaa, haddii aad qalloocatana, waan qalloocaneynaa."

Isu diyaari xisaabtan weyn!

Ilaahay wuxuu ku weydiin doonaa eray kasta oo aad tiri ama qormo kasta oo aad qortay.

Badbaadi naftaada, haddii kale waad halaagsami doontaa.

﴿ فَلَا تَذْهَبْ نَفْسُكَ عَلَيْهِمْ حَسَرَاتٍ ﴾

"Yeysan naftaadu ku tagin walbahaarkooda"

Waqtiga ha u lumin iyaga dartood, naftaadana iyaga dartood ha murug galin, haddii aad wanaag u sameyso iyaga balse aadan ka helin wax wanaag ah, ha walwalin oo ha u dayicin naftaada iyaga dartood, waqtigaaga ha lumin adiga oo ka murugoonaya iyaga.

Waxaad leedahay nolol kuu gaar ah, naftaaduna xaq ayay kugu leedahay, ku noolow nolol wanaagsan oo ka faa'iideyso waqtigaaga, samee waxyaabo naftaada anfacaayo, kuwaas oo raalli galinaya Rabbigaaga, ka dhig taasi ujeeddadaada ugu weyn, waana taas sababta asaasiga ah ee laguu abuuray.

﴿ فِي قُلُوبِهِم مَّرَضٌ ﴾

"Quluubtey ka bukaan"

Cajiib!

Sidee bay ugu dhiiradeen kuwa aan jecleyn maalmo hore, in ay qalbiyadeenna si naxariis darro ah u dhaawacaan?

Ibnul Qayim (Alle ha u naxariisto) ayaa yiri: "Qalbiga ugu fog Ilaahay waa qalbiga ugu adag."

﴿ قُلْ هَلْ نُنَبِّئُكُم بِالْأَخْسَرِينَ أَعْمَالًا ﴾

"Waxaad dhahdaa ma idiin warramaa
kuwa khasaaro badan camallo"

Waa kuma kuwaasi rabbiyoow:

﴿ الَّذِينَ ضَلَّ سَعْيُهُمْ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَهُمْ يَحْسَبُونَ أَنَّهُمْ يُحْسِنُونَ صُنْعًا ﴾

"Waa kuwuu dhumaya camalkoodu nolosha adduun
iyagoo isuna malayn inay wanaajin camalka"

﴿ وَلَا تَقْفُ مَا لَيْسَ لَكَ بِهِ عِلْمٌ ﴾

"Hana dhihin (raacraacin waxaadan u cilmi laheyn)"

Bilowga sheekada. Haddii dameerka qoyska Khaddaab uu islaamo, ma islaami doono Cumar.

Dhammaadka sheekada. Cumar wuxuu ku aasan yahay Nebi Muxammad (ﷺ) dhinaciisa.

Sidaas darteed, go'aankaaga ha u arkin mid aan wax laga baddeli karin.

﴿ إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ التَّوَّابِينَ ﴾

"Ilaahaynna wuxuu jecelyahay kuwa Tawbadda badan"

Allaah SWT wuu jecel yahay kuwa si galgaceyl leh u Tawbad keena, danbiilayaashu haddii ay ogaan lahaayeen taas, marna danbi ma aysan sameyn lahayn, haddii ay ogaan lahaayeen sida uu boqorka boqorrada ugu farxo Tawbad keenkooda iyo sida albaabkiisa ugu taagan yahay, indhahoodu lama aysan ooyi lahayn, wax aan ka ahayn aragtidiisa, isagu waa gacaliyaheenna, wehelkeenna, farxaddeenna, barbaariyaheenna, subxanahu wa tacaala.

Xasuusnoow in Nebi Maxamed (ﷺ) uu Tawbad keeni jiray maalintii in ka badan toddobaatan jeer, isaga oo Nebi ah, Sidaa darteed, imisa jeer ayaad adiga u baahan tahay maalin kasta?

﴿ يُرِيدُ اللهُ أَن يُخَفِّفَ عَنكُمْ ﴾

"Wuxuu dooni Alle inuu idinka fudeydiyo"

Ogow akhriste. Allaah wuxuu inala doonayaa fudeyd, balse innaga waxa aan dooneyo innaga oo aan dareensaneyn waa wax adag.

Markaan culeys dareeno, Alle ayaa ka barinnaa fudeyd si uu xaaladeenna u fudeydiyo.

Sidaas darteed, si walba oo ay kuugu adkaato, ogow in Allaah swt uu fudeyd ku siin doono.

Taasi waa xaqiiqada ku jirta hadalkiisa.

﴿ يُرِيدُ اللهُ أَن يُخَفِّفَ عَنكُمْ ﴾

"Wuxuu dooni Alle inuu idinka fudeydiyo"

﴿ فَأَسَرَّهَا يُوسُفُ فِي نَفْسِهِ وَلَمْ يُبْدِهَا لَهُمْ ﴾

"Markaasuu Yuusuf u qarsaday naftiisa oosan u muujin"

Qarinta xanuunka iyo dhibaatoyinka waa hab-raac nabawi ah, markaad murugooto, raadi raalli ahaansho, markay dhibaato ku soo wajahdo, raadi cafis, Ilaah subxaanahu wa tacaalaa ayaa ku garab istaagi doona, wuxuuna ku siin doonaa sharaf dheeraad ah.

﴿ إِنَّ الَّذِينَ فَتَنُوا الْمُؤْمِنِينَ وَالْمُؤْمِنَاتِ ثُمَّ لَمْ يَتُوبُوا
فَلَهُمْ عَذَابُ جَهَنَّمَ وَلَهُمْ عَذَابُ الْحَرِيقِ ﴾

"Kuwa mu'miniinta rag iyo haweenba jirraba haddana aan tawbadkeenin waxay mudan caddibaadda jahannamo iyo caddibaad gubi"

Xasan Al-Basri Alle ha u naxariistee waxa uu yiri: Fiiri deeqsinimadaas iyo naxariistaas, kuwa uu jecel yahay ayay fitneeyeen, isaguna wuxuu ugu baaqaya tawbad keen iyo danbi dhaaf.

﴿ خُذُوا زِينَتَكُمْ عِندَ كُلِّ مَسْجِدٍ ﴾

"Qaata quruxdiinna (dharkiinna) masaajid kasta agtiisa"

Waxaa jiray qaar ka mid ah salafkii hore oo xiran jiray dhar qaali ah oo qiimo badan marka ay salaadda tukanayan, iyaga oo dhihi jiray: "Rabbigey ayaa mudan in aan isugu qurxiyo salaaddeyda."

Daryeel caraftaada iyo nadaafadda dharkaaga.

Sidoo kale, Ibnu Kathiir (Alle ha u naxariisto) waxa uu yiri: "Waxaa la suneeyaa in la is qurxiyo marka salaad la tukanayo, gaar ahaan maalinta Jimcaha iyo maalinta Ciida."

﴿ وَلَا تَمْشِ فِي الْأَرْضِ مَرَحًا ﴾

"Hana u soconin dhulka Kibir"

"Xakamee socodkaaga"

﴿ وَاغْضُضْ مِن صَوْتِكَ ﴾

"Hoosna u dhig codkaaga"

"Xakamee codkaaga"

﴿ وَلَا تَمُدَّنَّ عَيْنَيْكَ ﴾

"Hawtaagin indhahaaga"

"Xakamee aragtidaada"

﴿ وَلَا تَجَسَّسُوا ﴾

"Hana is jaasuusina"

"Xakamee dhegahaaga iyo indhahaaga!"

﴿ وَلَا تُسْرِفُوا ﴾

"Hana is xad gudbina"

"Xakamee cuntadaada iyo cabbitaan kaaga!"

﴿ وَقُولُوا لِلنَّاسِ حُسْنًا ﴾

"In ay dadka u dhahaan wanaag"

"Xakamee ereyadaada!"

﴿ وَلَا يَغْتَب بَّعْضُكُم بَعْضًا ﴾

"Qaarkiinna qaar yuusan xamanin"

"Xakamee fadhigaaga!"

﴿ فَأَصْلِحُوا بَيْنَ أَخَوَيْكُمْ ﴾

"Wanaajiya walaalihiin dhexdooda"

Hagaaji waxa aad haleysay ama walaalkaaga uu haleeyay, hana kala taginina, hagaaji waxa ku jira qalbiyada walaalahaaga, oo sheydaanka wakiil buuxa ha u noqon, Noqo wakiil ka socda Alle iyo Rasuulkiisa, oo hagaaji wixii khilaaf ah ee idinka dhex dhacay adiga iyo walaalahaa, Waayo, mu'miniinta dhammaantood waa walaalo, waxa ayna ku walaaloobeen diinta Alle SWT.

﴿ وَأَوْفُوا بِالْعَهْدِ ﴾

"Oofiya ballanka"

Noqo mid daacad ah mar walba, maadaama dhammaadka aayaddan ay ku jirto digniin cabsi gelin leh.

﴿ إِنَّ الْعَهْدَ كَانَ مَسْئُولًا ﴾

"ballanka waa lays warsane"

sidaas darteed ha khiyaamin aaminnaada dadka.

﴿ وَلَا تَجْعَلْ يَدَكَ مَغْلُولَةً إِلَىٰ عُنُقِكَ وَلَا تَبْسُطْهَا كُلَّ الْبَسْطِ فَتَقْعُدَ مَلُومًا مَّحْسُورًا ﴾

"Ha yeelin gacantaada mid ku xidhan luquntaada

hana wada fidin dhammaan ood noqo

mid la dagaalo oo tabar gaba"

Rabbigeenna subxaanahu wa tacaala wuxuu jecel yahay dheelitirnaanta, dhexdhexaadnimada, xikmadda iyo cadaaladda dhammaan arrimaha, Sidaa darteed, dheelitir arrimahaaga si noloshaada ay u noqoto mid qurux badan.

﴿ وَلَا تَمْشِ فِي الْأَرْضِ مَرَحًا ۖ إِنَّكَ لَن تَخْرِقَ الْأَرْضَ وَلَن تَبْلُغَ الْجِبَالَ طُولًا﴾

"Hana u soconin dhulka kibir, illeen ma jeexi kartid dhulka, kumana gaadheysid buuraha dherare"

Is-xakameynta

Adiga dhulka kuma dilaacin kartid socodkaaga, buurahana kuma burburin kartid kibirkaaga, Xitaa dhirirkaaga ma gaari karo buurta ugu yar.

Ibnu Cumar ayaa arkay nin si kibir ah u soconaya, wuxuu yiri: "Shaydaanku wuxuu leeyahay walaalo."

﴿ إِنَّ الْمُبَذِّرِينَ كَانُوا إِخْوَانَ الشَّيَاطِينِ ﴾

"Illeen kuwa xadgudba waa walaalo shaydaane"

Xad-gudubka iyo ku takri-falka waa sifooyin uu leeyahay sheydaanka, sidaas darteed adiguna ha noqon sheydaamada walaalkood.

﴿ وَإِذَا مَا غَضِبُوا هُمْ يَغْفِرُونَ ﴾

"Markay cadhoodaanna u cafiya"

Noqo mid dulqaad badan;

Dulqaadku waa mid ka mid ah akhlaaqda wanaagsan iyo dabeecadaha sharafta leh, Rabbigennu waa mid dulqaad badan, wuxuuna jecel yahay kuwa dulqaadka badan, Xakamee cadhadaada, hana ugu jawaabin qofka ku xumeeya wax aan wanaag, cafis, iyo saamaxaad ahayn, Ha iloobin in abaal-marintu ay ku dhisantahay ficilka la sameeyo, cafi si uu Rabbiga dambi-dhaafka badan kuu cafiyo.

﴿ وَتُوبُوا إِلَى اللَّهِ جَمِيعًا ﴾

"Una tawbad keena oo u noqda

xagga Alle adinka oo dhan"

Tawbad keenkaaga badan ee soo noqnoqda, kaas oo aadan weligaa ka daalin maalinna, iyo dambi dhaaf weydiisashadaada, waa calaamad kheyr, waa damiir uu Ilaahay ku nooleeyay qalbigaaga si uu waddada Jannada kuugu hago.

Fadlan ha iska indho tirin, ee sii wad.

﴿ وَيْلٌ لِلْمُطَفِّفِينَ ﴾

"Wuxuu halaag u sugnaaday kuwa xaqa nusqaamiya"

Ka fogow hantida dadka.

﴿ وَيْلٌ لِّكُلِّ هُمَزَةٍ لُّمَزَةٍ ﴾

"Halaag wuxuu u sugnaaday xanle
wax ceebeeya oo dhan"

Ka fogow sharafta dadka.

﴿ وَإِنَّكَ لَعَلَىٰ خُلُقٍ عَظِيمٍ ﴾

"Waxaana kuu sugnaaday dabeeco fiican oo weyn"

Rabibaa ku koriyoo
Jidkii toosanaa iyo
Kugu dhawray samohoo
Fadli kuugu deeqoo
Dabci same mar kaa dhigay
Qaadirkii ku uumaa
Qurux kuu dhameeyoo
Marna deeqsi sharaf iyo
Qawlkiisa wacan iyo
Khayr kugu macsuumoo
Adna daacad nimadiyo
Diintiyo hanuunkaad
Gaadhsiisey dunidoo

Adaa daaray nuurkee

Darajaalihiiyoow

Adaa duni gadaasheed

Maalinkaan lays hareer galin

Ruuxna ruux haybsanaynin

Xagaa lagu soo hirtaaye

Shaafacana lagaa helaaye

Rabibaa rays barwaaqiyo

Kaa dhigay naruuree

Naxariisti dunidoow

Raadkaa qof raaciyo

Qofkii kula rafiiqaan

Waligii rafaad iyo

Mudanayn darxumo oo

Anagoon dariiq toosaniyo

Dal silloon aqoon baad

Dayaxii aduunkoow

Sidii dayaxa nuurkiisa

Jidkii noo iftiimisee

Rabigay ku muunee

﴿ إِذْ نَادَىٰ رَبَّهُ نِدَاءً خَفِيًّا ﴾

"Markuu u dhawaaqay rabbigis dhawaaq qarsoodi ah"

Nebi Ciise (CS) wuxuu baryay Alle isagoo si hoose u duceysanaya, wuxuu hoos u dhigay ducadiisa oo qariyay, balse Boqorka boqorrada, Alle weynaha, ayaa maqlay oo ogaaday waxa uu qalbigiisa ku qarinayay ee murugada iyo jabka ah, Markaas ayuu Alle ka aqbalay baryadiisa, uguna deeqay wixii uu dalbaday.

﴿ وَسِيقَ الَّذِينَ اتَّقَوْا رَبَّهُمْ إِلَى الْجَنَّةِ زُمَرًا ﴾

"Waxaana loo wadi kuwii ka dhawrsaday rabbigood xagga jannada iyagoo koox ah"

Ibnu Al-Qayim wuxuu yiri isaga oo fasiraya aayaddan. "Alle waa uu diiday in uu dadka Jannada geliyo iyaga oo kaligood ah, ee qof walba iyo saaxiibkiis ayaa Jannada si wada jir ah u galaya."

Sidaas darteed, waxaan Alle sarreeye ka baryayaa inuu aniga iyo idinkaba Jannada si wada jir ah inoo wada geliyo.

﴿ وَقُل رَّبِّ ارْحَمْهُمَا كَمَا رَبَّيَانِي صَغِيرًا ﴾

"Oo dheh rabbiyoow u naxariiso

siday ii koriyeen anoo yar"

Xasuusaha ugu quruxda badan ee carruurnimadayda waa in aan seexan jiray qolka fadhiga, markaas ayaan toosi jiray subaxii aniga oo jiifa sariirtayda.

Allow ka yeel gacmaha aabbahay iyo hooyaday kuwo aysan waligood naarta taabanin.

﴿ إِنَّهُ هُوَ يُبْدِئُ وَيُعِيدُ ﴾

"Alle isagaa khalqiga ahaysiiyay soona celin"

Wuxuu dib kugu soo celiyaa farxaddii.

Wuxuu dib kugu soo celiyaa raynrayntii iyo farxaddii kaa luntay.

Musiibada ayuu u baddelaa barwaaqo, wuxuuna soo celiyaa xiriirkii go'ay, wuxuu billaabaa wax walba oo aan jirin, sida uu isagu doonayo ayuu u billaabaa.

Waa Allaah SWT.

﴿ يَا أَيُّهَا النَّبِيُّ قُل لِّأَزْوَاجِكَ وَبَنَاتِكَ وَنِسَاءِ الْمُؤْمِنِينَ يُدْنِينَ عَلَيْهِنَّ مِن جَلَابِيبِهِنَّ ۚ ذَٰلِكَ أَدْنَىٰ أَن يُعْرَفْنَ فَلَا يُؤْذَيْنَ ۗ وَكَانَ اللَّهُ غَفُورًا رَّحِيمًا ﴾

"Nebiyoow ku dheh haweenkaaga iyo gabdhahaada iyo haweenka mu'miniinta isku dada xijaabkiinna (shukadiinna) taasaa idiinku dhaw in laydin aqoonsado oon laydin dhibine, Allenna waa dambi dhaafe naxariista"

Haweenka ugu fiican dunida waa kuwa astura jirkooda.

U sheeg haweeneyda xishoodka badan in aragtideeda ay dadka ku hareeraysan ku beerto adkeysi iyo sharaf, dadkuna marka ay arkaan u duceeya iyada iyo ciddii barbaarisay.

﴿ وَأْتُوا الْبُيُوتَ مِنْ أَبْوَابِهَا ﴾

"Ugaga imaada guryaha albaabada"

Walaashey!

Yeysan ku khiyaamin dawacada dhagarta badan, iyada oo ku leh: "Waa kan lambarkeyga, waxaan doonayaa inaan ku guursado." Haddii uu run sheegayo, gurigaaga albaabka hakasoo galo oo hakuso doonto, Yuusan kugu khiyaamin erayo aan xaqiiqo aheyn oo sharftaada wax u dhibaya, ku dhag xadhiga xishoodka, oo ku dayo hooyadaa Caa'isha, oo dhinaceeda u orod hana kasoo jeesan dhinaceda, ha uga fuqin gacanta hooyadaa nin khiyaano badan dartiis.

Allaah ka dhowrsada, oo ka xishooda dumarkii Muslimiintaow, ku adkeysta oo ku dhagnaada diinta Alle ee xaqqa ah.

﴿ هُوَ اللَّهُ الَّذِي لَا إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ الْمَلِكُ الْقُدُّوسُ السَّلَامُ الْمُؤْمِنُ الْمُهَيْمِنُ الْعَزِيزُ الْجَبَّارُ الْمُتَكَبِّرُ ۚ سُبْحَانَ اللَّهِ عَمَّا يُشْرِكُونَ ﴾

"Ilaahay isaga mooyee ilaah kale ma jiro waa xaakim daahir ah, nabadgeliye, rumeeye, wax walbana ilaaliye xoog iyo weynaan isagaa leh waana ka nasahan yahay waxay cibaadada la wadaajinayaan"

Bukhaari iyo Muslim waxay wariyeen, Nebi Maxamed (ﷺ) in uu yiri: "Alle SWT wuxuu leeyahay sagaal iyo sagaashan magac, qofkii xifdiya waxa uu galayaa Jannada."

Haddaba, xifdi magacyadaas, ka fikir macnahooda, oo ku dhaqan si aad u hesho naxariista Alle ugana fogaato naarta.

﴿ إِنَّهُ عَلِيمٌ بِذَاتِ الصُّدُورِ ﴾

"Alle waa ogyahay waxa laabta ku jira"

Wuxuu kuu sheegay inuu yahay mid qalbiyada xog ogaal u ah, waayo wuxuu ogyahay inay jiraan waqtiyo aad mareyso oo aadan awoodin inaad hesho erayo ku habboon ducada, Rabbiga naxariista badan, isaga ayaa kaaga xog ogaal san naftaada, waa naxariis badane kaaga naxariis badan naftaada, waa dhimriye naftaada kaaga dhimrin badan, Haddaba, daji qalbigaaga, oo ku kalsoonow inuu ku garab taagan yahay.

﴿ وَقَالَ إِنِّي ذَاهِبٌ إِلَىٰ رَبِّي سَيَهْدِينِ ﴾

"Wuxuu yiri anigu waxaan aadi rabbigey wuuna i toosin"

Carruurta waxay u tagaan hooyadood si ay ugu cabiraan dhibkooda, adiguna sidoo kale waxaad noqon kartaa carruur marka aad u tagto oo la hadleyso Rabbigaaga.

Allaah waa ka sarreeya tusaaleyn kasta.

﴿ إِنَّ عِبَادِي لَيْسَ لَكَ عَلَيْهِمْ سُلْطَانٌ ۚ وَكَفَىٰ بِرَبِّكَ وَكِيلًا ﴾

"Addoomadayda kuma lihid xujo, rabbigoodna waa ku filan yahay ilaaliye"

Sheydaanku awood uma laha addoomada Raxmaanka, haddaba is daji.

Sheydaanku awooddiisa waa waswaasin iyo dhagar, Haddii aad aragto sheydaanka oo ku fara gelinayo, dib ugu laabo heerka cibaadadaada iyo xiriirka aad Rabbigaaga la leedahay.

﴿ وَلَوْلَا أَن ثَبَّتْنَاكَ لَقَدْ كِدتَّ تَرْكَنُ إِلَيْهِمْ شَيْئًا قَلِيلًا ﴾

"Hadaanan ku sugin waxaad u dhawaan lahayd
inaad u iilato xagooda wax yar"

Allaah swt waxa uu la hadlay rasuulkiisa, rasuulka Allena wa midka ugu dhameyska tiran khaqiga Alle shaki la'aan, haddii aysan ahan laheyn amaanta uu Allaah swt amaanay Nebigiis waa loo cabsan lahaa rasuulka Alle, bal kawaran aniga iyo adiga, sidaa darteea wanaaga aad sameyso waxba yaana kula noqon, oo Alle weydiiso sugnaan oo dheh rabbiga qalbiyada rogrooow qalbigeyga ku sug diintaada.

﴿ تُسَبِّحُ لَهُ السَّمَاوَاتُ السَّبْعُ وَالْأَرْضُ وَمَن فِيهِنَّ ۚ وَإِن مِّن شَيْءٍ إِلَّا يُسَبِّحُ بِحَمْدِهِ وَلَٰكِن لَّا تَفْقَهُونَ تَسْبِيحَهُمْ ۗ إِنَّهُ كَانَ حَلِيمًا غَفُورًا ﴾

"Waxaa u tasbiixsada (qaddariya) Alle samooyinka todobada ah iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeya, waxaan Alle u tasbiixsaneyn ama ku mahdinayn ma jiro, waydaanse garanayn tasbiixdooda, rabbina waa dulsame dambi dhaafa"

**su'aal iyo jawaab**

Muxuu Allaah swt aayaddaan ugu dhameystiray labaddas magac.

- Dulsame, waayoo Allaah swt dhagaha dadka ayuu u diiday in ay maqlan tasbiixda makhluuqaadka kale, haddii ay maqli lahaayenna uma aysan dulqaadan kari laheyn.
- Danbi dhaafe, banii adamku mararka qaar waa ilaawan oo ka gaabiyan tasbiixda boqorka boqorrada marka la isbarbardhigo xuska aan Alle xusno iyo mida makhluuqaadka kale waa mid cabsi leh, laakiin Allaah

waa dambi dhaafe wuxuuna innagaga sare mariyay makhluuqa kale hadal iyo caqli.

﴿ وَأَوْصَانِي بِالصَّلَاةِ ﴾

"Wuxuu ii dardaarmay salaadda"

Haddii midkiin uu arki lahaa qeyb ka mid ah Jannada, dhabarka ayuu taagi lahaa salaad badan awgeed, taasi waa quruxda Jannada, bal kawaran quruxda Boqorka Jannada abuuray?!

Sidaas darteed, haka tagin salaadda inta aad nooshahay, si aad ugu guuleysato Jannada waareysa iyo macaanka aragtida Alle, Rabbiga samada iyo dhulka.

﴿ سُبْحَانَ الَّذِي أَسْرَىٰ بِعَبْدِهِ لَيْلًا ﴾

"Waxa Nasahan (Ceeb ka fog) Eebaha

ka guuriyey Addoonkiisa (Nabiga) Habeen"

Yaa garan kara

Bal qiyaas adiga oo habeen ku seexday arrin aad ka quusatay, markaana uu rabbi kuu kiciyo farxad iyo rajo sida uu u sameeyay Nebigiisa Muxammad safarkii dheelminta (israa iyo Micraaj).

﴿ الَّذِينَ امْتَحَنَ اللَّهُ قُلُوبَهُمْ لِلتَّقْوَىٰ ۚ لَهُم مَّغْفِرَةٌ وَأَجْرٌ عَظِيمٌ ﴾

"Waa kuwa Alle imtixaamay quluubtooda dhawrsasho darteed waxayna mudan yihiin dambi dhaaf iyo ajri weyn"

Amiirul Mu'miniin Cumar Binu Al-Khaddaab rc ayaa loo qoray su'aalahan:

Midkee fiican labada nin, midka aan marnaba ku fekereynin shahwada, maskaxdiisana aysan soo gelin, iyo midka naftiisa ay ku tuurtay xumaanta, balse Alle dartii uga tagay?

Cumar binu Al-Khaddaab rc ayaa ku jawaabay in midka naftiisa ay xumaanta doonayso, balse Alle dartii uga tagay uu ka fiican yahay.

﴿ الَّذِينَ امْتَحَنَ اللَّهُ قُلُوبَهُمْ لِلتَّقْوَىٰ ۚ لَهُم مَّغْفِرَةٌ وَأَجْرٌ عَظِيمٌ ﴾

"Waa kuwa Alle imtixaamay quluubtooda dhawrsasho darteed waxayna mudanyihiin dambi dhaaf iyo ajri weyn"

﴿ فَإِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُتَّقِينَ ﴾

"Alle waa jecel yahay dhawrsadayaasha"

Sheekh Ibnu Cuthaymiin (Alle ha u naxariistee) waxa uu yiri:

"Alle SWT qofka ka cabsada wuxuu siiya feejignaan (firasah) uu ku kala sooci karo dadka, markuu qofka arko si fudud ayuu ku kala garan karaa inuu yahay beenlow, run sheegaya, ama qof wanaagsan ama dambiile."

﴿ ادْعُونِي أَسْتَجِبْ لَكُمْ ﴾

"I barya aan idinka ajiibee"

Mid ka mid ah dadkii wanaagsanaa ayaa la weydiiyay.

"Ma taqaanaa qof ducadiisa la aqbalo?"

Wuxuu yiri: "Maya, laakiin waxaan aqaanaa midka aqbala ducooyinka."

Haddaba, qalbigaaga ku xir Abuuraha oo ha ku xirin makhluuqa.

﴿ مَاذَا أَجَبْتُمُ الْمُرْسَلِينَ ﴾

"Maxaad ugu jawaabteen rasuulladii"

Laguma weydiin doono qabrigaaga ama Maalinta Qiyaamaha: qabiilkee ayaad ka soo jeeddaa ama qabiilkee ayaad ku abtirsataa!

Laakiin waxaa lagu dhihi doonaa. "Maxaad ugu jawaabteen rasuulladii"

﴿ وَنَزَّلْنَا عَلَيْكَ الْكِتَابَ تِبْيَانًا لِكُلِّ شَيْءٍ وَهُدًى وَرَحْمَةً وَبُشْرَىٰ لِلْمُسْلِمِينَ ﴾

"Waxaana kugu dajinnay Kitaab oo ah

Caddaynta wax kasta iyo hanuun iyo

Naxariis iyo bishaarada dadka muslimiinta ah"

Haddii ay masiibo kugu dhacdo, u laabo Qur'aanka, waxaad ka heli doontaa.

- Sababaha keenay.
- Heerarkeeda marka aad u fiirsato, waxaad dareemi doontaa sidii in aayadaha Qur'aanka ay hadda soo dageen.
- Noocyada dadka iyo ujeedooyinkooda.
- Daawadeeda.
- Sida looga hortago.

﴿ إِنَّ الَّذِينَ يُلْحِدُونَ فِي آيَاتِنَا لَا يَخْفَوْنَ عَلَيْنَا ۗ أَفَمَن يُلْقَىٰ فِي النَّارِ خَيْرٌ أَم مَّن يَأْتِي آمِنًا يَوْمَ الْقِيَامَةِ ۚ اعْمَلُوا مَا شِئْتُمْ ۖ إِنَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ بَصِيرٌ ﴾

"Kuwa iilaya aayaadkanaga nagama qarsoona, ruux lagu tuuray Naarta miyaa khayrroon mise mid isagoo aamin ah imaan Qiyaamada, fala waxaad doontaan, Alle waxaad faleysaan waa arkaa"

Fariin ku socota addoon kasta oo mulxid ah!

U fiirso oo ka fakar aayaddan, hanjabaadda ka timid Boqorka boqorrada waxay jebin kartaa qalbiga!

Ugu dambeyntii, waxaa lagu yiri: "fala waxaad doontaan, Alle waxaad faleysaan waa arkaa"

﴿ إِنَّ الدِّينَ عِندَ اللَّهِ الإِسْلاَمُ ﴾

"Diinta xaqqa ah Alle agtiisa waa islaamka"

Islaamka waxa uu kulansaday

- Run
- Daacadnimo
- Samafal
- Heybad
- Samar
- Awood
- Asturnaan
- Deganaan
- Cafis
- Wada-shaqeyn
- Xishood
- Shaqo
- Naxariis
- Dhimrin
- Rajayn
- Dhowrsanaan
- Mahadnaq

- Is-hoosaysiin
- Daacadnimo
- Sir-ilaalin
- Caddaalad
- Jaceyl
- Danta guud inaad hormariso
- Nabad
- Qanaaco
- Deeqsinimo

قُلْ هُوَ اللَّهُ أَحَدٌ (1) اللَّهُ الصَّمَدُ (2) لَمْ يَلِدْ وَلَمْ يُولَدْ (3)
وَلَمْ يَكُن لَّهُ كُفُوًا أَحَدٌ (4)

"Waxaad dhahdaa (Nabiyow) Alle waa Kali (wehelna ma leh), Waana Sayid (deeqtoon), Alle wax ma dhalin, isna lama dhalin, Wax la mid ahna ma jiro"

Bukhaari iyo Muslim ayaa weriyey in xilligii Nebiga (ﷺ) uu jiray nin salaad kasta ku akhriyi jiray Suuratu Ikhlaas, Markii la weydiiyey sababta uu sidaas u sameeyo, wuxuu ku jawaabay: "Waayo waxay tilmaamaysaa sifooyinka Raxmaanka, aniguna waan jeclahay inaan akhriyo."

Markaas ayaa Nebi Muxammad (ﷺ) yiri: "U sheega inuu Alle kor ahaaye jecel yahay."

﴿ فَتَبَسَّمَ ضَاحِكًا مِن قَوْلِهَا ﴾

"Markaasuu muusooday isagoo ku qosli hadalkeeda"

Haddii aad rabto inaad hesho wax ka mid ah boqortooyadii Suleymaan (CS), ha dhaawicin dareenka quraanshada.

﴿ اقْرَأْ كِتَابَكَ كَفَىٰ بِنَفْسِكَ الْيَوْمَ عَلَيْكَ حَسِيبًا ﴾

"Waxaa Lagu Dhihi doona Akhri Kitaabkaaga

isagaa kuugu Filan Maanta Korkaaga Xisaabe"

Qaar ka mid ah salafkii ayaa yiri:

"Ilaahay waa kuu caddaalad sameeyay markii uu ku siiyay awood aad naftaada ku xisaabin karto."

﴿ قَالَ هَلْ آمَنُكُمْ عَلَيْهِ إِلَّا كَمَا أَمِنتُكُمْ عَلَىٰ أَخِيهِ مِن قَبْلُ ۖ فَاللَّهُ خَيْرٌ حَافِظًا ۖ وَهُوَ أَرْحَمُ الرَّاحِمِينَ ﴾

"Wuxuuna yidhi Miyaan idinku aamini karaa sidaan idiinku aaminay walaalkiis horay, Alle ayaa u khayrroon Dhawre waana Naxariis badane"

Qof mu'min ah hal god laba jeer lagama qaniino.

﴿ فَإِنَّ مَعَ الْعُسْرِ يُسْرًا ﴾

"Cidhiidhina waxaa la jira fudayd (faraj)."

Allaah wuxuu yiri: (La jira), mana uusan dhihin: (Kadib), u fiirsada oo ka fikira, addoomada Alloow!

Dhibka aad hadda ku jirto waxaa la socda fudayd...

Is deji, waxaad ku sugan tahay khayr.

﴿ إِنَّـهُمْ كَانُوا يُسَارِعُونَ فِي الْخَيْرَاتِ ﴾

"Waxayna ahaayeen kuwo u Deg dega Khayraadka"

Sababaha keena in uu dhibka ka dambeeyo faraj waxaa kamid ah aayaddan qaaliga ah oo kugu boorrineysa inaad dhaqso ugu degdegto wanaagga si aad ugu raalli geliso Rabbiga samooyinka, Nebiga (ﷺ) wuxuu yiri: "garo Alle xilliga raaxada, si uu kuugu garto xilliga dhibka."

Ogsoonow in camalkaaga wanaagsan ee aad sameyso wakhtiga raaxada uu ku anfici doono marka aad dhib ku jirto.

Nebiga (ﷺ) sidoo kale wuxuu yiri: "Qofkii jeclaan lahaa in uu Allaah ka aqbalo ducadiisa marka uu ku jiro xaalado adag (dhibaato), ha badiyo ducada wakhtiga raaxada."

﴿ وَالَّتِي أَحْصَنَتْ فَرْجَهَا فَنَفَخْنَا ﴾

"Tiina (Xusuuso) Dhawrtay Xubinteedaa waa (maryama)"

Allaah subxaanahu wa tacaalaa marar badan ayuu xusay Maryama (CS), mar kasta uu xuso wuxuu dadka xusuusiyaa inay ilaalin jirtay sharaafteeda iyo nafteeda.

Sidaas darteed, sharafta, awoodda, iyo karaamada haweeneyda waxay ku jirtaa ilaalinta iyo dhowrista sharaafteeda.

﴿ خَلَقَ السَّمَاوَاتِ بِغَيْرِ عَمَدٍ تَرَوْنَهَا ۖ وَأَلْقَىٰ فِي الْأَرْضِ رَوَاسِيَ أَن تَمِيدَ بِكُمْ وَبَثَّ فِيهَا مِن كُلِّ دَابَّةٍ ۚ وَأَنزَلْنَا مِنَ السَّمَاءِ مَاءً فَأَنبَتْنَا فِيهَا مِن كُلِّ زَوْجٍ كَرِيمٍ (10) هَٰذَا خَلْقُ اللَّهِ فَأَرُونِي مَاذَا خَلَقَ الَّذِينَ مِن دُونِهِ ۚ بَلِ الظَّالِمُونَ فِي ضَلَالٍ مُّبِينٍ ﴾

"Isaga abuuray Samooyinka Tiir aad aragtaan la'aantiis, dhulkana wuxuu ku tuuray Buuro (suga) inayan dhaqdhaqaaqin, wuxuuna ku fidiyey dhexdiisa daabad kasta, Samadana waxaan ka soo dejinay Biyo, waxaana ku soo bixiney nooc kasta oo quruxsan. (10) kaasi waa abuurkii Alle, ee i tusiya waxay abuureen kuwa ka soo hadhay Alle, saas ma aha, ee dulmi falayaashu waxay ku suganyihiin baadi Cad"

Faa'iidooyinka ka dhalanaya ku fakaridda iyo ka fiirsashada abuurista Alle waa inay banii'aadanka ku abuurto xigmad, kordhiso iimaanka, waxaa kusoo dego xasillooni ka timid Alle weyne, Cibaadadan waxaa loo yaqaannaa "cibaadada aamusan" oo qofka addoonka ah lagu abaalmariyo, looguna furo albaabo cilmi iyo aqoon.

﴿ وَرَبُّكَ يَخْلُقُ مَا يَشَاءُ وَيَخْتَارُ ۗ مَا كَانَ لَهُمُ الْخِيَرَةُ ﴾

"Rabbigaaga wuxuu Abuuraa wuxuu Doono oo Doorto, Doorasho ma Leh Iyagu (Dadku)"

Cumar Binu Al-Khaddaab wuxuu yiri:

"Khayrka oo dhan wuxuu ku jiraa qanacsanaanta, Haddii aad awooddo, qanac, Haddii aadan awoodinna, samir."

﴿ وَالْبَاقِيَاتُ الصَّالِحَاتُ خَيْرٌ عِندَ رَبِّكَ ثَوَابًا وَخَيْرٌ أَمَلًا ﴾

"Kuwa hadha ee wanaagsan yaa ku khayrroon rabbigaaga agtiisa abaalmarin una khayrroon yididiilo

(camalka fiican)"

Waxyaabaha wanaagsan ee sii hara waxaa ka mid ah.

- Subxaan Allaah (Ilaahay baa nasahan).
- Alxamdulillah (Mahad oo dhan Ilaahay baa leh).
- Laa ilaaha illa-Allaah (Ilaah xaq lagu caabudo ma jiro Allaah mooyee).
- Allaahu Akbar (Ilaahay baa weyn).

Waxaana loogu magac daray sidaas, waayo ajarkoodu waa mid sii jira, abaalmarintooduna aad bay u weyn tahay.

Ilaahayow carrabkayaga ka dhig mid qoyan oo daahir ku ah xuskaaga.

﴿ وَيَوْمَ نُسَيِّرُ الْجِبَالَ ﴾

"Xus maalinta aannu kaxayn doono buuraha"

Ma waxaad umalaynaysaa inuu awoodi waayo inuu kuu sahlo waxaad rajaynayso?

Taasi waa ka nasahan yahay rabbigayga, ma waxaad u malaynaysaa inuusan awoodin inuu kuu aqbalo ducooyinkaaga, kaa faydo balaayada, oo kuu rumeyo rajadaada?

Haa, Rabbiga Samada!

Waa Alle, adoonka Alloow!

Noqo mid fiiro u leh...

﴿ وَوَجَدُوا مَا عَمِلُوا حَاضِرًا وَلَا يَظْلِمُ رَبُّكَ أَحَدًا ﴾

"Wayna heli waxay camal faleen oo jooga, mana dulmiyo rabbigaa cidna"

Wax walba oo aad samaysay, iyo wax kasta oo aad mustaqbalka samayn doonto, waxaad ku arki doontaa Aakhiro!

Haddaba, wanaaji camalkaaga adduunyada, adoonka Alloow !

Si loo wanaajiyo dhammaadkaaga Aakhiro, waayo Alle waa Caddaalad sameeye mana ku dulmiyo abid.

﴿ أَكَفَرْتَ بِالَّذِي خَلَقَكَ مِن تُرَابٍ ثُمَّ مِن نُّطْفَةٍ ثُمَّ سَوَّاكَ رَجُلًا ﴾

"Ma waxaad ka gaaloowday rabbiga kaa Abuuray Carro, hadana dhibic markaas ku ekeeyey adoo nin ah."

Markasta oo aad sare isku qaaddo, kibirto, oo aad iska weyneyso khalqiga Alle korkooda...

xusuuso aayaddan weyn oo ku celceli naftaada, haddaba maxaa kugu wato isla-weyni iyo faan?

﴿ وَلَوْلَا إِذْ دَخَلْتَ جَنَّتَكَ قُلْتَ مَا شَاءَ اللَّهُ لَا قُوَّةَ إِلَّا بِاللَّهِ ﴾

"Maxaadan markaad gasho beertaada u dhihin wuxuu doone Alle, xoog ma jiro Alle mooyee"

Haddii aad aragto wax ku cajab geliya, dheh: "Maasha Allaah, laa quwwata illa billaah."

Waxba ma waayi doontid markaad qirto quruxda Alle oo aad barako ugu duceyso...

ha noqon mid maseyra oo naftaada iyo walaalahaaga Muslimiinta ah dhiba.

﴿ وَيَقُولُ يَا لَيْتَنِي لَمْ أُشْرِكْ بِرَبِّي أَحَدًا ﴾

"Isagoo leh shalleytee maanan la wadaajin rabbigey Cidna."

Khasaaraha ugu weyn, dambiyada ugu foosha xun, falalka ugu waa weyn, iyo shayga ugu hooseeya Alle xaggiisa waa Shirkiga (Alle in wax lala caabudo).

Shirkiga waa asalka sharta oo dhan, halka tawxiidkuna yahay aasaaska ujeeddada loo abuuray dadka, waa taaj madaxa lagu xiro iyo tiirka kheyrka iyo wanaagga oo dhan.

﴿ وَلَمْ تَكُن لَّهُ فِئَةٌ يَنصُرُونَهُ مِن دُونِ اللَّهِ وَمَا كَانَ مُنتَصِرًا ﴾

"Uma ahaanin koox u gargaarta oo ka soo hadhay Alle mana aha mid gargaarta."

Ha ku xidhnaanin cid aan ahayn Allaah, maxaa yeelay ma jiro mid gargaaraya oo aan isaga ahayn.

Haddii aad kaligaa tahay, weli waxaad tahay koox, mana noqon doontid koox adigoo kali ah, ilaa aad la jirto Allaah sareeye.

﴿ وَاضْرِبْ لَهُم مَّثَلَ الْحَيَاةِ الدُّنْيَا كَمَاءٍ أَنزَلْنَاهُ مِنَ السَّمَاءِ ﴾

"Uga yeel Nabiyow tusaale nolosha Adduunyo Biyo oo kale oon ka soo dejinay samada"

Allaah SWT waxa uu nolosha adduunyada u ekaysiiyay sida biyaha, waayo, biyuhu meel ma ku nagaadaan; waa sidaasoo kale adduunyada hal xaalad kuma sii nagaato.

Allaah kor ahaaye, markuu tusaale noogu soo qaato, si cajiib ah ayuu inoogu iftiimiyaa.

﴿ وَلَا تُطِعْ مَنْ أَغْفَلْنَا قَلْبَهُ عَن ذِكْرِنَا وَاتَّبَعَ هَوَاهُ وَكَانَ أَمْرُهُ فُرُطًا ﴾

"Hana adeeynin ruuxaan halmaansiinnay qalbigiisa Xusiddanada oo raacay hawadiisa uuna ahaaday amarkiisu xadgudub (iyo Xumaan)."

Hala saaxiibin qof aan mas'uul ka ahayn noloshiisa, oo arrinkiisa oo dhan yahay dayacaad, Mar baan la fadhiistay qof sheekadiisu markasta ku saabsanayd dharka, dahabka, safarrada, iyo waxyaabaha la iibsado, isagoo is moodsiinaya in waxyaabahaas ay waligood sii jiri doonaan.

Laga billaabo maanta, ka fiirso cidda aad la saaxiibeyso, oo ogow in saaxiibbadaadu ay yihiin qeyb adiga kaa mid ah, Waxaad ka qaadan doontaa saaxiibbadaada waxyaabo, ha noqoto hal shay ama waxyaabo badan.

- La saaxiib kuwa Qur'aanka xifdiyay, sidooda oo kale ayaad Qur'aanka u xifdin doontaa.
- La saaxiib kuwa wax akhriya, sidooda oo kale ayaad wax u akhrin doontaa.
- La saaxiib dadka sunnada ku dhaqma waxaad nooleyn doontaa sunnada sidooda.

- La saaxiib culimada waxaad noqon doontaa sidooda oo kale.
- La saaxiib dadka hal-abuurka leh waxaad noqon doontaa sidooda.
- La saaxiib kuwa rajada wanaagsan waxaad noqon doontaa mid faraxsan.
- La saaxiib dadka wanaagsan waxaad noqon doontaa sidooda oo kale.

Haddii aad cid la fadhiisaneyso, la fadhiiso dadka wanaagsan, haddii aad cid la tashaneyso, la tasho dadka caqliga badan.

﴿ أَمْ عِندَهُمْ خَزَائِنُ رَحْمَةِ رَبِّكَ الْعَزِيزِ الْوَهَّابِ ﴾

"Ma agtaadaa khasnadaha naxariista Rabbigaaga adkaada ee bixinta badan (khayrka) yahay."

Kaydadka Boqorka boqorrada (Allaah) marnaba ma dhammaanayo, Inta ay doonto baahidiinnu ha noqotee, isaga agtiisa wax weyn kuma aha.

Ugu yeer magacyadiisa (Al-Caziiz Al-Wahhaab), oo ku bari, waayo marwalba oo aad wax u baahan tahay, haddii aad sheegto, waxaas waad heleysaa, Wax walba oo kugu cuslaadana waa ay fududaan doonaan, Marwalba dheh

"Yaa Caziiz Yaa Wahhaab."

Eeg aayaddan quruxda badan.

﴿ حَتَّىٰ إِذَا ضَاقَتْ عَلَيْهِمُ الْأَرْضُ بِمَا رَحُبَتْ وَضَاقَتْ عَلَيْهِمْ أَنفُسُهُمْ وَظَنُّوا أَن لَّا مَلْجَأَ مِنَ اللَّهِ إِلَّا إِلَيْهِ ﴾

"Intuu kaga cidhiidhyamo dhulku isagoo waasac ah, kuna cidhiidhyantay naftoodu una maleeyeen (Yaqiinsadeen) inayna jirin meel la magan galo oon Alle ahayn."

Waa aayad si dhab ah u qeexaysa xaaladda dad badan oo maanta jooga, sidii in hadda lasoo dajiyay oo kale, si ay u bogsiiso dhaawacyadiinna.

Ha walwalin, Allaah wuu ku ogyahay, wuuna ku arkaa. Haddii aad murugo dareemayso, u laabo isaga.

Taasi waa daawadaada.

Rabbigayguna waa dhaqtarkayga.

﴿ وَاسْأَلُوا اللَّهَ مِن فَضْلِهِ ﴾

"Waydiista Alle Fadligiisa."

Sufyaan Binu Cuyaynah (Ilaahay ha u naxariistee) wuxuu yiri: "Ma uusan amrin in wax la weydiisto si uu wax u diido, balse wuxuu u amray si uu wax u siiyo."

Ilaahow, waxaan ku waydiisaneynaa fadligaaga weyn.

﴿ عَسَىٰ رَبِّي أَن يَهْدِيَنِي سَوَاءَ السَّبِيلِ ﴾

"Wuxuu yidhi wuxuu u Dhawyahay rabbigey inuu igu (Hanuuniyo) jidka Toosan."

Nebi Muuse (CS) wuxuu Rabbigiisa kor ahaaye ka baryay hanuun diinta iyo adduunka, markaas ayuu Allaaha Kariimka ah siiyay waxa uu doonayay, kana dhigay mid ka mid rususha ulul casamka, Haddaba maskaxdaada ku qabso oo ha ku fikirin inaad bariso cid aan Alle aheyn, maxaa yeelay, qofkii isaga u barya si daacad ah, wuu hanuunin doonaa, wuu badbaadin doonaa, wuxuuna u rumeyn doonaa waxyaabaha aan suurtagalka ahayn.

﴿ إِنَّا رَادُّوهُ إِلَيْكِ ﴾

"Anagaa kugu soo Celine"

Gunta badda oo mugdi ah, mawjadaha oo kacsan oo dhinac walba isku tuuraya, iyo caddaalad-darradii iyo dulmigii Fircoon!

Allaah ayaa usoo celiyay hooyadiis iyada oo sidii ugu baqeyso! imtixaankaagu maka adagyahay intaas? Xusuusnow, ma jirto belaayo haddii ay jirta waxaa lagu baabi'iyaa kalsoonida Alle.

﴿ أَرِنِي أَنظُرْ إِلَيْكَ ۚ قَالَ لَن تَرَانِي ﴾

"Wuxuu yidhi Alloow i tus aan ku arkee,

wuxuuna yidhi Alle, ima arkaysid"

Waxaa laga yaabaa in xikmadda Allaah SWT ay tahay in uusan ku siin waxa aad weydiisato, taasina waa naxariis uu addoonkiisa u naxariisanaayo iyo xikmad xaggiisa ah, Waayo, diidmada Allaah xaggiisa kaga timaada addoonka mu'minka ah waa siismo, siismaduna waa shar oo laga ilaaliyo.

Deeqsinimada Allaah waxaa kamid ah in uu addoonkiisa u diido wax dhib u geysanayo isla markaana uu siiyo wax ka wanaagsan waxaas.

Allaah sarreeye waxa uu Nebi Muuse ku yiri:

﴿ قَالَ يَا مُوسَى إِنِّي اصْطَفَيْتُكَ عَلَى النَّاسِ بِرِسَالَاتِي وَبِكَلَامِي ﴾

"Wuxuu yidhi Alle Muusow waxaan kaa doortay dadka, diriddayda iyo la hadalkayga"

Taasi waa badal iyo abaalmarin weyn.

﴿ وَهُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴾

"Waxwalbana wuu karaa (Alle)"

Akhri, oo ku celceli qalbigaaga maalin kasta...

oo yaqiinso in dhammaan waxa aad doonayso ay u fudud yihiin rabbiga ku abuuray adiga oo aan waxba ahayn.

Haddaba is deji.

﴿ وَأَنَا اخْتَرْتُكَ فَاسْتَمِعْ لِمَا يُوحَىٰ ﴾

"Anaana ku doortay ee maqal waxa laguu waxyoon."

Kuwa Qur'aanka ku mashquulsanow,

Barashada waa arrin doorasho ah, iyo mid ka timid Allaah Subxaanahu wa Tacaala, Alle uga mahadceli nicmadaas weyn ee uu ku siiyay, Si wacan ugu fiirso dadka hareerahaaga ah, mid ayaa ku mashquulsan adduunyo oo iloobay naftiisa, mid ayaa ku mashquulsan lacagta oo addoon u noqday, mid ayaa habeenkii ku mashquulsan ciyaaro iyo waxyaabo xunxun, Adigana, waxaad akrinaysaa kitaabka Alle kuna celcelinaysaa aayadahaas, si aad laabta ugu xifdiso.

Xasuuso aayaddan:

﴿ وَأَنَا اخْتَرْتُكَ فَاسْتَمِعْ لِمَا يُوحَىٰ ﴾

"Anaana ku doortay ee maqal waxa laguu waxyoon."

Oo nimcadaas uga mahadnaq rabbigaaga, kuna camal fal oo tallo saaro Allaah.

﴿ وَرِضْوَانٌ مِّنَ اللَّهِ أَكْبَرُ ﴾

"Raalli ahaanshaha Alle ayaa ka wayn"

Ma jiraan wax ka weyn raalli ahaanshaha Allaah Subxaanahu wa Tacala, xitaa haddii aad gasho jannada, raaxadu waa dhiman tahay ilaa uu Allaah swt dadka jannada ku yiraahdo:

Allaah ayaa oranaya: dadkii jannadoow.

Waxay dhahayaan: Ku maqlnay rabbiyow,

Wuxuu oranayaa: Maku qanac santihiin?"

Waxay dhahayaan: Maxeynaan u qanceyn adiga oo ina siiyay wax aadan siin addoomadaada kale?

Wuxuu oranayaa: Anigu waxaan idin siinaya intaas wax ka wanaagsana.

Waxay dhahayaan: Maxaa ka wanaagsan tan?

Wuxuu oranayaa: "Raalli ahaanshahayga waligey dambena idinma xanaaqi doono."

﴿ إِنَّ بَعْضَ الظَّنِّ إِثْمٌ﴾

"Maxaa yeelay malaha qaarkiis waa dambi"

Ka taxaddar in aad dadka eedeyso!

Waxaa laga wariyay Mak-xuul, in uu yiri: "Waxaan arkay nin salaadda ku jira, markasta oo uu rukuuco oo sujuudo, wuu ooyi!

Waxaan u maleynayay inuu yahay riyaa' (muujinayo cibaadada)!

Sidaas awgeed, muddo sannad ah waxaan la iga xayiray ooyinta."

﴿ رَبِّ اشْرَحْ لِي صَدْرِي ﴾

"Wuxuu yidhi (Muuse Alloow ii waasici Laabta)."

Imaam Shaafici wuxuu yiri:

"Waxaa jira dhibaatooyin qaar oo qofka uu moodayo inay xal la'aan tahay, laakiin Allaah agtiisa ka leh xal Marka dhibaatadu xoogaysato, way furantaa, waxaana u maleynayay inay furmi doonin."

Rajada wanaaji, akhriste, waxaa jira Rabbi kula doonaya khayr...

Is deji, waxaadna ku sugantahay xasillooni.

﴿ وَعَصَيْتُم مِّن بَعْدِ مَا أَرَاكُم مَّا تُحِبُّونَ ﴾

"Ood Caasidaan intuu idin Tusiyey waxaad Jeceshihiin ka Dib"

Ogoow, akhristaha qaaliga ahoow, in dembiga ka dambeeya nimcada uu ka culus yahay dembiga la sameeyo nimcada ka hor, uga mahadceli Allaah dhammaan nimcooyinkiisa, hana kamid noqon kuwa inkiray nimcooyinkiisa.

Rabbiyow, waan kuu mahadcelinaynaa, oo waxaan kaaga shukrineynaa dhammaan nimcooyinkaaga aad nagu mannaysatay.

﴿ إِنْ هُمْ إِلَّا كَالأَنْعَامِ بَلْ هُمْ أَضَلُّ سَبِيلًا ﴾

"Ma aha waxaan Xoolo oo kale ahayn,

Iyagaabase ka Sii Dhunsan."

Mararka qaar, eeyaha ayaa ka wanaagsan dadka aad la dhaqanto. Ma Xusuusto eey aan cunto siiyay kadibna i khiyaamey, dhabarka iga toogtay, xitaa haddii uu gaajo u dhiman lahaa. Laakiin nasiib darro, kuwa I dhaawacay waxay ahaayeen banii aadam, kuwaas oo aan siin jiray waxa aan naftayda la jeclahay, balse waxaan isku qancinaa in walaalaha Yuusuf ay si naxariis darro ah u khiyaameen walaalkood.

﴿ أَيَّامًا مَّعْدُودَاتٍ ﴾

"Waa Maalmo tirsan."

Haddii aad ka gaabisay bishii hore, bishan barakeysan ayaa kuu timid iyada oo wadata quruxdeeda, Laakiin waa saacado kooban iyo maalmo tirsan, Haddaba dadaal, oo u dhaqso tartan u gal sidii aad ku heli lahayd dambi dhaafka Alle, Haddii aad wanaagsaneyd, sii wanaaji oo joogtee wanaagaaga, Bishaan waxaa ku jira ajar weyn iyo habeenno muhiim ah, oo ay ku jirto habeenka Laylatul Qadriga, kaasoo ka wanaagsan kun bilood.

Runtii, qofka guuleysta waa kan fursadaha ka faa'iideysta, kuna mashquula waxa Alle u dhaweynaya.

Alle SWT waa kaliya kan waafajiya, sidoo kalena la talo saarto, isaga ayaana laga helaa nabadgelyo.

﴿ وَإِن يَتَفَرَّقَا يُغْنِ اللَّهُ كُلًّا مِّن سَعَتِهِ ﴾

"Hadday kala tagaan wuu kaafiyaa Alle

mid kasta waasacnimadiisa."

Xitaa kala tagga, xitaa khisaaraha, dheh: "Malaha waa kheyr." Waxaa laga yaabaa in Alle kuu qoondeeyay qadar ka wanaagsan midda aad fileysay, taas oo aanad qorsheynin, Xikmadda Alle waa ka weyn tahay xikmadda dadka, Alle-na waa ka sarreeya tusaale, Waxa uu Alle kuu sameeyo ayaa ka wanaagsan waxa aad fileysay, waayo naxariistiisa ayuu kugu siinayaa wax ka badan waxa aad filan karto.

Ha walwalin, oo dheh: "Waa Alle,"

Ogow, waa Alle, is deji.

﴿ إِنَّا كُلَّ شَيْءٍ خَلَقْنَاهُ بِقَدَرٍ ﴾

"Wax kasta waxaan ku abuurray qadar."

Dadku waxay aaminsan yihiin qaddarka marka ay khasaaraan ama kala tagayaan, laakiin haddii ay guuleystaan oo guulo gaaraan, badankood waxay aaminsan yihiin inay iyaga sameeyeen, iyaga oo aaminsan in aysan jirin wax aan suurto gal ahayn haddii ay iyagu jiraan, Sidee ayay u fikirayaan dadkaas?

Sidee baysan ugu fikirin inay Alle uga mahadceliyaan marka hore?

Haddii aad gaarto wax adag, dadka u sheeg in aysan jirin wax aan suurto gal ahayn marka Alle kula jiro.

﴿ وَجَعَلَ بَيْنَكُم مَّوَدَّةً وَرَحْمَةً ﴾

"Waxaan ka yeelayney dhexdiina isjacayl iyo naxariis"

Jaceylku waa in qalbigu ku sii jiro ballanta, xitaa haddii masaafooyinka dheeraadaan.

Jaceylku waa in qalbigu xifdiyo xusuusta wanaagsan,

xitaa haddii masaafooyinka dheeraadaan

Jaceylku waa in qalbigu ku sii jiro daacadnimo, xitaa haddii wajiyo kala duwan ay horteenna soo maraan

Jaceylku waa in uu qalbiga ku sii jiro magaca qofka uu jecel yahay, ilaa qalbigu istaago, dibna loola soo saaro qofka uu jecel yahay

waa fahantay soo ma aha!

﴿ وَخُلِقَ الإِنسَانُ ضَعِيفًا ﴾

"Waxaase La Abuuray Dadka isagoo tabar Yar."

Qofku wuu daciifaa marka uu haweeney hor istaago, mana u adkeysan karo, Ninka wuxuu u baahan yahay haweeneyda in ka badan sida haweeneydu ugu baahan tahay ninka, Sida uu yiri Al-Xaafid Wakiic Binu Al- Jarraax: "Haweenku waxay lumiyaan garaadka ragga." Miyaad u maleyneysaa in ay jirto daciifnimo ka weyn tan?

﴿ وَصَاحِبْهُمَا فِي الدُّنْيَا مَعْرُوفًا ﴾

"Kulana noolow adduunka si fiican"

Saciid Binu Al-Musayib, Allaah ha u naxariistee, waxa uu yiri: "Qofka waalidkiis baariga u ah si qaab darran uma dhinto.

Ilaahow innaga yeel kuwo waalidkood baarri u ah.

﴿ وَأَن يَسْتَعْفِفْنَ خَيْرٌ لَّهُنَّ وَاللَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴾

"Inay Dhawrsadaan yaase u Khayr Roon

rabbina waa Maqle Og."

Xishoodku ma ahan oo kaliya dharka!

Waxaa jira cod xishood leh...

Waxaa jira qosol xishood leh...

Waxaa jira hab-dhaqan xishood leh...

Waxaa sidoo kale jira akhlaaq xishood leh.

Dumaroow, ku dhegga xishoodka oo goys dambeedka ku qabsada.

﴿ إِذْ هُمَا فِي الْغَارِ إِذْ يَقُولُ لِصَاحِبِهِ لَا تَحْزَنْ إِنَّ اللَّهَ مَعَنَا ﴾

"markay godka ku jireen markuu ku lahaa saaxiibkiis ha walbahaarin Alle ayaa inala jiree,"

Waxaa la yiri:

Haddii aadan gacantaada kor ugu qaadin saaxiibkaaga, oo aadan ku toosin marka uu leexdo, oo aadan xusuusin marka uu niyad-jabo, oo aadan ka daawayn xanuunkiisa marka uu dhibaato ku dhaco, oo aadan u noqon taageero ka taageera dhinac walba, sidee ayaad ugu noqon kartaa saaxiib?!

﴿ قُلْ إِنَّ صَلَاتِي وَنُسُكِي وَمَحْيَايَ وَمَمَاتِي لِلَّهِ رَبِّ الْعَالَمِينَ ﴾

"Waxaad Dhadaa Salaaddayda, gawraceyga, Noloshayda iyo Geeridaydaba Alle ayaa iska leh rabbiga Caalamka ah."

- Ma maqashay wixii hebel ku dhacay?
- Maya, ma maqlin.
- Ma aragtay wixii hebel ku dhacay?
- Maya, ma arkin.
- Ma maqashay waxa uu hebel yiri?
- Maya, ma maqlin.
- Xagee ku nooshahay adigu?
- Waxaan ku noolahay nolosheyda, waa nolosheyda, dadka kale looguma talo galin.

Ma Fahantay?

﴿ قَدْ نَرَىٰ تَقَلُّبَ وَجْهِكَ فِي السَّمَاءِ ﴾

"Dhabahaan yaan ugu jeednay gagadookna

Wajigaaga ee Samada"

Wuxuu ku arkaa adiga oo ku qeylinaya: "Yaa Allaah!" Wuxuu ku arkaa adiga oo samada ku eegaya indho murugo leh.

Is deji, maxaa yeelay Boqorka boqorrada wuu ku arkaa waana kuu dhow yahay.

Ha joojin dhawaaqa, sii wad oo ku dhawaaq: "Yaa Allaah!"

﴿ وَمَن يَتَّقِ اللَّهَ يَجْعَل لَّهُ مَخْرَجًا ﴾

"Ruuxii Alle ka dhawrsadana wuxuu u furi faraj."

Ibnu Mascuud (Alle ha ka raalli noqdee) wuxuu yiri:

Xalka waxa weeye in uu ogaado in wax kasta ay ka yimaadeen xagga Allaah, Allaah-na yahay kan wax siiyaa, wax u diida, imtixaana, caafimaad siiya, iyo kan dhibaatooyinka ka kor qaada.

﴿ لَا يَمَسُّهُ إِلَّا الْمُطَهَّرُونَ ﴾

"Mana taabto Ruuxan Daahir ahayn."

Ibnu Taymiyah (Alle ha u naxariistee) wuxuu yiri:

Haddii ay jirto warqad aysan taaban karin cid aan daahir aheyn" macnaheeda waa: Qur'aankana waxaa ku hanuuni kara oo keliya qalbiyo daahirsan.

﴿ وَكَذَٰلِكَ يَجْتَبِيكَ رَبُّكَ وَيُعَلِّمُكَ مِن تَأْوِيلِ الْأَحَادِيثِ ﴾

"Saasuuna kuu doortay rabbigaa kuuna baray fasiraadda Riyada iyo Xaddithyada"

Muuqaalka ugu weyn ee xulashada waa cilmiga.

﴿ وَسَبِّحْ بِحَمْدِ رَبِّكَ قَبْلَ طُلُوعِ الشَّمْسِ وَقَبْلَ الْغُرُوبِ ﴾

"Rabbigaa u tasbiixso adigoo ku mahadin qorrax soo bax ka hor iyo dhicidda ka hor."

Ibnu Taymiyah (Alle ha u naxariistee) wuxuu yiri: Qofka caadeysta tasbiixda ka hor intaanu seexan, waxaa la siiyaa xoog iyo firfircooni maalintiisa.

﴿ وَرَبُّكَ يَخْلُقُ مَا يَشَاءُ وَيَخْتَارُ مَا كَانَ لَهُمُ الْخِيَرَةُ ﴾

"Rabbigaa wuxuu Abuuraa wuxuu Doono oo Doorto, Doorasho ma Leh Iyagu (Dadku)"

Si fiican ugu fiirso aayaddaan, akhristaha qaaliga ahoow. ogoow in Allaah Sarreeye uusan rabin inuu ku muruggeliyo, Kaliya waa isaga kan garanaya xilliga iyo sida ugu wanaagsan ee uu kuu siinaayo waxa adiga kuu fiican.

Xitaa haddii aad shay nacdo! Waxaa jira waxyaabo qarsoon oo kuu farxad gelin doona marka aad ogaato!

Waxaan ka baqayaa in laabtaadu dilaacdo marka ay farxad weyn kaaga timaado xagga Boqorka Dambi dhaafaha ah.

﴿ وَلَا تَحْزَنْ عَلَيْهِمْ وَلَا تَكُ فِي ضَيْقٍ ﴾

"Hana ka murugoon, hana ka cidhiidh-yamin"

Waxaa la yiri:

Qofka doonaya in uu noloshaada ka baxo wuxuu arkaa albaab laga baxo xitaa haddii uu yahay dalool yar oo iridda ka muuqda, laakiin qofka doonaya inuu noloshaada soo galo darbiyada ayuu ka sameysta meel uu kasoo galo.

﴿ يَغْفِرُ الذُّنُوبَ جَمِيعًا ﴾

"Alle waa midka dhaafa danbiyada dhamaantooda"

Xitaa haddii danbiyadaas aad u maleyso in uusan Alle kuu dhaafi doonin, wuu kuu dhaafi doonnaa, Allaaha sarreeye.

﴿ فَلَمَّا نَسُوا مَا ذُكِّرُوا بِهِ ﴾

"Markay Halmaameen (Ka Jeedsadeen)

wixii lagu Waaniyey"

Ma ka taqalusi doonnaa boqorka boqorrada, mise ilbiriqsi ayuu ku burburin doonaa?

Maya!

﴿ فَتَحْنَا عَلَيْهِمْ أَبْوَابَ كُلِّ شَيْءٍ ﴾

"Waxaan u furnay albaabada wax kastaa"

Hanti, qurux, caan nimo, iyo dhammaan nuucyada kala duwan ee raaxada nolosha adduunka, ilaa marka dambe imtixaanka looga keeno meel aysan filaneyn, waxayna ku khasaaraan adduun iyo aakhiro.

﴿ وَقَالُوا الْحَمْدُ لِلَّهِ الَّذِي أَذْهَبَ عَنَّا الْحَزَنَ ﴾

"Waxayna dhihi waxaa mahad leh Rabbiga
naga tagsiiyay walbahaarka"

Waa Kuma kuwaas?

Kuwaas waa kuwa la imtixaamay oo ku sabray adduunka. Markay jannada galayaan iyagoo aad u faraxsan, waxay odhan doonaan. "Alxamdulillah, Alle ayaa mahad leh oo inaga qaaday walwalka iyo murugada!"

Tani waxay muujineysaa nimcada weyn ee ay ku arki doonaan aakhiro, Guryahooda iyo darajooyinkooda ayaa gooni uga ah jannada, Adduunyada waxaad ku arkaysaa iyaga oo ku sabaraya murugada, balse wajiyadooda waxaa ka muuqata murugo.

Laakiin markii la geliyo jannada, waxay illoobi doonaan dhammaan murugadii iyo xasuusihii xanuunka lahaa, Markaas ayuu midkood odhan doonaa. "Walaahi, waligay ma soo marin xumaan iyo murug midna!"

Rabbi ayaa ka nadiifin xumaan oo dhan markaa waaga inoo baryo ama gabalku inoo dhaco.

﴿ وَقَالَ مُوسَىٰ لِأَخِيهِ هَارُونَ اخْلُفْنِي فِي قَوْمِي وَأَصْلِحْ وَلَا تَتَّبِعْ سَبِيلَ الْمُفْسِدِينَ ﴾

"Wuxuuna ku yidhi Nebi Muuse Walaalkiis Haaruun iiga dambee Qoomkayga wanaaji hana raacin Jidka Mufsidiinta."

Nebi ayaa Nebi kale u naseexaynaya, haddaba, adiga ha is moodsiin inaadan u baahneyn naseexo, waayo diinta waa naseexo, inta badan wanaagga wuxuu ku jiraa gudaha naseexada saxda ah.

﴿ إِن تُبْدُوا الصَّدَقَاتِ فَنِعِمَّا هِيَ ۖ وَإِن تُخْفُوهَا وَتُؤْتُوهَا الْفُقَرَاءَ فَهُوَ خَيْرٌ لَّكُمْ ۚ وَيُكَفِّرُ عَنكُم مِّن سَيِّئَاتِكُمْ ۗ وَاللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرٌ ﴾

“Haddaad muujisaan Sadaqaadka waa fiicantahay, haddaadse qarisaan ood siisaan fuqarada yaa idiin khayr badan, wuuna asturi Eebe xumaantiina (Dambiga) Alle waxaad falaysaan wuu ogyahay."

Imaam Al-Qurdubi waxa uu yiri: Qofka danbiyadiisu badan yihiin, waxaa ku waajiba inuu dadka biyo waraabiyo, waayo, Allaah SWT wuxuu u dambi dhaafay naag eey haraadsan waraabisay, bal kawaran qof waraabiyay qof mu'min ah?

﴿ قُلِ اللَّهُ يُنَجِّيكُم مِّنْـهَا وَمِن كُلِّ كَرْبٍ ﴾

Waxaad Dhahdaa Rabbi ayaa idinka Koriya Taas iyo Shiddo Kasta,"

Arrimaha haddii uu Allaah kuu fududeeyo, waxay kaaga yimaadaan meel aadan ka fileyn, Ku kalsoonow Allaah, oo cidna haku tiirsan, waayo Allaah waa kan ugu sharafta badan ee la rajeyn karo oo la sugi karo.

﴿ قَدْ أَفْلَحَ مَن زَكَّاهَا (9) وَقَدْ خَابَ مَن دَسَّاهَا ﴾

"Ee waxaa liibaanay Ruuxii Naftiisa Daahiriya. Waxaana khasaaray Ruuxii Naftiisa xumaan dhex galiya."

Jihaadka nafta waa dagaalka go'aamiya nolosha adduunka, iyo dagaalka aan dhammaanayn ilaa naftaadu dhammaato, oo ruuxdaadu u tagto boqortooyadii abuurahaaga. Waa dagaalkaaga iyo loolankaaga aad naftaada kula jirto.

Ama waxaad ka baxeysaa adigoo guuleystay, oo guranaya miraha wanaagaaga, ama waxaad ka baxeysaa adigoo guuldareystay, iyadoo danbigaaga dushaada kuu yaal.

﴿ وَالَّذِينَ جَاهَدُوا فِينَا لَنَهْدِيَنَّهُمْ سُبُلَنَا ﴾

"Kuwa ku jihaaday Dartanno waxaanu

ku hanuunin Jidkanaga"

Allaah ma illoobi doono daqiiqadahaas aad ku dhex jirto loolanka dambiyada, Sidoo kale, ma illoobi doono kacitaankaaga kadib markaad kuftay, ma illoobi doono xanuunka aad qalbigaaga ka dareentay marka aad xumaanta sameysay.

Taas bedelkeeda, wuxuu kuugu baddeli doonaa hanuun iyo farxad si aad u hesho jidka xaqa ah.

Wuxuu kuu furi doonaa waddooyinka ubaxa ee ku geynaya hanuunka.

Kaliya waxaad tiraahdaa. "Alloow, iga mid dhig kuwa aad hanuunisay."

﴿ إِلَيْهِ يَصْعَدُ الْكَلِمُ الطَّيِّبُ﴾

"Xagiisayna u koraan kalimooyinka fiican"

Sheekh lagu magacaabo As-Sicdi wuxuu yiri: Erayada wanaagsan sida akhriska, tasbiixda, taxmiidka, iyo takbiirta, iyo dhammaan erayada wanaagsan, kor ayaa loo qaadayaa ilaa looga bandhigo Allaah, erayadaas qofka yiri wuxuu ku ammaanaa Ilaah samada dhexdeeda.

﴿تَرَاهُمْ رُكَّعًا سُجَّدًا يَبْتَغُونَ فَضْلًا مِنَ اللَّهِ وَرِضْوَانًا ﴾

"Waxaad arkaysaa iyagoo rukuucsan oo sujuudsan oo dalbi Deeqda Alle iyo raalli ahaanshihiisa,"

Waa tilmaam weyn.

Waa hadaf weyn.

Waxaase nasiib leh qofkii ku dayda.

﴿ قَالَ يَا بُنَيَّ لَا تَقْصُصْ رُؤْيَاكَ عَلَىٰ إِخْوَتِكَ فَيَكِيدُوا لَكَ كَيْدًا ﴾

"Wuxuuna yidhi (Aabbihiis Yacquub) Wiilkayow hawga Qisoonin Riyadaada Walaalahaa oy markaas ku dhagraan dhagar, illeen Shaydaanku Dadka wuxuu u yahay col cade."

Xasadku waa halis aad u weyn oo kaaga timaada qaraabadaada, waa khatar weyn marka uu ka yimaado dadka aad xiriir xooggan la leedahay marka loo eego kuwa kale. haddaba arrimahaaga si qarsoon ugu kaalmeyso Alle marka aad sameyneyso.

﴿ مَا لَكَ لَا تَأْمَنَّا ﴾

"Maxaad noogu aamini la'dahay"

Hubi xaqiiqada qofka ku weydiinaya "Maxaadan ii aamineyn?" Waayo, waa kuwa la mid ah walaalaha Yuusuf (CS) oo ku yiri aabahood Yacqub (CS) kadibna balanta uga baxay.

﴿ وَإِنَّا لَهُ لَنَاصِحُونَ ﴾

"Annagoo u Naasixa"

Walaalaha Yuusuf waxay isku tilmaameen inay yihiin kuwo u naseexeynaya, waayo waxay ogyihiin in qofka naseexeynaya uusan waxyeelleynin qof kale...

Haddaba, haddii aad rabto ammaan, Allaah sokaddii kaalmeyso naseexeeye wanaagsan.

﴿ أَرْسِلْهُ مَعَنَا غَدًا ﴾

"Nala dir barri"

Walaalaha Yuusuf waxay doonayeen inay walaalkood ku sameeyaan dhagar, markaas ayay aabahood ku yiraahdeen. "Inala dir Yuusuf barri."

Haddii qof ku hor yimaado isagoo ku soo bandhigaya daacadnimo iyo jacayl lama filaan ah, ha iloobin inaad ka digtoonaato.

﴿ قَالَ إِنِّي لَيَحْزُنُنِي أَن تَذْهَبُوا بِهِ ﴾

"Wuxuu yidhi Yacquub waxaa i walbahaarin inaad la tegtaan"

Ha iska indha tirin waxa qalbigaaga ka socdo markii ugu horreeysay, waayo waxaa ku jira wax badan oo dhiirrigelin iyo aragti cad ah.

﴿ وَجَاءُوا أَبَاهُمْ عِشَاءً يَبْكُونَ ﴾

"Waxayna u yimaadeen Aabahood habeenkii iyagoo ooyi."

Markii walaalaha Yuusuf ay khiyaameeyeen aabahood iyo walaalkood...

ilintooda ayey si been ah u daadiyeen si ay aabahood shakiga uga saaraan.

Sidee baad ku ogaan kartaa cidda si dhab ah u ooyeysa iyo midka sida beenta isku ooysiinaya?

Eeg taariikhdiisa, ha fiirin muuqaalkiisa.

﴿ فَأَكَلَهُ الذِّئْبُ ﴾

"Markaasay yey cuntay"

Nebi Yacqub (CS) ayaa Yuusuf walaalihiis u sheegay habeenkii sida uu uga baqanayo in wiilkiisa uu cuno Yeyga, markaana markii berri la gaadhay, waxay aabahood ku yiraahdeen: "Waxa cunay Yeygii."

Xarigga beenta waa mid aad u gaaban, oo berri la ogaan doono.

﴿ وَجَاءُوا عَلَى قَمِيصِهِ بِدَمٍ كَذِبٍ ﴾

"Waxayna la yimaadeen Qamiiskiisii oo Dhiig beena leh"

Ka digtoonow qofka kuusoo bandhigaya caddeymo iyo daliil ka hor inta aadan ka codsan... waayo, tani asal ahaan ma aha daliil, ee waa khiyaano.

﴿ قَالَ بَلْ سَوَّلَتْ لَكُمْ أَنفُسُكُمْ أَمْرًا ﴾

"Saas ma aha ee waxay idiin Qurxisay naftiinnu arrin"

Nebi Yacqub (CS) wuxuu ahaa mid caqli badan, sidee Yuusuf u dhiman karaa isaga oo aysan xiddigihii u sujuudin wali?

Nebi Yacqub bishaarada uu xagga Allaah ka heystay ayaa kaga xoog badneyd waxa ay indhihiisu arkeen ee dhiig iyo ilin ah.

﴿ فَصَبْرٌ جَمِيلٌ ﴾

"Waa Samir fiican (qurux badan)"

Kala taggu waa mid xanuun badan, kala fogaanshuhuna waa mugdi, laakin waxaa jira maalmo qurux badan oo I ilowsiin doonna waxa i dhibay, Kaliya waxa la iga doonayaa samir ilaa uu Alle albaabada ii furo, Tani waxay ahayd astaantii Nebi Yacqub (CS), wuu sabray kadibna wuxuu arkay wiilkiisa oo boqor ah. Haddaba, ha niyad jabin, oo noqo mid sabra.

﴿ وَغَلَّقَتِ الْأَبْوَابَ ﴾

"Waxayna xidhay albaabyadii"

Haddii aad aragto albaabada oo xiran, ogoow in ay jirto Naagta Boqorka oo ku raadineyso, ogoow in sheydaanku ku wareegayo hareerahaaga, ka digtoonow, waayo khiyaanooyinka xaaraanta ah ee nuucyadooda kala duwan ayaa imaanaya marka albaabka la xiro, Waxayna noqon karaan khiyaano, ama falal xun... iwm.

Noqo mid feejigan.

﴿ وَقَالَتْ هَيْتَ لَكَ قَالَ مَعَاذَ اللَّهِ ﴾

"Waxayna ku tidhi kaalay, wuxuuse yiri magan gal Alle"

Qaar ka mid ah ragga ama aan iraahdo nimanka waxay qabaan dhibaato, waayo waxay moodayaan in haddii ay haweenka daba socdaan, ugu yeeraan hadallo xun, ama ku kacaan falal xun oo xaaraan ah, ay taasi uga dhigan tahay in ay gaareen heerka ugu sarreeysa ee ragannimada!

Laakiin, sida xaqiiqda ah Ilaahay baan ku dhaartaye tani waa heerka ugu hooseeya ee ragannimada.

Halka ninka dhabta ah ee ragga ah, ee cibaadada leh, uu ka baqayo Allaah, kana cararayo haweenka sababo la xiriira Alle ka cabsi iyo xishood uu u hayo dumarka, isaga oo oranaya: "Alle ayaan magan gelayaa," haddii gabadh isku daydo inay u jalleeciso waxa uu Alle xarrimay.

Ilaahay baan ku dhaartaye, taasi waa heerka ugu sarreeya ee ragannimada dhabta ah iyo dhowrsanaanta, iyo sharafta.

Sidee ayeysa u noqoneyn, iyadoo Allaah uu ka mid dhigay toddobada qof ee hooskiisa harsan doona maalinta aan hoos kale jirin!

Ogow akhristaha qaaliga ahow, ninka sharafta leh ee dhowrsan cawradiisa kuma faano, balse ceeb kasta ayuu ka qariyaa oo uga dhawrsadaa.

Farqi weyn ayaa u dhexeeya midka daba socda dumarka iyo midka ka dheeraday.

Ilaahayow, cawradeenna astur, oo ha nagu darin kuwa xumaanta falaya.

﴿ وَاسْتَبَقَا الْبَابَ ﴾

"Waxay u orotameen albaabka (irridda)"

Haddii shahwada ay dhankaaga usoo orodo, adiguna u orod dhanka albaabka.

﴿ وَقَدَّتْ قَمِيصَهُ ﴾

"Waxayna ka goysay Qamiiskiisa"

Ha ka murugoon shaarkaaga jeexmay, waayo haddii aad Alle ka cabsato, wuxuu kuu gelin doonaa dharka dhowrsashada, oo kaaga kaafin doona shaar kasta!

﴿ هِيَ رَاوَدَتْنِي عَن نَّفْسِي ﴾

"Iyadaa i dalabtay Naftayda"

Qofka daacadda ah ma caroodo ama ma xanaaqo marka dhibi yimaado!

Qofka daacadda ah codkiisa kor uma qaado si uu dadka u qanciyo!

Qofka daacadda ah waa mid aad u deggan oo kalsoonidiisa ayaa uga filan inuu dhaarto, Yuusuf (CS) si xasilloon ayuu ugu yidhi: "Iyadaa i dooneysay" Wuxuu halkaas ku dhammeeyey hadalkiisa.

﴿ نَبِّئْنَا بِتَأْوِيلِهِ ﴾

"Inooga warran fasiraadda"

Riyada wanaagsan waa hadiyadda Alle SWT, haddii ay tahay bishaaro, waxay noqonaysaa farxad ka timid Allaaha khabiirka ah, iyo bogsiin loogu talagalay kuwa murugsan.

﴿ قَالُوا أَضْغَاثُ أَحْلَامٍ ۖ وَمَا نَحْنُ بِتَأْوِيلِ الْأَحْلَامِ بِعَالِمِينَ ﴾

"Waxay dhaheen waa qaraw annaguna ma naqaanno Fasirka qarawyada «dhadhabka»."

Qiridda aqoon-darrida waa geesinimo! Laakiin waxaa waajib ku ah qofka jaahilka ah inuusan ka hadlin arrimaha uusan aqoonta u lahayn.

﴿ الآنَ حَصْحَصَ الْحَقُّ ﴾

"Hadduu cadaaday Xaqqii"

Samir u yeelo eedaymaha iyo hadallada beenta ah ee lagugu soo eedeeyo, xaqiiqaduna iyadaa soo ifbaxeysa.

﴿ وَمَا أُبَرِّئُ نَفْسِي ﴾

"Mana bari yeelayo naftayda"

Ha dhihin. "Waan isku kalsoonahay, oo waan ogahay inaanan sameyn doonin qalad!"

﴿ وَأَنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي كَيْدَ الْخَائِنِينَ ﴾

"Alle ma toosiyo dhagarta Khaa'imiinta."

Khiyaanoolaha wuu guuldareysataa, xitaa haddii qofka khiyaanada sameeya uu isku dayo inuu is difaaco!

Waayo, Alle oo kaliya ayaa hanuunka bixiya, isaguna wuu iska fogeeyay kuwa khiyaanada sameeya.

﴿ لِنُثَبِّتَ بِهِ فُؤَادَكَ ﴾

"Inaan ku Sugno Qalbigaaga (Quraanka)"

Haddii aad la kulanto caqabado, waxaa waajib kugu ah inaad Qur'aanka dib ugu laabato.

﴿ وَهُوَ الَّذِي جَعَلَ اللَّيْلَ وَالنَّهَارَ خِلْفَةً لِّمَنْ أَرَادَ أَن يَذَّكَّرَ أَوْ أَرَادَ شُكُورًا ﴾

"Alle waa Ilaah uga Yeelay Habeenka iyo Maalinta Isbaddel, Ciddii Doonta inuu wax Xusuusto ama Doono inuu Mahdiyo."

Tafsiir ficil ah

Cumar Binu Al-Khaddaab rc ayaa waxa uu dheereystay salaaddii barqada (salaatu Duxaa). Markaasa lagu yiri:

"Maanta waxaad sameysay waxa aanad sameyn jirin Wuxuu ku jawaabay: "Qeyb wardigeyga kamid ah ayaa baaqi igu aheyd, waxaan jecleystay inaan dhameystiro." Kadibna wuxuu aqriyay aayaddan:

﴿ وَهُوَ الَّذِي جَعَلَ اللَّيْلَ وَالنَّهَارَ خِلْفَةً لِّمَنْ أَرَادَ أَن يَذَّكَّرَ أَوْ أَرَادَ شُكُورًا ﴾

"Alle waa Ilaah uga Yeelay Habeenka iyo Maalinta Isbaddel, Ciddii Doonta inuu wax Xusuusto ama Doono inuu Mahdiyo."

﴿ وَمَن يَعْمَلْ سُوءًا أَوْ يَظْلِمْ نَفْسَهُ ﴾

"Ruuxii fala Xumaan ama Dulmiya Naftiisa (Dambaaba)"

Sheekh As-Saadi (Alle ha u naxariisto) waxa uu yiri: "Dhibaatada nafta waxaa loo yaqaannaa dulmi waayoo addoonku isaga malaha nafta, ee waa mid uu Allaah SWT leeyahay, uuna aamaano ahaan usiiyay addoonkiisa."

﴿ فَإِمَّا يَأْتِيَنَّكُم مِّنِي هُدًى ﴾

"Ruuxii raaca hanuunka"

Hanuunka lama weydiiyo cid aan Alle aheyn, haddii uu ku hanuuniyana, waa uu ku doortay.

﴿ وَكَانَ الشَّيْطَانُ لِلْإِنسَانِ خَذُولًا ﴾

Shaydaanna Dadka Wuxuu u Yahay Dayace

(Mee Xun kaga tage)."

Haddii aad u hoggaansanto shaydaanka, waxaa la garanay waqtigii aad guul darreysan lahayd, sheydaankuna uu kaa bari noqon doonnaa.

﴿ وَرَفَعْنَا لَكَ ذِكْرَكَ ﴾

"Miyaannaan kor yeelin magacaaga (xusiddaada).

Ibnul Qayyim Alle ha u naxariistee, waxa uu yiri: dadka raacay rususha arrintaasi nasiib ayey ku leeyihiin, macnaha sheegida magacooda, waayo qofka dadka Alle xaggiis ugu yeeraya iyo midka raacaya sunnada suubnaha, Alle ayaa ka dhex doortay mallaayiin qof, wuxuuna ka dhigay mid dadka ugu yeero Alle xaggiisa haddaba sidee magaciisa loo kor yeeleyn, adigu waxaad la macaamileysaa Ilaah naxariis badan oo deeqsi ah.

﴿ قَالَ هَلْ آمَنُكُمْ عَلَيْهِ إِلَّا كَمَا أَمِنتُكُمْ عَلَى أَخِيهِ مِن قَبْلُ ﴾

"Wuxuuna yidhi Miyaan idinku aamini karaa sidaan idiinku aaminay walaalkiis horay"

Ha i eedeyn haddii aanan ku rumeysan, waayoo horay ayaad been iigu sheegtay.

Ruuxda waxaa loo qaabeeyey in ay qabato sawirkaaga ugu horreeya si ay uga dhigto mid waara oo aan la iloobin.

﴿ فَأَسَرَّهَا يُوسُفُ فِي نَفْسِهِ ﴾

"Markaasuu Yuusuf u Qarsaday Naftiisa"

Waxaa jira weedho khaldan oo bulshada dhexdeeda ku faafay, sida in la yiraahdo, "Waxa qalbiga ku jira afkaa sheega." Laakiin xaqiiqadu sidaas ma aha, waayo waxa walba oo qalbiga kusoo dhaca, afku ma sheego.

Yuusuf (CS) waxa uu qariyay waxa qalbigiisa ku jiray, waayo wuxuu ahaa qof caqli badan oo kala yaqaan waqtiga ay tahay in uu hadlo iyo waqtiga ay tahay in uu aamuso.

﴿ عَسَى اللَّهُ أَن يَأْتِيَنِي بِهِمْ جَمِيعًا ﴾

"Wuxuu u dhawyahay Alle inuu ii keeno dhammaan"

Nebi Yacquub (CS) waxa uu ku kalsoonaa in uu Alle dib ugu soo celin doono Binyamiin, Yuusuf, iyo Laawi, dhammaantoodna way usoo noqdeen, Sidaas darteed, qofka maqan wuu soo noqon doonaa, Kaliya waxaa lagaa doonayaa in aad Alle barido oo aad ku kalsoonaato in ducadaada la aqbalayo... ee ha walwalin.

﴿ لَقَدْ كَانَ فِي قَصَصِهِمْ عِبْرَةٌ لِّأُولِي الْأَلْبَابِ ۗ مَا كَانَ حَدِيثًا يُفْتَرَىٰ وَلَٰكِن
تَصْدِيقَ الَّذِي بَيْنَ يَدَيْهِ وَتَفْصِيلَ كُلِّ شَيْءٍ وَهُدًى وَرَحْمَةً لِّقَوْمٍ يُؤْمِنُونَ ﴾

"Waxaa ugu sugan Qisadooda waano Kuwa Caqliga leh. mana aha Sheeko la Been abuurtay Waase urumayn wixii ka horeeyay (oo Kutubtii Xaqa ahayda) iyo Caddaynta Wax kasta iyo Hanuunka iyo Naxariista Ciddi Rumayn Xaqa."

Qisaska Qur'aanka waa kuwa ugu wanaagsan dhammaan qisaska oo dhan. Waxaa laga yaabaa in aad u maleyso kuwo mala-awaal ah! Laakiin waa kuwo dhab ah...

Qof kasta oo aan Qur'aanka ka faa'iidin waxba waa inuu dib u fiiriyaa maskaxdiisa waxa ku dhacay!

Ogoowna in aad iftiin iyo nuur heli doonto marka aad Alle rumeyso, oo aad raacdo Rasuulkiisa.

Nabadgelyo dushiisa ha ahaato midka hanuunka raaca.

﴿ إِنَّ رَبِّي عَلَىٰ صِرَاطٍ مُّسْتَقِيمٍ ﴾

"Rabbigayn wuxuu ku sugan yahay jid toosan."

Caddaaladda Alle ee addoomadiisa waxay tahay in dadka xaqa ku sugan uu ka guuleeyo kuwa baadilka ku sugan, maadaama ay yihiin kuwo xaqqa ku sugnaaday oo taladooda saartay Rabbigooda. Haddaba, ku dhegnaaw diintaada oo toos ugu sugnaaw sidii lagu faray, markaas Alle wuu kuu hiilin doonaa, xitaa haddii ay dadku ku khiyaameeyaan.

﴿ فَإِن تَوَلَّوْا فَقَدْ أَبْلَغْتُكُم مَّا أُرْسِلْتُ بِهِ ﴾

"haddaad Jeedsataan waxaan idin gaadhsiiyey

wixii laygu soo diray xaggiinna"

Waxaa waajib ku ah qofka diinta faafinaya in uu dadka u gudbiyo fariinta xaqqa, Haddii qaar ka mid ah dadku ka jeestaan ama diidaanna, taasi waa sunnada Alle ee kuwa beeniya oo ka jeesta xaqqa."

﴿ إِنَّ رَبِّي عَلَى كُلِّ شَيْءٍ حَفِيظٌ ﴾

"Rabbigayna wax kasta wuu ilaaliyaa"

Alle SWT ayaa ka faala qaaday ilaalinta awliyadiisa, sidaas darteed, mar walba ku celi oo dheh: 'Ilaahow, iga mid dhig kuwa aad ilaaliso.' Haddii Rabbigaaga uu kaa mid dhigo awliyadiisa, wuu ku ilaalin doonaa."

﴿ قَالُوا يَا صَالِحُ قَدْ كُنتَ فِينَا مَرْجُوًّا قَبْلَ هَٰذَا ۖ أَتَنْهَانَا أَن نَّعْبُدَ مَا يَعْبُدُ آبَاؤُنَا وَإِنَّنَا لَفِي شَكٍّ مِّمَّا تَدْعُونَا إِلَيْهِ مُرِيبٍ ﴾

"Waxay dheheen Saalaxow waxaad ku ahayd dhexdannada mid la rajeeyo arrintan ka hor ma waxaad naga reebi inaan caabudno waxay caabudayeen Aabayaalkanno, annagu shaki daran baan kaga suganahay waxaad noogu yeedhi."

Qofka dooranaya jidka Nebiyada ee ugu yeeraya dadka Alle xaggiisa, waa inuu isu diyaariyaa inuu la kulmo cadhooyin iyo colaadyo, xiriirkana loo goyn doono, xitaa haddii uu ku dhex jiro dadkiisa oo si sharaf leh oo akhlaaq wanaagagana loo yaqaanno.

﴿ وَأَمَّا الَّذِينَ سُعِدُوا فَفِي الْجَنَّةِ خَالِدِينَ فِيهَا ﴾

"Kuwa la liibaanayna jannay ku waari"

Addoonkii Alle, bishaareyso!

Addoontii Alle, bishaareyso!

Haddii aad ka fogaatid dareennada xaaraanta ah, ku bishaareysta janno iyo raaxo aan dhammaad laheyn.

﴿ قَالُوا بَشَّرْنَاكَ بِالْحَقِّ فَلَا تَكُن مِّنَ الْقَانِطِينَ ﴾

"Waxayna dhaheen waxaanu kuugu bishaarayn xaq ee ha noqonin mid quusta"

Haddii ay riyo wanaagsan kaaga timaado Rabbigaaga xaggiisa, taasi waa bishaaro kuu gaar ah, waxaana lagaaga baahanyahay inaad niyada wanaajiso oo aad ku kalsoonaato Alle, waayoo riyada wanaagan waa qeyb ka mid ah nebinnimada.

Waxaa laga wariyay Rasuulka (ﷺ) in uu yiri, "Riyada wanaagsan waa qeyb ka mid ah lix iyo afartan ka qeyb ee nebinnimada." Haddii ay bishaaradu kuugu timaaddo hab waxyi ah, waxa ay noqoneysaa mid xaqiiqo ah, waayoo halka ay ka timid waa meel xaq ah oo ka fog beenta.

﴿ وَمَن يَقْنَطُ مِن رَّحْمَةِ رَبِّهِ إِلَّا الضَّالُّونَ ﴾

"Yaa ka quusta naxariista rabbigiis

kuwa baadida ah mooyee"

Naxariista Alle Subxaanahu wa Tacaalaa waa ka ballaaran tahay wax kasta, Sidaas darteed, qaado qaacidadaan:

Qofkii u maleeyo in uu Alle u naxariisan doono, waxa uu maleeyay ayuu leeyahay; qofkiise maleeyo inuusan Alle u naxariisan doonin, isaguna waxa uu maleeyay ayuu leeyahay.

Alle Subxaanahu wa Tacaalaa wuxuu leeyahay xadiisul qudsi: "Anigu waxaan ahay sida uu addoonkeyga iga maleynayo, haddii uu iga maleynayo kheyr, waan siin doonaa, haddii uu iga maleynayo shar, sidoo kale waan siin doonaa."

Haddaba haka quusan naxariista Rabbigaaga, waayo, Ilaah kale ma jiro isaga mooyee.

﴿ فَاصْفَحِ الصَّفْحَ الْجَمِيلَ ﴾

"Iska saamax saamixid quruxsan"

Waa addoon wanaagsan kan qalbigiisu nadiifka yahay, oo marka uu wax cafinayo toos u cafiyo, ma aha cafis ku dhisan faan iyo cabasho.

Qofka qalbigiisu nadiifka yahay, laabta kuma xanbaaro cadho iyo xumaan.

Haddaba, si qurux badan u cafi, addoonkii Alloow.

﴿ وَسَبِّحُوهُ بُكْرَةً وَأَصِيلًا ﴾

"Weyneeya aroortii iyo galabtii"

Marka qorraxdu soo baxdo, kusoo dhawey tasbiix, marka ay qoraxdu dhacdana ku sagooti tasbiix, Taasi waxay kaa caawinaysaa inaad maalintii oo dhan xasuusato Ilaahaaga, sidoo kale waxay kaa caawineysaa inaad xajisato qalbigaaga.

﴿ يَا أَيُّهَا النَّبِيُّ قُل لِأَزْوَاجِكَ وَبَنَاتِكَ وَنِسَاءِ الْمُؤْمِنِينَ ﴾

"Nabiyoow ku dheh haweenkaaga iyo gabdhahaada iyo haweenka mu'miniinta"

Addoonkii Alloow

Haddii aad dadka amreyso wannaaga, ka bilow qoyskaaga iyo ehelkaaga marka hore, waayoo iyaga ayaa ah dadka ugu mudan in aad wannaaga ku dhiirrigaliso

oo u naseexeyso.

﴿ نَحْنُ نَقُصُّ ﴾

"Annagaa kaaga qisoon"

Alle swt qisaska ugu wanaagsan ayuu u bandhigay Nebiga iyo saxaabadii, Sidaas darteed, muslimiinta haka hor istaagin in ay qisaskaas ka qaatan cashar iyo cibro.

Eeg halkan,

Boqorka awooda u saxiibka ah ayaa kuu sheekeynaya.

Ma taqaana sababta?

Sababtoo ah qisasku waxay jilciyaan qalbiyada oo saameyn ku yeeshaan, Qofka murugsan wuu weheshadaa, qofka daciifka ah wuxuu ka helaa awood, qofka faashilka ahna waxay u horseedaa guul, Qofka cibaadada ka gaabiyayna wuxuu dib ugu laabtaa Rabbigiis, qofka wanaagsanna wuxuu sii wadi doonaa wanaagiisa.

﴿ وَهُوَ الَّذِي يَقْبَلُ التَّوْبَةَ عَنْ عِبَادِهِ ﴾

"Rabbi waa kan aqbala tawbada addoomadiisa"

Addoonkii Alloow

Addoontii Alloow

U degdeg oo u dadaal tawbada, waayo Rabbiga dambi dhaafaha ah wuu ku farxaa tawbadiinna, si ka badan farxadda nin ka badbaaday halaag la hubo, kana sii farxad badan ninkii helay adduun dhan isagoo muddo faqri iyo saboolnimo ku jiray.

﴿ فَلَمَّا جَاءَهُم بِآيَاتِنَا إِذَا هُم مِّنْهَا يَضْحَكُونَ ﴾

“Markuu ula yimid aayaadkanaga

waxay noqdeen kuwo ku qosla"

In lagu jeesjeeso dadka xaqa ugu yeeraya dadka kale ma aha wax ka cusub dadka baadilka wado, waayo Nebi walba waxaa ku jees-jeesay qoomkiisa, Laakiin Nebiyadu xaqa way ku adkaysteen oo ku sugnaadeen, ilaa uu Alle SWT xaqa ka dhigay mid ka guuleysta dadka baadilka wado, Xaqana wuxuu ka dhigay mid ka sarreeya dulmiga, dhibkiinna wuu ka fayday Nebi walba.

﴿ الحَيُّ الْقَيُّومُ ﴾

"Waa rabbiga nool khalqigana maamula"

Ibnul Qayyim (Alle ha u naxariistee) waxa uu yiri:

Suubanaha (NNKH) marka uu ducadiisa ku dadaalo waxa uu dhihi jiray: "Yaa Xayyu, yaa Qayyum."

Ku celcelinta "Yaa Xayyu, yaa Qayyum" waxa ay leedahay saameyn gaar ah ku leedahay aqbalidda ducada iyo in dhibaatooyinka lagaa dulqaado.

﴿ إِنَّ هَذَا أَخِي لَهُ تِسْعٌ وَتِسْعُونَ نَعْجَةً ﴾

"Kani waa walaalkay wuxuuna leeyahay

sagaal iyo sagaashan ido ah"

Laba nin ayaa u soo galay Nebi Daa'uud (CS) iyaga oo leh: "Xaq inagu garsoor." Hase yeeshee, inkastoo ay muran galeen, midkood ayaa yiri: "Kani waa walaalkay," ma uusan oran. "Kani waa colkayga."

Khilaafku ma burburin karo darbiga jacaylka, marka laga reebo kuwa qalbigoodu adag yahay, Qalbiga adagna waa mid ka fog Alle, Haddaba, noqo qof dabacsan oo dhaqan wanaagsan leh marka aad la macaamileys walaalkaaga Muslimka ah.

﴿ عَفَا اللَّهُ عَنكَ لِمَ أَذِنتَ لَهُمْ ﴾

"Alle haku cafiyee maxaad u idantay"

Maxaa ka qurux badan hadalka

Maxaase ka qurux badan canaanta!

Ilaahay wuxuu cafiyaa qaladka isaga oo aan sababta weydiin.

Ilaahoow, naxariis badanoow, maxaa kaa qurux badan!

﴿ وَأُمْلِي لَهُمْ ۚ إِنَّ كَيْدِي مَتِينٌ ﴾

"Waana sugi tan iyo muddo maamulka

rabbina waa xoog badan yahay"

Ummadda Nebi Muxamadeey,

Nabadgelyo ku seexda.

Si kasta oo ay u weynaato dhagarta cadowga diinta iyo hanuunka, ku kalsoonaada xaqiiqda ah in Alle uu ka weyn yahay dhagartooda.

﴿ فَمَا يُكَذِّبُكَ بَعْدُ بِالدِّينِ ﴾

"Maxaa gaalada u sababay beeninta

qiyaamada intaas kadib"

Banii'aadamoow

Maxaa kugu kalifaya inaad inkirto rususha, xisaabta aakhiro, iyo abaalmarinta, iyadoo Alle SWT uu kaa abuuray wax la'aan ilaa uu kaa dhigay wax jiro?

Ilaah baa nasahan oo ku sawiray oo qurxiyay abuurkaaga.

Ilaah baa nasahan oo ku tusay mucjisooyinkiisa cajiibka ah.

Ilaah baa nasahan oo kuu muujiyay awooddiisa weyn.

Waa Alle Weyne SWT!

﴿ فَإِذَا فَرَغْتَ فَانصَبْ * وَإِلَى رَبِّكَ فَارْغَب ﴾

"Markaad salaadda dhammayso isku dhib samo fal, rabbina Khayr ka rajee"

Haku tiirsan banii'aadamka hareerahaaga, kaliya ku tiirsanow albaabka Alle, Ka dhig rabitaankaaga oo dhan mid Alle u go'an, ha ahaato waxyaabaha aad adduunyada ka dooneyso ama aakhiro.

﴿ قُلْ يَا أَيُّهَا الْكَافِرُونَ ﴾

"Waxaad dhahdaa Gaalooy"

Ibnu Cabbaas Alle haka raalli noqdee waxa uu yiri, "Qur'aanka dhexdiisa ma jirto suurad Ibliis uu uga neceb yahay Suuradda Al-Kaafiruun, waayo, waxa ay ka hadleysaa tawxiid saafi ah iyo in shirkiga laga fogaado."

﴿ قُلْ هُوَ اللَّهُ أَحَدٌ ﴾

"Waxaad dhahdaa Nabiyoow Alle

waa kali wehelna maleh"

Tawxiidka iyo kali yelida (قُلْ هُوَ اللَّهُ أَحَدٌ)

Rabbi swt waa mid kaliya, waana mid ka fog dhammaan wax kasta oo ceeb ama qabyo nimo ah.

Hadalka ugu weyn iyo xuska ugu weyn waa "Laa ilaaha illAllaah", waayo waa eray daacadnimo iyo tawxiid, waa tawxiid aan waxba lagu darin, Alle swt waa kaliya midka mudan cibaadada, isaga mooyee cid kale oo mudan ma jirto, waana mid kaligiis ah.

﴿ اللَّهُ الصَّمَدُ ﴾

"Waa Sayyid deeqtoon"

As-Samad (اللَّهُ الصَّمَدُ) waa magac qalbiga ku abuuraya dareen heybad iyo qurux, As-Samad (اللَّهُ الصَّمَدُ) waa midka ay xaggiisa megan galaan addoomada, qof walbana uu gargaarsado, cid walbana ay magan gesho.

Qof walba aad buu ugu baahan yahay cid uu ku tiirsado, Allaaha sammadka ah ayaa mid la talla saarto ugu filan, Sidaas darteed, xilliga barwaaqada Alle ku tiirso si uu kuu garto xilliga dhibaatada, Marka aad Alle ku tiirsan tahay, naftaadu waxa ay dareemeysaa han iyo himilo sare, iyadoo dhibaatada iyo culeyskana uu kaa yaraanayo.

Intaas kadib, rabbiga sarreeye wuxuu furay albaab Awliyadiisa oo kaliya uma uusan furin ee wuxuu u furay dhammaan khalqigiisa, Taasi waa naxariistiisa iyo deeqsinimadiisa, Waa kuwaan mushrikiinta iyo kuwa diiday jiritaankiisa, marka ay dhibaato ku dhacdo oo ay indhaha saaraan geerida iyo halaagga, magan gelayo.

Allaaha sarreeye, iyaga oo ku dhawaaqaya "yaa Allaah, yaa Allaah," isaguna uu u gurmanaayo.

Wuxuu yiri Alle weyne, mushrikiintaas waxa ay qirayaan tawxiidka balse waxa ay xiran yihiin dharka kibirka iyo isla weynida, Haddaba, haddii makhluuqa uusan ku tiirsan Alle isaga oo jecel, wuxuu ku tiirsan doonna marka ay waayaha iyo dhibatoyinka cashir u dhigaan, Adigana, addoonkii Alloow, waxaa qasab kugu ah inaad is dejiso, waayoo Allaah swt mushrikiinta ayuu ka aqbalay ducadooda marka ay dhibaatada ku jireen.

Bal kawaran qof qiray kalinimadiisa, Nebiga na u qiray Nebinimada, Yeysan ku niyad jabin culeysyada waayoo rabbigaaga sarreeye ee aad magan geshay marna ku hoojini maayo.

Xasuusnow in sugitaanka farxadda iyo xasilinta naftaada ay tahay cibaado weyn oo ay qasab kugu tahay inaad macaansato, Sunanu Abii Daa'uud waxaa lagu xusay in suubanaha (ﷺ) uu galay masaajidka, waxaana uu maqlay nin ku duceysanaya: "Ilaahoow, midka kaligiis ahow, Waxaan ku weydisanayaa inaad ii danbi dhaafto, waayo adiga ayaa ah dambi dhaafe naxariis badan."

Wuxuu yiri suubanaha, "Waa loo dhaafay, waa loo dhaafay saddex mar."

Xadiis kale wuxuu ku yiri: "Waxaad Ilaah wax ku weydiisatay magac hadii wax lagu weydiisto uu wax bixiyo, haddii lagu baryana ajiibo."

Waa midka kaliya ee aan lala barbar dhigi karin magacyadiisa iyo sifooyinkiisa kale, "As-Samad" waa midka dhammaan makhluuqaadka ku tiirsan yihiin. Ilaahoow, Yaa Allaah, midka kaligiis ahow, midka addoomada ay ku tiirsan yihiin, waxaan ku weydiisaneynaa inaad ina siiso Jannatul Firdaws, iyo wax kasta oo inoo dhoweynaya jannadaas oo hadal iyo ficil ah, Waxaan kaa magan galeynaa adiga, naarta iyo wax kasta oo inoo dhaweeynaya oo hadal iyo ficil ah.

﴿ لَمْ يَلِدْ وَلَمْ يُولَدْ ﴾

"Alle wax ma dhalin isna lama dhalin"

Rabbigeyga sarreeye wuu ka sarreeya in uu yeesho lamaane ama ubad, waa sayyid ay sayyid nimadiisu dhammeystiran tahay, waa sharfane sharafkiisu sarreeyo, waa ilaaha ka weyn wax walba, weynidiisuna ay dhameystirantahay, waa dhimriyaha dhimrintiisu ay dhameystiran tahay, waa hantiile hodantinimadiisa wax gaara aysan jirin.

Waa dhab tilmaamahaas isaga oo kaliya ayaa u qalma rabbigayga sarreeyay, Ilaah swt waa mid aan waxba cunin oo waxba cabin, waa midka wax quudiyo isagana aan la quudin, Allaah swt wax udhigma ma jiraan waa boqorka boqorrada oo idil jalla jallaaluh.

﴿ وَلَمْ يَكُن لَّهُ كُفُوًا أَحَدٌ ﴾

"Wax lamid ah ma jiro Alle"

Waxba yaanu kula weynaan addoon daciif ah oo dhammaadkiisu yahay carrada, adiga oo ka tagaya rabbigaaga sarreeyay ee aan wax lala barbardhigaa aysan jirin, Isagu waa midka kaliya ee hari doonna, innaguna waan dhimaneynaa, Rabbi ayaa xumaan oo dhan ka hufan maalinta uu ku dhawaaqayo iyadoo khalqiga oo dhan ay dhinteen, samada iyo dhulkaana sida buug loo laabbay.

Waxaan ahay midka awoodda leh ee ka sarreeya addooma-diisa.

Waxaan ahay midka awoodda leh ee ka sarreeya addoomadiisa.

Waxaan ahay midka awoodda leh ee ka sarreeya addoomadiisa.

﴿ وَقَرَّبْنَاهُ نَجِيًّا ﴾

"Waan soo dhawaynay annagoo la hadli"

Haddii aad dooneyso inaad noqoto mid Alle weyne udhow, waa inaad ku dadaashaa oo aad si joogto ah u ducaysato adigoo Ilaah baryaya.

﴿ فَأَمَّا مَن ثَقُلَتْ مَوَازِينُهُ * فَهُوَ فِي عِيشَةٍ رَّاضِيَةٍ ﴾

"Ruuxiise miisaankiisa cuslaado,
wuxuu ku noolaan nolol raalli ah"

Waxyaabaha miisaanka culeyska ku kordhiya waxaa ka mid ah:

سبحان الله وبحمده ... سبحان الله العظيم

Subxaan Allaahi wa bixamdiihi, Subxaan Allaahil Cadiim.

Rabbiga Caalamkow, miisaankeenna xooji.

﴿ وَمِنْ آيَاتِهِ خَلْقُ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَمَا بَثَّ فِيهِمَا مِن دَابَّةٍ ۚ وَهُوَ عَلَىٰ جَمْعِهِمْ إِذَا يَشَاءُ قَدِيرٌ ﴾

"Calaamooyinkiisa waxaa kamid ah abuuridda samooyinka iyo dhulka iyo wuxuu ku fidiyay (ku abuuray) dhexdooda oo socda Rabbina inuu soo kulmiyo dhammaantood markuu doono wuu karaa"

Allaah SWT wuu awooda inuu maalinta Qiyaamaha isu keeno dadkii hore iyo kuwa dambe iyo dhammaan makhluuqaadka!

Haddaba, sidee buusan u awoodeyn inuu isu keeno laba qof oo isaga dartii isu jeclaatay?

Sidee buuna u awoodeyn inuu isu keeno laba qof oo dartii ku kala tagay?

Rabbigey wuu ka sarreeya taas.

Taas badalkeedna, wuu awoodda wax walba Rabbigey.

Isagu waa Allaah!!

Isagu waa Allaah!!.

﴿ هُوَ عَلَيَّ هَيِّنٌ ﴾

"Wuu u fududyahay korkayga"

U sheeg qalbigaaga oo u dir farriin: "Wax kasta oo aan macquul ahayn way dhici doonaan."

Nebi Zakariya (CS) iyo Maryam (CS) waxay u maleeyeen in waxyaabaha aan suurtagalka ahayn ay san dhici karin, laakiin jawaabta ayaa uga timid Alle:

﴿ هُوَ عَلَيَّ هَيِّنٌ ﴾

"Wuu u fududyahay korkayga"

Sidaas darteed, xasil, waayo, wax walba waa fudud yihiin marka Alle uu ka dhigo.

﴿ كَذَّبَتْ ثَمُودُ وَعَادٌ بِالْقَارِعَةِ (4) فَأَمَّا ثَمُودُ فَأُهْلِكُوا بِالطَّاغِيَةِ (5) وَأَمَّا عَادٌ فَأُهْلِكُوا بِرِيحٍ صَرْصَرٍ عَاتِيَةٍ (6) سَخَّرَهَا عَلَيْهِمْ سَبْعَ لَيَالٍ وَثَمَانِيَةَ أَيَّامٍ حُسُومًا فَتَرَى الْقَوْمَ فِيهَا صَرْعَىٰ كَأَنَّهُمْ أَعْجَازُ نَخْلٍ خَاوِيَةٍ (7) فَهَلْ تَرَىٰ لَهُم مِّن بَاقِيَةٍ ﴾

"Waxa beeniyeen reer (thamuud) iyo (caadba) qiyaamada, Thamuudse waxaa lagu halligay qaylo daran, Caadna waxaa lagu halligay dabayl daran oo qabow, oo lagu diray korkooda toddoba habeen iyo siddeed maalmood oo israacsan waxaadna arkaysaa iyagoo daadsan ood mooddo jirrid timir (dogob dhacay)"

Banii Aadamow, ogow in Allaah SWT uu yahay mid dulqaad badan, laakiin ciqaabtiisu waa mid adag oo xanuun badan.

Ogow in qof kasta, ha ahaado dadkii hore ama dadka hadda, cid kasta oo Allaah la tartanta uu halaagi doono, Qofkii Allaah ku caasiyooba, ee isku daya inuu Allaah kula tartamo awooddiisa iyo boqortooyadiisa, wuu burburin doonaa oo baabi'in doonaa.

Waxaad arki doontaa addoonkaas fashilmay, isaga oo baaba'ay.

Xasuusnow intaadan kibirin, inaadan ahayn qofka ugu horreeya ee Allaah kula tartama boqortooyadiisa, waa inaad u fiirsato halkaas cidda ku guuleysatay, Shaki la'aan waa Allaah boqorka boqorrada, aaway dadkaas hadda? Waa hore ayuu ka taqalusay dhammaantood."

﴿ فَهَلْ تَرَىٰ لَهُم مِّن بَاقِيَةٍ ﴾

"Wax ka hadhay miyaad aragtaa"

Ku cibra qaado, addoonkii alloow...

﴿ وَتِلْكَ الأَيَّامُ نُدَاوِلُهَا بَيْنَ النَّاسِ ﴾

"Waa sidaas adduunyadu waxaanu
ku kala wareejinaa dadka dhexdiisa"

Wareegto waa Kala-guurka xaalad ilaa xaalad

- Murug ilaa farxad
- Xanuun ilaa caafimaad
- Faqri ilaa hodantinimo.

Caksigana waa ay noqon kartaa

Haddaba ha murugoon, kaliya waa maalmo, ma aha bilooyin iyo sannado, haddii Alle idmo, Ogoowna in maalmuhu aysan ku jirin hal xaalad oo kaliya.

Naftaada qanci oo wanaaji waxa aad Alle ka maleyneeso.

﴿ وَاسْتَعِينُوا بِالصَّبْرِ وَالصَّلَاةِ ﴾

"Kaalmaysta samirka iyo salaadda"

Xudeyfah Alle haka raalli noqdee wuxuu yiri: "rasuulka Alle (ﷺ) marka uu arrin adag la kulmo salaad ayuu tukan jiray".

Salaadda ayaa ku bareysa habkii aad u istaagi laheyd marka aad kufto, sidaas darted Ibnu Cabbaas markii loo sheegay geerida walaalkiis isaga oo safar ah, wadada dhinaceeda ayuu ku tukaday salaad isaga oo hoggaansamaya amarka Alle ee ah kaalmeysta salaadda iyo samirka, sidas darteed xalka walbahaarkaaga waa in aad hor istaagto rabbigaaga oo gacmaha u taagato isaga, oo bishaareyso addoonkii alloow

Aayaddaana maskaxdaada ku qabo marwalbana indhahaaga ku haay.

﴿ ثُمَّ أَنزَلَ اللَّهُ سَكِينَتَهُ عَلَىٰ رَسُولِهِ وَعَلَى الْمُؤْمِنِينَ ﴾

"Markaas Alle kusoo dajiyey xasilkiisii rasuulkiisii iyo mu'miniintii"

Ibnu Al-Qayyim (Alle ha u naxariisto) ayaa yiri: Ibnu Teymiya (Alle ha u naxariisto) marka ay arrin ku adkaato, wuxuu akhriyi jiray aayadaha degenaanshaha, Aniguna waan tijaabiyey akhrinta aayadahaan marka qalbigu laba labeeyo, waxaana ka arkay saameyn weyn oo degenaansho iyo xasillooni ah, Allaah SWT wuxuu aayadahaas degenaanshaha ku sheegay Kitaabkiisa shan meelood oo kala duwan, kuwaas oo ah:

﴿ ثُمَّ أَنزَلَ اللَّهُ سَكِينَتَهُ عَلَىٰ رَسُولِهِ وَعَلَى الْمُؤْمِنِينَ ﴾

"Markaas Alle kusoo dajiyey xasilkiisii rasuulkiisii iyo mu'miniintii"

﴿ إِذْ يَقُولُ لِصَاحِبِهِ لَا تَحْزَنْ إِنَّ اللَّهَ مَعَنَا ۖ فَأَنزَلَ اللَّهُ سَكِينَتَهُ عَلَيْهِ وَأَيَّدَهُ بِجُنُودٍ لَّمْ تَرَوْهَا ﴾

"Markuu saaxibkiis ku lahaa ha walbahaarin, Alle ayaa inala jiree, oo Alle ku dajiyay xasilkiisa kuna xoojiyay januud aydaan arkayn"

﴿ هُوَ الَّذِي أَنزَلَ السَّكِينَةَ فِي قُلُوبِ الْمُؤْمِنِينَ لِيَزْدَادُوا إِيمَانًا مَّعَ إِيْمَانِهِمْ ﴾

"Alle waa kan ku dajiyay xasilloonida quluubta mu'miniinta si ay iimaan ugu siyaadsadaan iimaankoodii"

﴿ لَّقَدْ رَضِيَ اللَّهُ عَنِ الْمُؤْمِنِينَ إِذْ يُبَايِعُونَكَ تَحْتَ الشَّجَرَةِ فَعَلِمَ مَا فِي قُلُوبِهِمْ فَأَنزَلَ السَّكِينَةَ عَلَيْهِمْ وَأَثَابَهُمْ فَتْحًا قَرِيبًا ﴾

"Alle wuu ka raalli noqday mu'miniinta markay kugula ballantamayeen Nabiyow Geedka hoostiisa, Rabbina waa ogaaday waxa Quluubtooda ku sugan, wuxuuna ku dajiyay xasillooni, wuxuuna ku abaal marin fatxi (nasri) dhaw."

﴿ إِذْ جَعَلَ الَّذِينَ كَفَرُوا فِي قُلُوبِهِمُ الْحَمِيَّةَ حَمِيَّةَ الْجَاهِلِيَّةِ فَأَنزَلَ اللَّهُ سَكِينَتَهُ عَلَىٰ رَسُولِهِ وَعَلَى الْمُؤْمِنِينَ ﴾

"Xusuusta marka Alle yeelay kuwii gaaloobay Quluubtooda islawayni iyo cadho, sidii isla waynidii iyo cadhadii jaahiliinta oo Alle ku dajiyay xasilloonidiisii Rasuulkiisa korkiisa iyo mu'miniinta,"

﴿ إِنَّمَا نُطْعِمُكُمْ لِوَجْهِ اللَّهِ لَا نُرِيدُ مِنكُمْ جَزَاءً وَلَا شُكُورًا ﴾

"Iyagoo dhihi waxaan idiin quudinnay dar Alle, mana idinka doonaynno abaalmarin iyo mahadnaq midna"

Ha murugoon haddii aad wanaag u sameyso dadka oo ay ku xumeyaan erayo aan fiicneyna kugula hadlaan.

Ka dhig hal heyskaaga hadalka Alle SWT ee ah:

﴿ لا نُرِيدُ مِنكُمْ جَزَاءً وَلَا شُكُورًا ﴾

"mana idinka doonaynno abaalmarin

iyo mahadnaq midna"

Wallaahi, Allaah SWT ma illoobi doono waxa aad sameysay, waxaadna heli doontaa abaal marin, waayo waxaad tahay addoonkiisa...

﴿ إِنْ عَلَيْكَ إِلَّا الْبَلَاغُ ﴾

"Korkaaga ma aha waxaan gaadhsiin ahayn"

Tusaale ahaan, haddii wiilkaaga, walaalkaa, ama Saxiibkaa uu ka leexdo jidkii xaqqa ahaa, ma leedahay awood aad qalbigiisa ku hagto?

Qalbiyada waxay ku dhex jiraan laba farood oo faraha raxmaanka ah, isaga ayaa dhinaca uu doonno u rogaya. Adiguse waxaa lagaaga baahan yahay gaarsiin.

Ku samir imtixaankaas, oo ku ajir xisaabso dacwadaas aad gaarsiineyso.

U ducey habeenka iyo maalinta, kadibna sug farxadda, addoonkii Alloow.

﴿ ادْعُونِي أَسْتَجِبْ لَكُمْ ﴾

“I barya aan idinka ajiibee”

Bilow adiga, Alle SWT wuxuu kuu raaci doonaa arrintaada.

﴿ لِتَحْكُمَ بَيْنَ النَّاسِ بِمَا أَرَاكَ اللَّهُ ﴾

"Inaad ku kala xukunto dadka dhexdiisa wuxuu ku tusiyo Alle"

Alle SWT wuxuu la hadlayaa Rasuulka (ﷺ) isagoo inoo muujinaya arrin muhiim ah oo ay tahay in dhammaan Muslimiinta ay u hogaansamaan, taasoo ah in Rasuulka (ﷺ) uusan ku lug yeelanayn go'aannada Alle, Rasuulka waa wakiilkii Alle, lagana rabo kaliya inuu dadka gaarsiyo amarka Alle, isla markaana uu dadka ku amro waxa Alle amray, Anaguna waxaa la inaga doonayaa inaan dhahno: "Waan maqalnay, waana u hogaansanay."

Haddaba sidaas darteed, ha ku dhiirranin inaad farageliso xukunka Alle oo aad tiraahdo. "Tani waa aragtideyda," marka ay timaado arrin aad waajib ku tahay qaadashadeeda. Maxaa yeelay, amarka Alle marka uu yimaado, aragti kale ma jirto.

﴿ فَلَا تُطِعِ الْكَافِرِينَ وَجَاهِدْهُم بِهِ جِهَادًا كَبِيرًا ﴾

"Ha adeecin gaalada kulana jahaad

quraanka jahaad weyn"

Ku socota dadka dacwada Alle ugu yeera dadka kale:

Haddii aad rabtaan guul, ku dadaala Qur'aanka, waana in uu saldhig u noqdaa dacwadiinna.

﴿ فَلَمَّا كَشَفْنَا عَنْهُ ضُرَّهُ مَرَّ كَأَن لَّمْ يَدْعُنَا إِلَىٰ ضُرٍّ مَّسَّهُ ۚ ﴾

"Markaan ka faydno dhibka wuu iska socdaa

sidii isagoon na baryinba dhibkii taabtay"

Allaah SWT waa ogyahay mustaqbalka iyo waxa dhici doona.

Eeg halkaan

Allaah wuu ka faydaa dhibaatadooda, isagoo og in ay markaas kadib hilmaami doonaan mahadnaqiisa.

Waa sida uu Rabbigu addoomadiisa ugu naxariisto, mana heli karno cid nooga caddaalad iyo daryeel fiican Rabbi.

Yaa Rabbi, adiga ayey kuu sugnaatay mahad iyo ammaan oo dhan, waqti walba iyo xilli walba.

﴿ وَادْعُ إِلَى رَبِّكَ ﴾

"Ugu yeedh xagga rabbigaa"

Haddii aad dooneyso ganacsi aan khasaaro lahayn, dadka ugu yeer Allaah...

maxaa yeelay dacwada Allaah waa ganacsi faa'iido leh, oo waxtar badan, waana kaarka guusha ee loogu talagalay qof kasta oo raadinaya faa'iidada dhabta ah ee aduunka iyo aakhiro.

﴿ وَالسَّارِقُ وَالسَّارِقَةُ ﴾

"Tuugga iyo Tuugadda"

Xatooyadu waa ficil xun labada dhinacba, laakiin ragga ayay uga foolxumo badan tahay, maadaama ay awoodaan inay dadaalaan oo ay raadsadaan risqigooda.

﴿ الزَّانِيَةُ وَالزَّانِي﴾

"Zaaniyadda (haween) iyo Zaaniga (Ragga)"

Sinnadu waa fal foolxun labada dhinacba, laakiin haweeneyda ayay uga foolxumo badan tahay marka loo eego ninka, maadaama ay leedahay xishood iyo

dhowrsanaan dabiici ah.

﴿ مَا سَمِعْنَا بِهَٰذَا فِي آبَائِنَا الْأَوَّلِينَ ﴾

"Manaan ka maqlin arrintaan aabayaalkanagii horeeyay"

Qof walba oo Muslim ah waxaa waajib ku ah inuu muujiyo xaqa oo uu dadka ugu yeero, si aanay u imaan jiil dambe oo ka yiraahda diinteenna: Manaan ka maqlin arrintaan aabayaalkanagii horeeyay

﴿ فَاسْتَمْسِكْ بِالَّذِي أُوحِيَ إِلَيْكَ ﴾

"Qabso waxa laguu waxyooday Nebiyoow"

Haddii dadka ay ku haftaan jacaylka shahwada iyo shubuhaadka, ku dhegnaaw waxa laguu waxyooday.

Ku dhegnaaw Qur'aanka si aad uga badbaado inaad adiguna la hafato.

﴿ يَوْمَ يَتَذَكَّرُ الْإِنسَانُ مَا سَعَىٰ ﴾

"Maalintaas dadku way xasuusan waxay faleen"

Waxaa dhici karta inaad hilmaanto camalkaaga wanaagsan iyo kan xunba, laakiin waxaa lagu qoray kitaab aan wax yar iyo weyn midna ka tageyn, Haddaba, naftaada u sameey wax ku farxad geliya maalinta aad la kulanto Rabbigaaga.

﴿ وَلَا تَهِنُوا وَلَا تَحْزَنُوا ﴾

"Ha tabar yaraanina hana murugoonina"

Ibnu Al-Qayyim, Alle ha u naxariistee, wuxuu yiri: Sababta murugada Qur'aanka loogu xusay waa inaad ka fogaato, waayo qalbiga uguma jirto wax dan ah, sheydaankana aad ayuu u jecel yahay.

Haddaba ha murugoon, maxaa yeelay waxaad tahay addoonkii Alle ee xoogga badnaa, ee ma tihid addoonkii shaydaanka ee tabarta yaraa.

﴿ وَنُقَلِّبُ أَفْئِدَتَهُمْ ﴾

"Waxaanu gaddin quluubtooda"

Xukunka qalbigaaga adiga gacantaada kuma jiro, qalbiga waxaa laga maamulaa boqorka boqorrada xaggiisa, Si qalbigaaga u noqdo mid wanaagsan, waxaad u baahan tahay inaad u dhawaato Alle, boqorka qalbiyada rogrogo, si qalbigaaga uu uguso dhaweeyo waxa anfacaya oo uga dheereyo waxa dhibaya.

﴿ فَنَادَىٰ فِي الظُّلُمَاتِ ﴾

"markaas ayuu mugdiyada ka dhex dhawaaqay"

Nebi Yoonis (CS) wuxuu u yeeray Rabbigiisa isagoo ku jira mugdiga habeenka, badda dhexdeeda iyo caloosha nibiriga.

Haddaba, noqdo Yoonis oo leh rajo, hana niyad jabin.

﴿ وَاللَّهُ أَحَقُّ أَن تَخْشَاهُ ﴾

"Alle ayaa mudan in laga cabsado"

Ogoow in miisaanka dhabta ah ee iimaanka Alle iyo ka cabsashadiisa ay tahay inaad uga cabsato meel isaga mooye cid kale aaney kaa arkeyn

Si dhab ah u ogow xaqiiqada dhabta ah ee banii'aadamka, in ay soo baxdo marka uu keligii yahay, ee ma aha marka uu dadka dhex joogo, Waayo, dadka hortooda kuma sameyn karo wax xun, marka laga reebo qofka doqonka ah, Laakiin qofka caqliga leh ee dib isu baarayaa oo isweydiinayaa, " iimaankeygu ma mid xaq ah baa mise waa bukaan?"

"Ma fiicanahay mise waxaan ahay mid xun?"

Marka uu qofku keligii noqdo, ayay si cad u soo baxda waxa uu dhab ahaan yahay.

﴿ إِيَّاكَ نَعْبُدُ وَإِيَّاكَ نَسْتَعِينُ ﴾

"Adiga unbaan ku caabudaynaa adiga

unbaana ku kaalmo weydiisaneynaa"

Addoonka marka uu salaadda ku jiro ee uu gaaro aayaddaan, Allaah SWT wuxuu leeyahay: "Tani aniga iyo addoonkeyga ayey innaga dhaxeeya, addoonkeygana

wixii uu i weydiisto ayuu leeyahay."

Rabbiyoow, annaga iyo adiga waxa innaga dhaxeeyo waa inaan ku caabudno, adigana waxaad tahay Rabbigeenna ayna cidna cibaadada la wadaagin.

﴿ أَنِ الْحَمْدُ لِلَّهِ رَبِّ الْعَالَمِينَ ﴾

"Mahad Alle ayaa iska leh ee barbaariyaha caalamka ah"

Ilaaheyga,

Abuurahayga,

Sayyidkayga...

Anigu waxaan ahay addoonkaaga daciifka ah...

Waxaan doonayaa inaan ku ammaano oo aan ku muujiyo waxa qalbigayga ku jira, laakiin...

Qalbigu wuu gariirayaa!

carabkeyguna ma awooddo inuu cabbiro erayada, rabbiyoow adigu waxaad tahay sida aad naftaada ku ammaantay,

innaga aqbal waxa aad innagu nimceysatay aniga iyo qofka buuggaan akhrinayo, oo inoo dhaaf gaabisyadeenna yaryar.

Nabad gelyo dushooda ha noqoto kuwa hanuunka raaca.

# Gabagabada

Ammaanteyda, mahadcelinteyda iyo erayo raalli ahaansho oo aan waligood la ilaawi doonin ayaan u jeedinayaa Rabbigayga.

Alle mahaddii, waxaan dhameystiray qoraalkan buuggaan inta uu Alle ii suuragaliyay, Waxaan Alle ka baryayaa inuu iga aqbalo oo ay ka faa'iideystaan dhammaan addoomada.

Nabadgelyo iyo naxariis Alle ha ugu deeqo Nebigeenna Muxammad (ﷺ) iyo dhammaan qoyskiisa iyo asxaabtiisa.

Maxaad is leedahay waad ka faa'iiday akhrinta buuggaan?

# DHAMAAD

## Mahadsanid